# Siyaasadda Baahinta Maamulka ee Puntland

# 2014-2020

**Qabyo Qoraalkii ugu dambeeyay July 2014**

TUSMADA BUUGGA

***Ereyo Gaabsan***.......................................................................................*Error! Bookmark not defined.*
***Qeexitaanada Shaqo***.......................................................................................*Error! Bookmark not defined.*
***Warbixinta oo Kooban***.......................................................................................*Error! Bookmark not defined.*

**1 Horudhac** ....................................................................................... Error! Bookmark not defined.

**2 Ujeeddooyinka Siyaasadda iyo Himilada Baahinta Maamulka ee Puntland**................Error! Bookmark not defined.

*2.1 Fikradaha Guud ee Mabda'a Baahinta Awoodda*.................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.2 Sifooyinka Baahinta Maamulka Siyaasadeed*......................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.2.A Doorashada Gollayaasha Degaanka*...........................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.2.B Ka Qaybqaadashada Muwaadinka Go'aan Gaarista*..........................***Error! Bookmark not defined.***
*2.2.C Mas'uuliyiin Degaanka Laga Soo Magacaabay*.................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.3 Sifooyinka Baahinta Maamulka Maamuleed*.......................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.A* Awoodaha Nidaaminta iyo Qorshaynta Kabayaasha *Degaanka*.........***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.B* Maamulka Maaliyadda Guud iyo Wax Soo-iibsashada ee Degaanka...***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.C Maamulka Shaqaalaha ee Degaanka* .................................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.D Maamulka Adeegyada Guud ee Degaanka*..........................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.E* Awood kalageynta Bixinta Adeegyada.................................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.3.F Baahinta Maamulka Bixinta Adeegyada Guud*.................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4 Sifooyinka Baahinta Maamulka Maaliyadeed*.....................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.A Qoondaynta Kharashka* ............................................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.B Qoondaynta Dakhli iyo Maamulka Dakhliga Degaanka*....................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.C Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha ka Dhaxeeya* ..............................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.D Deynta iyo Deynsashada Dowladda Hoose* .......................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.E Isku dheelitiridda Siman ama Qumman*..............................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.F Waadaxnimada Qaacidooyinka Qoondaynta*...................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.G Awoodda Maaliyadeed* .......................................................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.H Waajibaadyada Aanan La Maalgelinin*..............................................***Error! Bookmark not defined.***
*2.4.I Aasaaska Qoondaynta Kala Duwan ee Loogu Talogalay Degaamada Miyiga iyo Magaalooyinka* .........................................................................................***Error! Bookmark not defined.***

**3 Xaaladda Baahinta Maamulka ee Puntland** ..............................Error! Bookmark not defined.

*3.1 Qorshaha Sharci*...........................................................................***Error! Bookmark not defined.***
***3.2*** *Baahinta Siyaasadeed*..............................................................*Error! Bookmark not defined.*
*3.2.A Doorashada Gollayaasha Degaanka*.................................................***Error! Bookmark not defined.***
*3.2.B Ka Qaybqaadashada Muwaadinka Go'aan Gaarista* .........................***Error! Bookmark not defined.***
*3.2.C Mas'uuliyiin Degaanka Laga Soo Magacaabay*................................***Error! Bookmark not defined.***
***3.3*** *Baahinta Maamulka* ...........................................................................*Error! Bookmark not defined.*
*3.3.A* Awoodaha Nidaaminta iyo Qorshaynta Kabayaasha *Degaanka*..........***Error! Bookmark not defined.***
*3.3.B* Maamulka Maaliyadda Guud iyo Wax Soo-iibsiga ee Degaanka........***Error! Bookmark not defined.***
*3.3.C Maamulka Shaqaalaha ee Degaanka* .................................................***Error! Bookmark not defined.***
*3.3.D Maamulka Adeegyada Guud ee Degaanka*.........................................***Error! Bookmark not defined.***
***3.4*** *Baahinta Maamulka Maaliyadeed*...........................................................*Error! Bookmark not defined.*
*3.4.A Qoondaynta Kharashka* ............................................................***Error! Bookmark not defined.***
*3.4.B Qoondaynta Dakhli iyo Maamulka Dakhliga Degaanka*.....................***Error! Bookmark not defined.***
*3.4.C Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha ka Dhaxeeya* ..............................***Error! Bookmark not defined.***
*3.4.D Deynta iyo Deynsashada Dowladda Hoose* .......................................***Error! Bookmark not defined.***
*3.5 Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Halisaha (SWOT) ee Hirgelinta Baahinta Maamulka* ***Error! Bookmark not defined.***
*3.5.A Awoodaha*..........................................................................................***Error! Bookmark not defined.***
*3.5.B Daciifnimada*......................................................................................***Error! Bookmark not defined.***

*3.5.C Fursadaha* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*3.5.D Halisaha*..........

**4 Gundhigyada Loogu Baahan Yahay Hirgelinta Siyaasadda** .... Error! Bookmark not defined.
*4.1 Rabitaan Siyaasadeed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*4.2 Awood Dhisid* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*4.3 Qorshaha Sharci* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*4.4 Siyaasadda Qaran* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*4.5 Ilaha Dhaqaale* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*4.6 Shuruudaha Aasaasiga ah ee Dheeraadka ah* .......... ***Error! Bookmark not defined.***

**5 Yoolka 2020—Doorashada, Doorarka, Shaqooyinka iyo Dhaqaalaha Heerarka Kala Duwan ee Dowladda Puntand ay Yeelanayso Mustaqbalka** .......... Error! Bookmark not defined.
*5.1 Baahinta Maamulka Siyaasadeed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.1.A Qiimeynta Baahinta Maamulka Siyaasadeed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.1.B Doorashooyinka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.1.C Ka Qaybqaadashada Dadweynaha* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.1.D Ka Qaybgelinta* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2 Baahinta Maamulka Maamuleed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2.A Qiimeynta Maamulka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2.B Doorka Wasaaradaha Dhexe iyo Dowladaha Hoose* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2.C Qorsheynta iyo Aasaaska Heerarka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2.D Hirgelinta* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.2.E Korjoogteynta iyo Qiimeynta* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3 Baahinta Maamulka Maaliyadeed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3.A Qiimeynta Baahinta Maamulka Maaliyadeed* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3.B Qoondaynta Kharashka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3.C Ilaha Dakhliga* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3.D Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha ka Dhaxeeya* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*5.3.E Deynsashada* .......... ***Error! Bookmark not defined.***

**6 Baahinta Awoodda Laamaha** .......... Error! Bookmark not defined.
*6.1 Gaadiidka iyo Waddooyinka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*6.2 Waxbarashada* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*6.3 Caafimaadka* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*6.4 Biyaha, Fayodhawrka, iyo Nadaafadda (WASH) (oo ka mid ah qashinka adkaha ah)* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*6.5 Khayraadka Dabiiciga ah* .......... ***Error! Bookmark not defined.***

**7 Hirgelinta iyo Korjoogteynta Siyaasadda** .......... Error! Bookmark not defined.

Lifaaqyada:

*Lifaaqa A: Qiimeynta Baahinta Maamulka, Dowladda Hoose ee Maamulka La Baahiyay iyo Waaxda Dadweynaha ee Degaanka ee Puntland*
*Lifaaqa B: Qorshe Hawleedka Baahin Maamulka*
*Annex C: Dhacdo Taariikheedyada Waaxaha*

Liisaska Jaantusyada :

*Jadwalka 1 Isugeynta Kharashyada Dowladda– Sannadka Gundhigga 2012*... ***Error! Bookmark not defined.***
*Jadwalka 2 Kharashyada Qardho* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*Jadwalka 3 Isugeynta Dakhliga Dowladda- S annadka Gundhigga 2012* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*Jadwalka 4 Ilaha Dakhliga Qardho* .......... ***Error! Bookmark not defined.***
*Jadwalka 5 Qoondaynta Shaqooyinka Xudunta Maamulka iyo Mas'uuliyada* ***Error! Bookmark not defined.***

## *Ereyo Gaabsan*

| | |
|---|---|
| APD | Hay'adda Horumarka iyo Nabadda ee Afrika |
| ILO | Hay'adda Shaqada ee Adduunka |
| IMC | Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha ee Qaabilsan Baahinta Awoodda |
| JPLG | Barnaamijka Wadajirka ah ee Ku Saabsan Maamulka Degaanka iyo Bixinta Adeegyada La Baahiyay |
| MCH | Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka |
| MoAI | Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka |
| MoERFWT | Wasaaradda Deegaanka, Daaqa, Kaymaha, Duurjoogta iyo Dalxiiska |
| MOF | Wasaaradda Maaliyadda |
| MoF | Wasaaradda Kalluumaysiga |
| MOI | Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladda Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga |
| MoLAH | Wasaaradda Xannaanada Xoolaha |
| MoPW | Wasaaradda Howlaha Guud |
| MTEF | Habka Kharashaadka Muddada-Dhexe |
| NGO | Urur Aan Dowli Ahayn |
| PEM | Maamulka Kharashaadka Dadweynaha |
| PPP | Shirkado Iskaashi Ganacsi oo Gaar Loo Leeyahay |
| PSAWN | Maamulka Dowladda Puntland ee Biayaha, Quwadda iyo Khayraadka Dabiiciga ah |
| SWOT | Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Halisaha, |
| UN | Qaramada Midoobay |
| UNDP | Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay |
| WASH | Biyaha, fayodhawrka iyo Nadaafadda |

## *Qeexitaanada Shaqo*[1]

Qorshaha Sharci: sharciyada iyo xeerarka lagu maamulayo waaxda iyo arrimaha siyaasadda gaarka ee la aasaasay si loo hirgeliyo istiraatiijiyada.

Qorshaha hay'adeed: bedelidda doorarka dowladda, u qoondeynta mas'uuliyadaha heerarka kala duwan ee dowladda.

Habka kor ka maamulidda: waa mabda loola jeedo in maamulka dhexe uu yeelanayo shaqo asaga hoos tagta oo uuna KALIYA qabanayo hawlahaasi marka aanan lagu qaban karin heerka maamulka hoose.

Awood-siin/xoojin: suurtagelinta in dadka ay qaadan karaan go’aanada ku saabsan arrimaha saameynaya arrimahooda bulsho.

Mas’uuliyad: dhammaan heerarka dowladda waxay mas’uul ka yihiin hubinta hirgelinta iyo maareynta barnaamijyada baahinta maamulka
iyo waxqabadyada waxtarka leh, hufan, ee aan dhib lahayn.

La-xisaabtan: waa shuruud muhiim ah ee loogu baahan yahay maamul wanaagga, kaasi oo lagu dabaqi karo shirkadaha gaarka ah iyo kuwa dadweynaha, sidoo kale ururada bulshada rayidka ah. Waa awooda loogu qabsan karo go’aan gaareyaasha heerarka kala duwan mas’uuliyadda waxqabadkooda.

Waadaxnimo: go’aanada la gaarey iyo meel-marintooda waxaa loo sameeyaa hab si adag u addeecsan xeerarka iyo sharciyada caadiga ah iyo qaab macluumaad la isku hallayn karo, roon, xaqiiq ah, wakhtigeeda dhacda, si fududna loo fahmi karo loona heli karo si lacag la’aan ah ayna si toos ah u heli karaan kuwa ay saameynayaan go’aanada noocaas ah iyo meel-marintooda eex la’aanta ah.

Xukunka Sharciga: helitaanka qorsheyaal sharci cadaalad ku dhisan oo loo fulinayo si eex la'aan ah eena u baahan dhawridda xuquuqaha aadanaha iyo xoriyadaha aasaasiga ah iyo ilaalintooda muhiimka ah. Waxay sidoo kale wuxuu u baahan yahay garsoor madaxbannaan oo ka go'an maamul eex la'an ah, dhakhso ah iyo ogolaanshaha gaarka ah ee cadaaladda iyo habka fulinta sharciga ee daacadda ah.

Caddaalad iyo u dhannaansho: Ladnaanta bulshada waxay ku xiran tahay hubinta in dhammaan xubnaheeda ay dareemaan in rayi ku leeyihiin aysana dareemin in laga saaray ama laga hayb soocay bulshada badankeeda. Haqab-tiridda rajooyinka waxay u baahan yihiin in dhammaan kooxaha, balse gaar ahaan kuwa ugu nugul, ay helaan fursado ay ku wanaajinayaan ama ku sii-wadanayaan ladnaantooda.

Tayada iyo hawl-karnimada: baahinta maamulka waxay tilmaamaysaa in hay'adaha iyo geeddi-socodyada ay soosaarayaan natiijooyin si ku filan u daboolaya mudnaanaha macaamiisha-muwaadiniinta ayadoo la sameynaya ka faa’iideysiga ugu fiican ee uguna qiimaha-badan ee khayraadyada dadweynaha ee aadka u yar.

Wadatashiga: waxaa jira daneeyeyaal dhawr ah ee ka kala socda heerarka kala duwan iyo dabaqada bulsho, xaqiiqdanina waxay u baahan tahay in dowlad wanaagga ay u kala dabqaado kooxaha danaha kala duwan ee bulshada si loo gaaro ra’yi ballaaran oo ku saabsan waxa ku jira danta ugu wanaagsan bulshada oo dhami iyo sida ujeeddada leh ahmiyadda ugu muhiimsan loo gaari karo. Wadatashiga wax ku oolka leh wuxuu u baahan yahay aragtida mustaqbal-fog oo ballaaran ee ku saabsan waxa loogu baahan yahay horumarinta

[1]Siyaasadda Baahinta Maamulka ee Qaran: Xaqiiqooyinka iyo Tallooyinka, Nabadda iyo Horumarka Afrika, Maarso 2012

aadanaha iyo bulsho-dhaqaale waarta taasi sida ugu fiican ka dhalanaysa fahanka waadaxa ah ee fikradaha guud ee bulshada, dhaqanka iyo taariikhda ee bulsho iyo/ama beel gooni ah.

Jawaabidda: Maamul wanaagga maamulkiisa baahsan wuxuu u baahan yahay in hay'adaha iyo geeddi-socodyada ay ugu adeegaan dhammaan daneeyeyaasha wakhti macquul ah gudahiisa.

Ka qaybqaadashada: Ka qaybqaadashada ee labaduba ragga iyo dumarka waa tiirka aasaaska u ah maamul wanaaga maamulkiisa baahsan waxaana loo meelmarin karaa midkood si toos shakhsiyaadka ama si aan toos ahayn ayadoo loo marayo hay'ado dhexe oo sharci ah ama ka jawaabid. Ka qabqaadashada waxay u baahan tahay in inta ku lugta leh la wargeliyo iyo/ama loo iftiimiyo xuquuqadooda iyo waajibaadyadooda iyo in la abaabulo, shuruud tilmaamaysa xoriyadda macquulka ah ee urur ku biiridda iyo cabiraadda ra'yiga.

Metalaad Dimoqraadiyadeed: Metalaadda dadka badankooda oo ku dhisan natiijooyinka doorashooyin caaddil ah, xor ah, caddaalad ah, lagu kalsoonaan karo, doorasho hufan ah, iyo aqbalaadda natiijooyinka ka soo baxa.

Baahinta Maamulka Siyaasadeed: ku wareejinta awoodda iyo dhaqaalaha gollayaasha degaanka ee la doortay ama xarumaha waaxeedka wasaaradaha ayadoo ujeeddadu ay tahay simidda waxqabadyada waaxeed ee baahiyada degaanka si sare loogu qaado bixinta adeegyada. Ujeeddadu waa sare u qaadidda iyo wanaajinta ka qaybqaadashada dadweynaha go'aan gaaridda siyaasadeed. Waxay tilmaamaysaa in maamulada degaanka laga soo doortay ay u qaadaan mas'uuliyad badan kuwa ayaga soo doortay ayna si wanaagsan ugu metalaan danaha degaanka geeddi-socodyada go'aan gaaridda siyaasadeed.

Baahinta Maamulka (shaqo qoondaynta): qaybinta mas'uuliyaddaha si loo fuliyo waajibaadyada guud ee maamulada dowladeed ee heerarka kala duwan ee dowladda. Mas'uuliyaddda qorshaynta gobolka- ama heerka-degaan, maareynta hawlaha, iyo qayb ahaan sidoo kale maalgelinta kaabayaasha iyo adeegyada waxaa laga soo wareejiyaa dowladda dhexe waxaana loo soo wareejiyaa maamulada heerka-hoose.

Baahinta Maamulka Maaliyadda: qoondaynta dakhliyada iyo hababka deeqda ee dowladda hoose sidaas awgeed waxay qaban kartaa shaqooyinka loo xilsaaray. Tani waxay keeni kartaa in isbedelo ku yimaada saamiga qaybta dadweynha ee maalgelinta guud ee dowladeed, ee xasiloonida maalgelinta adeegyada, iyo caddadyada la xiriira maalgelinta loo heli karo noocyada gaarka ah ee adeegyada. Isbedeladan waxay ku kala duwanaan karaan saameynta ay ku teelanayaan ee degaamada juquraafi ee saboolka ah iyo kuwa hodonka ah waxaana lala xiriirin karaa awoodaha kor loogu qaadayo dakhliga deegaanka iyo bixinta lacagaha la xiriira ee dowladaha hoose iyo dowladda dhexe.

Awood Kalageynta: dib u qaybinta mas'uuliyadaha qaybaha qaran-hoosaadka ee dowladda dhexe (tusaale, xafiisyada wasaaradaha ee gobolada). Waxay ka dhigan tahay qaabka ugu liita ee baahinta maamulka. Dadka qaarkood waxay ku doodaan in tani xataa aysan qayb ka ahayn baahinta maamulka sababta oo ah wareejinta mas'uuliyadda waxay kaliya ka dhex dhacdaa darajooyinka dowladda dhexe.

Wakiilashada: Qaab xoogan ee ah baahinta maamulka, oo loola jeedo dib u qaybinta go'aanka iyo mas'uuliyadda hawlgalka ee maamulada degaanka, kaasi oo ilaaliya heer qaar ee madaxbannaani ee laga helo dowladda dhexe walina ay tahay in ay ka warbixiso.

Xukun-wadaajin: qaabka ugu xooran ee baahinta maamulka. Wuxuu ku lug leeyahay wareejinta awoodaha go'aan gaaridda, maaliyadaha, iyo maareynta maamulka dhexe ee loo wareejinayo dowlada hoose oo madaxbannaan, sida caadiga ah degmooyinka leh xubno degaanka laga soo doortay iyo mas'uuliyadaha dhuleed oo sida cad u qeexan.

## *Warbixinta oo Kooban*

Dukumeentigan Baahinta Siyaasadda waxaa loo diyaariyay in uu bixiyo aragtida, hagidda, iyo qorshe hawleedka lagu raadinayo yoolka lagu taageerayo hirgelinta nidaamka maamulka baahsan ee bixinta adeegyada ee Puntland. Wuxuu ku saleysan yahay heerka wada-hadalka ballaaran ee qoto-dheerida leh iyo wadatashiga u dhaxeeya daneeyeyaasha ugu waaweyn ee ku lugta gaaridda yoolkan.

Madaxweyne Ku Xigeenka Puntland iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha ee qaabilsan Dowladda Hoose waa xoogaga wada horumarinta iyo hirgelinta geeddi-socodkan baahinta maamulka waxayna ka gaysteen caawimaad iyo taageero qiimo badan leh dhammeystirka dukumeentigan baahinta siyaasadda.

Warbixinta kooban waxay bixinaysaa guudmarka gaaban ee ah qodobada ugu waaweyn ee lagu sharraxay qaybta muhiimka ah ee warbixinta. Tani waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Bayaanka Himilada iyo Bayaanada Baahinta Siyaasadda ee qaybaha baahinta maamulka siyaasadeed, maamuleed, iyo maaliyadda
- Qorshe hawleedka loogu talogalay horumarinta dheeraadka ah ee geeddi-socodka baahinta maamulka ee Puntland

Warbixinta waxay bixinaysaa baaritaanka faahfaahsan ee xaaladda hadda ee la xiriirta daruufaha sharci, siyaasadeed, maamuleed, iyo midda maaliyadeed ee loo baahan yahay in wax laga qabto ayadoo loo marayo dadaalo sida fiican loo soo abaabulay lana isugu soo dubariday ee uga imaanaya heerka hoose ilaa heerka dhexe ee dowladda. Warbixinta waxay tilmaameysaa qaar ka mid ah awoodaha, daciifnimada, fursadaha iyo halisaha lagu sii wadayo dadaalada lagu horumarinaya nidaamka maamulka baahsan ee bixinta adeegyada.

**Bayaanka Himilada Baahinta Maamulka ee Puntland**

Warbixinta waxay bixinaysaa bayaankan himilada ee soo socda ee loogu talogalay baahinta maamulka ee Puntland.

**Dhisidda heerka dowlad hoose ee loogu talogalay maamul wanaag horumarsan iyo bixinta adeegyada ayadoo loo marayo ka qaybqaadasho, la-xisaabtan iyo waadaxnimada dowladda hoose iyo in si wax ku ool ah looga faa'iideysto khayraadka xaddidan ee laga heli kara heerarka dowladda hoose iyo kuwa dowladda dhexe.**

**Bayaanada Baahinta Siyaasadda ee Baahinta maamulka Siyaasadeed, Maamuleed, iyo Midka Maaliyadeed ee Puntland**

Warbixinta waxay ka hadlaysaa shuruudaha loo baahan yahay si looga hirgeliyo baahinta seddaxda qaybood ee baahinta maamul waxayna soo jeedinaysaa bayaanada siyaasadda baahinta maamulka in ay yihiin sida haggida ee lagu horumarinayo qaybaha baahinta maamulka ee sida ay qabaan mabaadiida calaamiga ah ee baahinta.

***Bayaanada Siyaasadda Baahinta Maamulka ee Loogu Talogalay Baahinta Siyaasadda***

**Doorashada Gollayaasha Degaanka: Geeddi-socodka doorashada tooska ah ee gollayaasha degaanka ayaa la hirgelinayaa oo ku dhisan xulasho takoorid la'aan, tartan, furanaan iyo ololeyn loogu talogalay xafiisyada gollaha degaanka.**

**Ka qaybqaadashada Muwaadinka Go'aan Qaadashada: Ka qayqaadashada muwaadinka waxaa la**

**gaarsiinayaa ilaa heerka ugu sareeya ee suurtagalka ah iyadoo loo marayo qaadashada sharciyada ka qaybqaadashada muwaadinta heerarka dowladda hoose ee u baahan qabashada madalo bulshada oo ku saabsan go'aanada horumarka degaanka iyo miisaaniyadda, iyo sameynta guddiyo bulshada ku dhisan ee loogu talogalay waaxyada, sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo adeegyada fayodhawrka, iyo qorshaynta iyo dhisidda kaabayaasha bulshada.**

**Mas'uuliyiin Degaanka Laga Soo Magacaabay: Saraakiisha maamulka iyo guddoonka waxaa lagu soo magacaabayaa gudaha qorsho sharciyeedka adeegga shacabka waxaana lagu soo magacaanayaa go'aanka gollaha degaanka waxayna hoos imaanaysaa xulashadooda, qiimayn waxqabasho, iyo go'aano shaqo ka cayrin.**

*Bayaanada Siyaasadda Baahinta Maamulka ee Loogu Talogalay Baahinta Maamulka*

**Awooddaha Nidaamin ee Loogu Talogalay Qorshaynta Kabayaasha Degaanka: Gollayaasha degaanka iyo guddoonka maamulka waxay awood buuxda u yeelanayaan in ay go'aamiyaan shuruudaha qorshaynta kaabayaasha degaanka ee loogu talogalay dowladahooda hoose, ee ku xiran xeerarka qorshaynta heerka qaran iyo ka qabyqaadashada muwaadinka ee go'aanada qorshaynta ee heerka degaanka.**

**Maamulka Maaliyadda Guud ee Degaanka iyo Soo-iibsashada: Gollayaasha degaanka iyo shaqaalaha maamulka waxay u yeelanayaan awood buuxda in ay hirgeliyaan shuruudahooda dakhliga iyo adeegsiga lacagaha ee dhaca gudaha geeddi-socodka miisaaniyadda rasmiga ee u dhigmi kara shuruudaha maaliyadeed ee heerka qaranka. Go'aanada ku saabsan wax soo-iibsashada iyo heshiisyada waxay noqonayaan kuwo dhaca gudaha awoodda gollaha degaanka iyo shuruudaha ka warbixinta iyo sharciga maaliyadeed ee heerka qaran.**

**Maamulka Shaqaalaha ee Degaanka: Maamulka hirgelinaya nidaamka maareyta shaqaalaha ee qaabilsan qorista shaqaalaha, xulista, qiimayn waxqabasho, iyo shaqo ka cayrinta waxay noqonaysaa shaqada gollaha degaanka in uu go'aamiyo oo ku dhisan shuruudaha adeegga shacabka ee heerka qaran.**

**Maamulidda Adeegyada Guud ee Degaanka: Dowladaha hoose waxay yeelanayaan awoodo dhammeystiran oo lagu bixinayo adeegyada guud ee degaanka ee habka mabda'a kor ka maamulidda iyo go'aaminta awoodaha shaqaalaha iyo maaliyadda ee dowladda hoose.**

**Awood Kalageynta Bixinta Adeegyada:** Bixinta adeegyada ee xafiisyada awoodooda kalageysan ee wasaaradaha dhexe waxaa lagu saleynayaa la'aanta awooddo maaliyadeed iyo mid shaqaale ee dowladda hoose iyo shardiga la aasaasay iyo geeddi-socodka qiimeynta ee lagu go'aaminayo in dowladda hoose aysan haysan awoodahan. Tixgelin ayaa la siinayaa adeegyada muhiimadda qaran leh, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha iyo kaabayaasha iyo waaxyada isku daba xiga, halka danaha heerka qaran ee sinnaanta bixinta adeegyada iyo jaangooyooyinka heerka qaranka aysan ka soo bixi karin dowladaha hoose.

**Baahinta Maamul ee Bixinta Adeegyada:** Baahinta maamulka waxay noqonaysaa habka la doorbidayo ee lagu bixinayo adeegyada ee lagu hagayo mabda'a kor ka maamulidda iyo awoodaha dowladda hoose ee ku dhisan nidaamkooda kala saaridda iyo awoodaha bixinta adeegyada ee qaybahan degaanka ah.

*Bayaanada Siyaasadda Baahinta Maamulka ee Loogu Talogalay Baahinta Maamulka Maamilyadda*

**Qoondaynta Kharashka: Qoondaynta kharashka hawlaha adeegga dadweynaha waxaa la sameeyaa ayadoo lagu saleynayo aasaaska gooniga ah ee kala saarista dowladda hoose, awoodaha shaqaale iyo mida maaliyadeed, iyo muhiimadda bixinta sinnaanta adeegyada loo gaarsiinayo muwaadiniinta degaanka ee ku dhisan jaangooyooyinka tayada heerka qaran.**

**Dakhli Qoondaynta iyo Maamulka Dakhliga Degaanka:** **Hawlgelinta dakhliga iyo awoodda maaliyadeed ee ugu badan ee ilaha dakhliga waxaa la taageerayaa ayadoo la oggolaanayo is-maamulka maaliyadeed dowladda hoose si loo go'aamiyo aasaaska canshuurta iyo in la dejiyo sicirka canshuurta ee loogu talogalay tiro ilo dakhli u gooni ah oo la xushay iyo lacagaha laqa qaadayo. Dowladaha hoose waxay si buuxda mas'uul ugu noqonayaan nidaamka canshuur qaadidda ee ku dhisan aqoonsiga canshuur bixiyeyaasha iyo go'aaminta canshuurta saxda ah ee la bixinayo.**

**Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha Ka Dhaxeeya:** **Go'aaminta kabka maaliyadeed ee dowladaha ka dhaxeeya waxaa lagu saleynayaa aasaas ujeeddo iyo hufahaan iyo tixgelinta kala duwanaanshaha kala saarista dowladda hoose, arrimaha juquraafiga iyo meesha ay ku yaala, degsiimada dadka, iyo xaaladaha la xiriira dhaqaalaha iyo bulshada.**

**Deynta iyo Deynsashada Dowladda Hoose:** **Dowladaha hoose waxay awood u yeelanayaan in ay lacago soo deynsadaan ayna u adeegsadaan deynta ujeeddooyin degaanka ah oo ku xaddidan awoodooda maaliyadeed iyo qorshaha sharciga ee qaran. Go'aanada adeegsigga deynta waxaa lagu saleynayaa wada hadalada dadweynaha ee caddadka lacageed iyo adeegsiga deynta ee ujeeddooyinka kaabayaasha degaanka waxaana ku waajibta dib u hubinta maamulka heerka qaran.**

**Isku Dheellitiridda Siman ama Qumman:** **Ilaa heerka suurtagalka ah iyo gudaha xaddadyada ilaha dakhliga dhexe, kabka maaliyadeed ee dowladaha ka dhaxeeya waxaa la isugu dayayaa in looga guulgaaro isku dheellitiridda qumman ee kharashka iyo dhakhliyada dowladda hoose si la isugu soo dhoweeyo faraqa maaliyadeed ee baahiyada maalgelinta. Isku dheellitirnaanta siman waxaa lagu gaarayaa ayadoo la adeegsanayo qaybaha kabka kala duwan ee ka dhexjira dowladaha hoose oo ku saleysan kala saarista dowladaha hoose, iyo arrimaha ka midka ah qaacidooyinka kabka.**

**Waadaxnimada Qaacidooyinka Qoondaynta:** **Qaacidooyinka qoondaynta kabka maaliyadeed waxay ku saleysnaan doonaan ujeeddada iyo arrimaha la ansixiyey waxaan si furan loogala hadlayaa wakiilada daneeyeyaasha dowladda hoose iyo dolwadda dhexe ayadoo loo marayo geeddi-socod wadatashi oo rasmi ah.**

**Awoodda Maaliyadeed:** **Adeegsigga tallaabooyinka awoodda maaliyadeed waxaa lagu darayaa horumarinta kabka maaliyadeed ee ka dhaxeeya dowladaha iyo dhiirigelinada la siiyo dowladaha hoose si loo ballaariyo ilahooda dakhli iyo ururinta dakhliyada.**

**Waajibaadyada Aanan La Maalgelinin:** **Dowladda dhexe kuma wareejinayso dowladaha hoose wixii shaqooyinka ah ee aan maalgelintooda la bixinin si ay u bixiso kharashadyadan bixinta adeegyada.**

**Aasaaska Qoondaynta Kala Duwan ee loogu talogalay Degaamada Miyiga iyo Magaalooyinka:** **Qoondaynta kabka waxay ku saleysan doonaan kala duwanaanshaha u dhaxeeya dowladaha hoose ee ay ku badan yihiin degaamada miyiga iyo magaalada ah oo ku saleysan cabbiraadyada degaanka iyo tirada ama mugga dadweynaha ee lagu aasaasay gudaha nidaamka kala saarista dowladda hoose.**

**Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Halisaha Baahinta Maamulka**

Warbixinta waxay bixinaysaa ayadoo loo marayo aqoonsiga iyo baaritaanka awoodaha, daciifnimada, fursadaha iyo halisaha hirgelinta iyo horumarinta siyaasaddan baahinta maamulka. Kuwani waxaa lagu muujiyay hoos.

Awoodaha muhiimka ah waxay la xiriiraan kuwan soo socda:

- Aasaaska sharci ahaan muhiimka u ah baahinta maamulka ee Dastuurka iyo Sharciga 7
- Ballanqaadka heerka sare ee Dowladda Puntland iyo hoggaaminta Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaarahada ee qaabilsan Maamul Hoosaadka
- Awoodda hirgelinta baahinta maamulka ee loo marayo JPLG iyo barnaamijyada kale ee deeqda ah
- Daraasadada qiimeynta waaxda oo sida fiican loo sameeyay ee loogu talogalay baahinta maamulka

Daciifnimada, si kastaba ha ahaatee, way badan yihiin waxayna u baahan yihiin dadaal badan si looga gudbo.  Daciifnimada la aqoonsaday waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Ma jirto istiraatiijiyad guud ee baahin maamulka ah
- Degmooyin aad u badan oo aanan awoodin in ay bixiyaan adeegyo ku filan
- Guuldarada ah in lagu guuleysan waayo qabashada doorashooyinka gollaha degaanka
- Ku soo darid la’aanta daneeyeyaal ku filan oo ka socda heerka degmo horumarinta siyaasadda baahinta maamulka ee guud
- La’aanta nidaam kab maaliyadeed horumarsan oo dowladaha ka dhaxeeya

Waxaa jira fursado badan oo ka dhalanaya wanaajinta xaaladdan iyo ka gudbidda daciifniamda sare iyadoo loo marayo kuwan soo socda:

- Qeexitaanka xuduudaha degmada oo ku saleysan shardiga loo dejiyay
- Qabashada doorashooyinka gollaha degaanka
- Wanaajinta qorshaha sharci ee qoondaynta shaqo ee ku saleysan awoodaha degmooyinka
- Wanaajinta awoodda ururinta dakhliga degmooyinka.

Waxaa wali jira haliso badan oo u baahan in laga gudbo.  Kuwani waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Diidista wasaaradaha dhexe in ay taageeraan baahinta maamulka
- Jahawareer sii socda ee ka jira doorarka iyo mas’uuliyadaha wasaaradaha dhexe iyo maamulada degmooyinka
- Suurtagalnimada xaalado xasilooni daro siyaasadeed iyo colaado
- Diidmada hawlwadeennada ay diidayaan in loo wareejiyo maamulada degmada iyo aad u kala duwanaanshaha mushaaraadka heerarkan.

**Aasaasyada Loogu baahan yahay Hirgelinta Siyaasadda**

**Rabitaan Siyaasadeed**

Baahida loo qabo in baahinta maamulka loo meeleeyo sida arrin mudnaan sare u leh dowladda ahaan iyo ku meelaynta mas’uuliyadda hirgelinta heerka ugu sareeya ee dowladda waa wax aasaasi ahaan loo baahan yahay si loo hirgeliyo baahinta maamulka.

**Awood Dhisidda**

Waa muhiim in la sameeyo waxa ay ka koobanto awood dhisidda dhacda gudaha barnaamijka baahinta maamulka.  Tani waxaa la sameyn karaa ayadoo loo marayo adeegsiga hawl fulin muhiimka ah in la sameeyo waxa ay ka koobanto awood dhisidda dhacda gudaha barnaamijka awood baahinta ku saleysan deeq siinta dowladaha hoose oo ku kalifaysa in ay hirgeliyaan mashruucyo iyo maalgelin ka mid ah oo loogu talogalay awood dhisidda dowladda hoose ee loogu talogalay mashruucyadan iyo dhisidda machadka tababarka adeegyada shacabka.

Dadaalo awood dhisid ayaa la sameynayaa si loo qiimeeyo kadibna loo aqoonsado xirfadaha muhiimka ah iyo awoodaha loogu baahan yahay in la qabto adeegyada la baahiyay ee loo qoondeeyay heerka degmo ee hoostagaya nidaamka mustaqbalka ee bixinta adeegyada iyo dowlad wanaagga ee maamulka baahsan. Ayadoo lagu saleynayo qiimeyntan, barnaamij awood dhisid ayaa la qorsheynayaa kadibna la hirgelinayaa oo xaqiijinaya in hoggaamiyeyaasha dowladda hoose iyo maamulka sare la doorto, sidoo kale shaqaalaha, waxay yeelanayaan aqoonta, khibradda iyo awoodda loo baahan yahay in ay ugu bixiyaan adeegyada loo qoondeeyay si waxtar leh.

**Qorshaha Sharci**

Qorshe sharciyeed waadix ah ee qeexaya doorarka, mas'uuliyadaha iyo awoodaha dowladda hoose waa wax aasaas u ah in lagu guuleysto barnaamijka baahinta maamulka. Qorshaha sharicga waa in ay ka mid noqdaan sharciyada dowladaha hoose ee qeexaya shaqadooda, hababka ay u hawlagalayaan, sidoo kale geeddi-socodyada doorashada gollayaasha degaanka.

**Siyaasadda Qaran**

Waa in ay sidoo kale jiraan dukumeentiyo siyaasad heer qaran waadix ah oo bixinaya himilada iyo ujeeddooyinka ayna tahay in barnaamijka baahanta maamulka uu taageero. Kuwani waxaa lagu dari karaa Qorshayaasha Horumarka Qaranka, Himilada 2020, ama noocyada kale ee ujeeddooyinka siyaasadda heerka qaran.

**Ilaha Dhaqaale**

Ka guul gaaridda baahinta maamulka waxay sidoo kale aad ugu xiran tahay ilaha dhaqaale ee ay heli karaan dowladaha hoose sidoo kale wadaagidda dakhliyada laga helo dowladda dhexe ama kabka maaliyadeed.

**Maareynta Xudunta u ah Shaqooyinka iyo Mas'uuliyadda**

Qoondaynta shaqooyinka sida fiican loo qeexay ee u dhaxeeya heerarka hoose iyo kuwa dhexe waa muhiim. Kuwan soo socda waxay bixinayaa maareynta xudunta u ah qoondaynta shaqooyinka ee u dhaxeeya heerarka hoose iyo kuwa dhexe ee dowladda. Adeegyadaasi ee loo baahiyay waaxyada kala duwan, dowladda hoose waxay la wareegaysaa mas'uuliyadda qoondaynta miisaaniyadda iyo fulinta adeegyadan. Tani waxay ka dhigan tahay wareejinta aasaasiga ah ee mas'uuliyadaha bixinta adeegyada maamulka baahsan.

| Qoondaynta Maareynta Xudunta u ah Shaqooyinka iyo Mas'uuliyada | | |
|---|---|---|
| Shaqada | Mas'uuliyadda Aasasiga ah | Mas'uuliyadda Labaad |
| Siyaasad Dajinta | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |
| Qorsheynta Istiraatiijiyadeed | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |
| Miisaaniyad Dajinta | Dowladda Hoose | Wasaaradaha Dhexe |
| Fulinta | Dowladda Hoose | Wasaaradaha Dhexe |
| Nidaamka kontoroolidda iyo Addeecidda | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |

Si loo baahiyo in waaxyada kala duwan, wasaaradaha khuseeya waxay diyaarinayaan qorshaha tallaabada baahinta maamulka oo ku saleysan dib-u eegista shaqada ee adeegyada la baahin karo iyo qiimeynta awoodda ee degmooyinka loogu talogalay awoodahooda ee ay ku qaadayaan mas'uuliyadda adeegyadan.

**Baahinta Maamulka Waaxeed**

Siyaasada baahinta ee loogu talogalay waaxyada kala duwan ee loogu hadlay siyaasaddan baahinta maamulka waxaa loogu soo koobay hoos waax kasta iyo darajada degmada.

*Gaadiidka iyo Waddooyinka:*

- Dowladaha hoose ee Qaybta A waxay la wareegayaan mas'uuliyadda isku xirka waddooyinka degmada oo dhan ee *gudaha 5km ee xuduudahooda*, marka laga reebo dhisidda waddooyinka waaweyn ee mara ama isku xira labbo degmo ama in ka badan, *ama u dhaxeeya tuullooyin ama gudaha xuduudaha qaranka*.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay la wareegayaan mas'uuliyadda waddooyinka degaanka ee gudaha magaalooyinka ama degaamada horumarsan ee gudaha xuduudahooda. Waddo kasta oo laami ah waxay hoostagaysaa mas'uuliyadda Maamulka Waddooyinka Waaweyn ee Puntland ayadoo loo marayo awoodahooda baahsan ee bixinta adeegyada waxayna qiimeynayaan Qaybta degmada B ee kharashadyada dayactirka qaarkood.

Dowladaha hoose ee Qaybta C ma yeelanayaan mas'uuliyadda qayb ka mid ah isku xirka waddooyinka dhaca gudaha xuduudahooda. Maamulka Waddooyinka Waaweyn ee Puntland waxay mas'uul ka noqonayaan waddooyinkan, balse waxay dowladda hoose ee Qaybta C u qiimeynayaan dayactirka ku dhisan kharash-wadaagga.

*Waxbarashada:*

Baahinta maamulka waxbarashada ka hor dugsiga hoose, maamulka dugsiga hoose waxaa lagu baahinayaa dowladaha hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah ee lagu saleynayo qiimeynta awoodahooda sida ay go'aamisay Wasaaradda Waxbarashada. Habkan baahinta maamulka waxaa lagu tijaabinayaa dhawr dowlado hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah kabidna waxaa loo qiimeynayaa in si buuxda loogu dabaqo Qaybaha kale. Marka tani loogu guulgaaro dowladaha hoose ee Qaybta A waxay markaasi kadib la wareegayaan mas'uuliyadda waxbarashada dugsiga sare ee shaqadooda mas'uuliyadda.

Sidaas awgeed Wasaaradda waxbarashada waxay mas'uul ka tahay bixinta adeegyada waxbarasho ee heerka degmo, ilaa laga gaarayo wakhti la cadeynayo in degmooyinka A ay si waxtar leh u awoodaan in ay bixiyaan adeegyada waxbarasho isla markaasna la is waafajinayo sharuucda gundhigga u ah baahinta maamulka (Law No.7) iyo sharuucda iyo siyaasadda waxbarashada.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay kaliya mas'uul ka noqonayaan waxbarashada ka hor dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe. Dowladaha hoose ee Qaybta B mas'uul loogama dhigayo waxbarashada dugsiga sare. Ha sa aahaatee Wasaaradda waxbarashada waxay mas'uul ka tahay bixinta adeegyada waxbarasho ee heerka degmo, ilaa laga gaarayo wakhti la cadeynayo in degmooyinka B ay si waxtar leh u awoodaan in ay bixiyaan adeegyada waxbarasho isla markaasna la is waafajinayo sharuucda gundhigga u ah baahinta maamulka (Law No.7) iyo sharuucda iyo siyaasadda waxbarashada.

Dowladaha hoose ee Qaybta C waxay kaliya ka mas'uul ka noqonayaan *waxbarashda ka hor dugsiga hoose* oo ku saleysan qiimeynta awoodda degaanka ay ku qabanayso hawshan.

*Caafimaadka:*

Baahinta maamulka qaybaha caafimaadka aasaasiga ah iyo xarumo caafimaad ayaa lagu baahinayaa maamulkooda dowladaha hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah oo lagu saleynayo qiimeynta awoodahooda sida ay go'aamisay Wasaaradda Caafimaadka. Habkan baahinta maamulka waxaa lagu tijaabinayaa dhawr dowlado hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah kabidna waxaa loo qiimeynayaa in si buuxda loogu dabaqo Qaybaha kale. Marka tani looga guulgaaro dowladaha hoose ee Qaybta A waxay

markaasi la wareehayaan mas’uuliyadda qaybaha caafimaadka aasaasiga ah iyo xarumo caafimaad ee shaqadooda mas’uuliyadda. Haddii habka tijaabada ah loo arko mid guuleysta.

Wasaarada Caafimaadka waxay mas’uul ka tahaybixinta adeegyada caafimaad ee heer dagmo, ilaa laga gaarayo wakhti la cadeynayo in degmooyinka **A** ay si waxtar leh awoodaan in ay bixin karaan adeegyada caafimaad isla markaasna la is waafajinayo sharuucda gundhigga u ah baahinta maamulka (Law No. 7) iyo shuruucda iyo siyaasadda Wasaaarada Caafimaadka. Siyaasadani waa inay raacdaa sharuucda iyo xeerka u dagsan Wasaarada Caafimaadka inta la iska waafajinayo sharciga maamul baahinta iyo siyaasadda Wasaarada Caafimaadka.

Wasaarada Caafimaadka ayaa u xil saran caafimaadka guud, gaar ahaan kan caruurta iyo hooyada, ka hortagga cadurradda faafa, nadaafadarrada guud iyo hormarinta adeegyada caafimaadka ee heer dowladda dhexe.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay kaliya mas’uul ka noqonayaan qaybaha caafimaadka aasaasiga ah, Dowladaha hoose ee Qaybta B lama siinayo mas’uulayadda Xarumaha Caafimaad. Ha sa aahaatee Wasaarada Caafimaadka waxay mas’uul ka tahay bixinta adeegyada waxbarasho ee heerka degmo, ilaa laga gaarayo wakhti la cadeynayo in degmooyinka B ay si waxtar leh u awoodaan in ay bixiyaan adeegyada caafimaad isla markaasna la is waafajinayo sharuucda gundhigga u ah baahinta maamulka (Law No.7) iyo sharuucda iyo siyaasadda waxbarashada.

Dowlahada hoose ee Qaybta C mas’uul kama noqonayanaan bixinta adeegyada caafimaadka.

*Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda (WASH) (oo ka mid ah khashinka adkaha ah):*

Degmooyinka A waxay mas’uul ka noqonayaan qorshayna, qiimeynta kharashka iyo hirgelinta dhammaan baraha biyaha ee dadweynaha (degaamada dadweynaha, dugsiyada, dhismooyinka dadweynaha, bukaan eegtooyinka caafimaadka iwm.), biyo gelinta, tasiilaadyada fayodhawrka dadweynaha, xarumaha caafimaad, dhismayaasha dadweynaha iyo goobaha sidoo kale bulaacadaha.

Degmooyinka B waxay mas’uul ka noqonayaan baraha biyaha ee dhismayaasha (iyo banaanada dugsiyada iyo xarumaha caafimaad) waxaana qorshaynaya, qiimeynaya kharashka kadibna hirgelinaya gollaha degmada.

Degmooyinka C waxay u yeelanayaan mas’uuliyad xaddidan biyaha, fayodhawrka iyo nadaafadda oo ku saleysan dhisidda guddiyo bulshada degaanka ah si ay ugu maareeyaan hawlahan ee gudaha degaamadooda. Halkaasi oo guddiyaasha bulshada loo abaabulo si ay u maareeyaan adeegyadan, maamulka heerka degmo wuxuu ku taageerayaa adeegyada xoogaa lacago ah iyo gargaar farsamo ee laga heli karo xafiisyada baahinta maamulka ee Wasaaradaha Dhexe ee ka mas’uulka ah hawlahan.

*Khayraadka Dabiiciga ah:*

Baahinta mas’uuliyadaha maamulka khayraadka dabiiciga ah iyo horumarintooda way xaddidnaanysaa marka loo eego xuquuqaha la haanshaha iyo helitaanka dakhliyada laga helo khayraadkan. Khayraadyada dabiiciga ah waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin hantida guud ee dhammaan dadka, ayadoon la eegayn meesha ay ku yaalaan iyo qiimaha ay leeyihiin khayaraadyada dabiiciga ah, waxaana looga faa'iideysanayaa sida faa'iidada dhammaan muwaadiniinta Puntland.

Waxaa jira baahida baaritaanka dheeraadka ah ee hawlaha shaqo ee hoos tagaya hay'adaha wasaaradahan ee la macaamilaya khayraadyada dabiiciga ah iyo marka kuwani dib loo habeeyo, geeddi-socodka lagu go’aaminayo shaqooyinka loo qoondaynayo heerka degmo ayaa bilaaban kara. Laguma talinayo in baahinta maamulka shaqooyinkan la qorsheeyo 1-3 sannadood ee ina xiga gudahooda.

**Qorshe Hawleedka Faahfaahsan ee Baahinta Maamulka**

Kuwan soo socda waxay soo bandhigayaan qorshe hawleedka faahfaahsan ee loogu taloglay in looga hirgeliyo baahinta maamulka Puntland oo leh tallaabooyin gaar ah iyo xilliyeyn loogu talogalay socodsiinta yoolka lagu baahinayo maamulka bixinta adeegyada.

Dhacdo Taariikheedka Ugu Muhiimsan ee Higelinta Siyaasadda Baahinta Maamulka

| L. | Mas'uul ka ah | Dhacdo Taariikheed | Wakhtiga kama dambaysta |
|---|---|---|---|
| 1.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha ee la xiriira | Dib-u Eegista Dukumeentiga Baahinta Siyaasadda ee ugu dambeeya iyo u gubdinta in la dhaqangeliyo | Nofeembar 2013-Jan 2014 |
| 1.a | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kulanka lix-biloodlaha ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha (IMC) Ayaa Lagu Dhaqangelinayaa Dukumeentiga Baahinta Siyaasadda | June 2014 |
| 1.b | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI) | Waxay dhisaysaa Guddiga Xuduudaha si ay u cadeeyaan xuduudaha degmada waxayna shaqada dhammeynayaan Luulyo 2014 | Jan 2015 |
| 1.c | Go'aanka Dowladda | Dowladda iyo Baarlamaanka waxay dejinayaa wakhtiga lagu qabanayo doorashooyinka gollaha degaanka | Maarso 2016 |
| 1.d | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha ee la Xiriirta | IMCLG waxay sameynaysaa hab loogu talogalay qiimeynta awoodaha degmooyinka ee ay ku bixinayaan adeegyada | Oct 2014 |
| 1.f | Wasaaradda Arrimaha Gudaha /Waasaradaha Waaxaha | Horumarinta ololaha wacyigelinta dadweynaha ee siyaasadda baahinta maamulka, saameynta Guddiga Xuduudaha ay ku yeelanayaan degmooyinka iyo gollayaasha degaanka iyo wakhtiga loo qabtey baahinta maamulka iyo doorashooyinka gollaha degaanka | Janaayo-Diseembar 2014 |
| 2.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha ee la Xiriirta | IMCLG waxay ku amraysaa wasaaradaha waaxaha in ay bilaabaan geeddi-socodka ay ku sameynayaan istiraatiijiyadda baahin maamulka wasaaradooda | December 2014 |
| 2.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay magacaabayaan koox farsamo oo qabanaysa dib-u eegista shaqo ee shaqooyinkooda | Nov 2014 |
| 2.b | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kulanka lix-biloodlaha ee Guddiga Isku-dhafka ah ee Wasaaradaha si dib-u eegis loogu sameeyo horumarka | Oct 2014 |
| 3.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay horumarinayaan kadibna qaadanayaan Qoraalada Fikradda guud ee ku saabsan Baahinta maamulka wasaaradooda iyo waaxahooda | Jan 2015 |
| 3.a | Wasaaradda | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Agoosto |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | waxay aqoonsanayaan degmooyinka lagu tijaabinayo baahinta maamulka | 2014 |
| 3.b | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan dib-u eegista shaqo waxayna aqoonsanayaan shaqooyinka lagu baahinayo habka tijaabada ah | Sibteembar 2014 |
| 3.c | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan Qorshaha Tallaabada ee loogu talogalay Tijaabinta Baahinta Shaqooyinka | Oktoobar 2014 |
| 3.d | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan Istiraatiijiyadda Baahinta Maamulka ee Degmooyinka Tijaabada ah | Nofeembar 2014 |
| 3.e | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan dib-u eegista nusqaamaha qorshaha sharci iyo in ay u geeyaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha (IMC) si ay dib u eegis ugu sameeyaan | Nofeembar 2014 |
| 3.f | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kullanka lix-biloodlaha Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxaa dib-u eegis loogu sameynayaa Qorshayaasha Tallaabada iyo dib-u eegista Qaarshaha Sharci | Maarso 2015 |
| 4.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha iyo Degmooyinka Tijaabada waxay bilaabayaan hirgelinta shaqooyinka baahinta maamulka | Janaayo 2015 |
| 4.a | Dowladda | Dowladda waxay qaadanaysaa warbixinta guddiga xuduudaha waxayna socodsiinaysaa doorashada gollaha degaanka 2016 | Maarso 2015 |
| 4.b | Dowladda iyo Baarlamaanka | Waxay qaadanayaan Isbedelada Sharciga L. 7 ee loogu talogalay Wareejinta Shaqooyinka maamulkooda La Baahiyay | Maajo 2015 |
| 5.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Kullanka lix-biloodlaha ee Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha oo looga wada hadlayo hirgelinta tijaabada ah | Oct 2015 |
| 5.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay sameynayaan qaacidooyinka qoondaynta ee loogu talogalay kabka maaliyadeed ee loo talogalay degmooyinka shaqooyinka maamulkooda la baahiyay | Luulyo 2015 |
| 6.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Dib-u eegis in lagu sameeyo Horumarka iyo Qiimeynta Horusocodka ku saabsan Baahinta Maamulka ee Degmooyinka Tijaabada ah | Nofeembar 2015 |
| 6.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Kullanka lix-biloodlaha Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha oo dib-u eegis loogu sameynayo horusocodka awood baahinta | Diseembar 2015 |
| 7.0 | Dowladda | In ay Diyaariso ayna Qabto Doorashooyinka Gollaha Degaanka | Janaayo-Juun 2016 |
| 7.a | Wasaaradda | Qiimeynta awooda hay'adeed iyo qorshaynta heerka | Juun 2015 / |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Arrimaha Gudaha iyo Guddiga Adeegyada Shacabka | degmo. Shaqaalaha degmo kasta oo dib loo kala saarayo ayadoo la eegayo shaqooyinka bixinta adeegyada (2 marxaladood) | Dis. 2017 |
| 8.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI) | Qoridda iyo ku boorrinta xeer-hoosaad ka codsanaya dhammaan degmooyinka in ay hirgeliyaan geeddi-socodka ka warbixinta, la-xisaabtanka iyo qorshaynta ka qaybqaadashada (sida PEM kasta) | Diseembar 2014 |
| 9.0 | Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha waaxaha waxay ugu diyaarinayaan khubaro heer degmo ah gollaha degmada ujeeddooyin qorshayn oo la xiriira waaxdooda (ama khubaro heer gobol ama heer dhexe ah ayadoo la eegayo awoodooda), oo ku xiran helitaanka dhaqaale. | Diseembar 2014 |
| 10.0 | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Dib-u eegista muddada dhexe ee hirgelinta siyaasadda | Diseembar 2017 |

Sida jadwalka sare lagu tusmeeyay, kullanka Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee uu shir guddoominayo Madaxweyne Ku Xigeenka oo loogu wada hadlayo kadibna lagu ayidayo geeddi-socodka ayaa laga horumarinayaa dhacdo taariikheed kasta ee weyn.

Waxaa raaca hirgelinta dhammaan dhinacyada xukun-wadaajinta xagga sare lagu soo xusey, Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxay qiimeyn qiimeyn muddo dhexe ah. Ujeeddada qiimeynta waxay noqonaysaa in la qiimeeyo xaaladda iyo isbedelada la sameeyay iyo in la bixiyo talooyin loogu talogalay isbedelada cusub. Dib u habeyn suurtagal ah in lagu sameeyo habka ayaa sidaas darteed la hirgelinayaa qaybta dambe ee muddada qorshe hawleedka oo ku saleysan talooyinka dib-u eegista.

# 1 Horudhac

Warqaddan qabyo qoraalka ugu dambeeya ee siyaasadda baahinta maamulka waxaa horumariyay oo qaatey Dowladda Puntland. Wuxuu ku dhisan yahay la-tashiyada la bilaabey Juun 2012 wuxuuna socday 2012 iyo 2013 waxaana fududeeyay Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaraha ee uu madaxda ka yahay Madaxweyne Ku Xigeenka.

Siyaasadda waxaa loo dejiyay si loo xaqiijiyo in ay jirto aragti guud iyo hab loo marayo qorsheynta, hirgelinta iyo korjoogteynta bixinta adeegyada heer maamulka baahsan ee Dowladda Puntland.

Dukumeentiga waxaa laga dhigay siyaasadda ugu dambeysa asagoo hoostagaya hoggaanka Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Baahinta Maamulka ee Puntland oo guddoomiye ka yahay Madaxweyne Ku Xigeenka Puntland. Guddiga wuxuu ka kooban yahay dhammaan waaxyada wasaaradaha la xiriira ee Dowladda iyo Wasaaradda Qorsheynta iyo Wasaaradda Maaliyadda.

Siyaasadda waxaa taageeraya qorshe hawleed hirgelin, kaasi oo muujinaya hirgelinta siyaasadda. Qorshe hawleedka waxaa la sii horumarinayaa iyadoo loo marayo geeddi-socod la-tashi oo lala yeelanayo wasaaradaha la xiriira inta ay qorsheynayaan qorshayaashooda tallaabada hirgelinta baahinta maamulka.

Siyaasadda waxaa loo sameeyay si loo dhiso qorshaha sharci dejinta iyo xaddidaada baahinta maamulka ee Puntland, waxayna bixinaysaa talooyinka kuwani ee loogu talogalay in hore loogu kala cadeeyo mas'uuliyadaha bixinta adeegyada ee loo qoondeeyay nidaamka bixinta adeegyada ee baahinta maamulka.

Siyaasadda waxaa loo qaabeeyay in ay noqoto mid taabbogal leh sida qorshe hawleedka. Sidaas darteed, waxaa xoogga la saarayaa baahinta shaqada ee dhawr waaxood oo muhiim ah , kuwaasi oo kadibna u gogol xaaraya baahinta maamulka dheeraad ah.

# 2 Ujeeddooyinka Siyaasadda iyo Himilada Baahinta Maamulka ee Puntland

## 2.1 Fikradaha Guud ee Mabda'a Baahinta Maamulka

Baahinta maamulka waxaa loola jeedaa dib u dhisidda awoodda sidaas awgeed waxaa jiraya nidaam mas'uuliyad la wadaago oo u dhaxeeya hay'adaha dowladda ee heerarka dhexe, gobolka ama degaanka ayadoo la eegaya mabda'a kor ka maamulidda. Ayadoo lagu saleynaya mada'aasi, shaqooyinka (ama hawlada) waxaa loo wareejiyay heerka bulsho ama hay'adeed ee ugu hooseeya ee awooda (ama suurtagal ah in uu awoodo) dhammesytirkooda. Baahinta awoodda waxay la xiriirtaa doorka, iyo xiriirka u dhaxeeya hay'adaha hoose ee qaranka iyo kuwa dhexe, haddii ay yihiin kuwa guud, gaar loo leeahay ama shacabka leeyihiinba.[2]

Ujeeddada baahinta maamulka ee Puntland waa: **Ka hergelinta heerka dowladda hoose maamul wanaag horumarsan iyo bixinta adeegyada ayadoo loo marayo ka qaybgal, la-xisaabtan iyo hufnaanta dowladda hoose iyo in si waxtar leh looga faa'iideysto khayraadka xaddidan ee la heli kara heerarka dowladda hoose iyo kuwa dowladda dhexe.**

Si ay gacan ugu geysato ujeeddadan siyaasadda:

1) Waxay qeexaysaa himilada (natiijada la rabo) ee baahinta maamulka ee Puntland taasi oo ay tahay in dhammaan tallaabooyinka siyaasadda ee la soo jeediyay la qaabeeyo;

[2]UNDP (2004) Maamulka Baahsan ee loogu talogalay Horumarinta: Qoraalka Gaaban ee Hanaanka Isku-jira ee ku saabsan Baahinta Maamulka, Maamul Hoosaadka iyo Horumarinta Miyiga/Magaalada

2) Waxay bixinaysaa hagista geeddi-socodka si loo xaqiijiyo qaybinta cad ee hawsha u dhaxeysa heerarka kala duwan ee dowladda iyo daneeyeyaasha aan dowladda ahayn muddo kadib ee seddaxda qaybood ee baahinta maamulka: siyaasadda, maamulka iyo maaliyadda;
3) Waxay xaqiijinaysaa in geeddi-socodka uu ku dhisan yahay mabaadiida sida wadajirka ah loogu heshiiyey ee loogu gol leeyahay in lagu xoojiyo ka qaybqaadashada, ka mid noqoshada, la-xisaabtanka, hufnaanta iyo bixinta adeegyada hagaagsan;
4) Waxay xaqiijinaysaa in baahinta iyo xukun-wadaajinta mas'uuliyadaha loo qorsheeyay heerarka hoose ee dowladda ay raacsan yihiin geeddi-socodka dhisidda awooddaha loo baahan yahay iyo u qoondaynta khayraadyo ku filan;
5) Waxay xaqiijinaysaa in geeddi-socodkan uu ku dhisan yahay casharada la bartey iyo caddeynta la diiwaangeliyay, kuwaasi oo ka war-bixin kara hirgelinta siyaasadda.

Aragtida baahinta maamulka ee Puntland sida ay sharaxday Dowladda waa in la gaaro nidaam dowladeed oo si buuxda maamulkiisa u baahsan laguna soo doortay si dumuqraadi ah, oo ku sifooway furnaan, ka qaybqaadashada wax ku oolka ah ee bulshooyinka degaanka geeddi-socodkooda go'aan gaaridda, horumar iyo maamul iyo jiritaanka xiriiro wanaagsan oo u dhaxeeya dowladaha hoose iyo tan dhexe.

Horumarinta siyaasadda baahinta maamulka ee Puntland waxay ku saleysan tahay mabaadiida aasaasiga ah iyo fikradaha guud ee lagu aqbalo dhaqannada caalamiga ah ee ugu fiican. Fikradaha guud ee aasaasiga u ah baahinta maamulka waa kuwan soo socda:

Habka kor ka maamulidda: Habka kor ka maamulidda waxaa loo qeexi karaa sida fikradda ah in maamulka dhexe uu yeesho hab kor ka maamulidd, oo loola jeedo shaqo, labaad, oo qabanaya kaliya hawladaha, ee aanan si waxtar leh oo degdeg ah aanan loo qaban karin ama heer degaan. Dastuurka Puntland qodobka 85/2 wuxuu u qeexayaa mabda'a habka kor ka maamulidda sida soo socota:

' Gollaha degmooyinka waa in ay yeeshaan mas'uuliyadda hirgelinta qorsheyaasha hawlaha mihnadaha sida adeegyada bulshada, waxbarashada, dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe, xoolaha, beeraha, ammaanka, biyaha, korontada, isgaarsiinta, daryeelka caafimaad, ilaalinta deegaanka iyo horumarinta marka loo eego khayraadkooda.'

La-xisaabtanka. Shardiga ku xiran raacidda habka kor ka maamulidda waa in degmada lagala xisaabtamayo hawlgalkeeda. La-xisaabtanka waa in loo raaco labo heerar: (1) u dhaadhicidda dhanka sare ee gobolka iyo dowladda dhexe, iyo (2) u dhaadhicidda dhanka hoose oo u dhaxeeya muwaadiniinta iyo degmada u adeegysa.

Tusaalaha la-xisaabtanka u dhaadhicidda dhanka sare waa in dowladaha hoose ay u baahan yihiin in ay u hoggaansamaan jaangooyooyinka ay dejiyeen wasaaradaha waaxaha iyo xeerarka dowladaha hoose. Sidaas-darteed ayadoo dowladda hoose ay yeelan karo awoodda buuxda ee qorshaynta iyo hirgelinta, adeegyada waa in ay raacaan jaangooyooyinka u degsan wasaaradda waaxaha. Isla mar ahaantaasina hay'adahan waxay u baahan yihiin in ay la-xisaabtantamaan dowlaha hoose ayagoo siinaya sahay si ay awood ugu yeeshaan dowladaha hoose in ay qabsadaan hawlahooda, sida talo, haggis iyo dhaqaale sida loogu baahdo.

Dhanka hoose marka loo dhaadhaco dowladaha hoose waxaa la-xisaabtamaya muwaadiniinta ayadoo loo marayo doorashooyin la qabanayao tusaale ahaan, muddo shan sannadood ah iyo ayadoo loo marayo tusaale ahaan, qorshayn ku saleysan ka qaybgalka iyo miisaaniyadda sannadlaha ee la dejinayo[3] iyo ayadoo loo marayo tusaale ahaan habka jawaab-celinta heerka bulshada ee xaqiijiya in dhammaan muwaadiniinta, oo ay ku jiraan dumarka, dhallinyarada iyo dadka laga tiro badan yahay ay awood u leeyihiin in ay ku dhiibtaan jawaab-celintooda ku saabsab bixinta adeegyada ee maamulada.

Waadaxnimo. Waadaxnimada – sida la-xisaabtanka oo kale – waa arriin isku daba xigta. Waxaa intaa siidheer in ay si toos ah ula xiriirto la-xisaabtanka ayadoo waadaxnimada la hagaajiyay ay oggolaanaysa la-xisaabtanka iyadoo ka warbixinaysa xiriirada geeddi-socodyada la-xisaabtanka heerka sare iyo heerka hoose ee ay la wareegeen degmooyinka sidaas-darteedna ilaa heerka kaga soo baxayaan shuruudahooda sidoo kale ballan-qaadyada la sameeyay.

Tusaalooyin waxaa ka mid ah waadaxnimada geeddi-socodka qorshaynta ayadoo laga dhigaya qorshayaasha iyo miisaaniyada kuwa guud oo la heli karo; geeddi-socodyada shaqaalaysiinta iyo soo-iibsiga ayadoo si cad loo sheegayo shuruudaha lagu xulanayo ee lagu sameynayo xulashada iyo natiijooyinka loo soo bandhigayo dadweynaha; iyo geeddi-socodyada wareejinta heerka dhexe ayadoo si cad loo sheegaya shuruudaha ku xiran kabka maaliyadeed ee uu heerka dhexe siinayo heerka hoose iyo sheegadda caddadka lacageed ee la siinayo.

Ka qaybqaadashada. Geeddi-socodka baahinta maamulka ugu horeyn waa geeddi-socod ka qaybgal. Dhanka kale, ka qaybqaadashada bulshada oo dhan waa wax muhiim u ah hubsashada qaabeynta habboon iyo hirgelinta baahinta maamulka; dhanka kalena, baahinta maamulka waxay keenaysaa ka qaybqaadashada bulshada oo wanaagsan.

Tusaalooyinka ka qaybqaadashadani waxaa ka mid noqon kara ka qaybgalka bulshada ee qorshaynta ku saleysan ka qaybgalka iyo mudnaansiinta waxqabadyada horumarinta.

Ka qaybgelinta. Yeelashada siyaasadda baahinta maamulka ee siinaysa fursado isle'eg dhammaan oo ay ka mid yihiin ragga iyo dumarka, dhalinyarada, naafada, carruurta iyo qaybka kale bulshada la hayb sooco.

Tusaalooyinka ka qaybgelinta waxaa ka mid noqon kara: hubinta in kooramo dheddig-labood isku dheellitiran ay ka jiraan guddiyada muhiimka ah sida guddiyada shaqaalaysiinta iyo soo-iibsashada; ka qaybgelinta wakiilo ka socda naafada marxalada qaabeynta mashaarciida; qorshaynta ku saleysan ka qaybgalka ee ku lugta leh tallaabada dhexgelinta kooxda la hayb sooco; dhexgelinta dheddig-laboodka bixinta adeegyada; geeddi-socodyada doorashooyinka oo u eexanaya dumarka ama ka mid ah nooc tallaabo dhexgelin sida boqolkiiba in qayb gollayaasha degaanka loo qoondeeyo dumarka.[4]

Mabaadiidan guud waxay ka sameysan yihiin aasaaska siyaasadda baahinta maamulka.

Qaybahan soo socda waxay muujinayaan qaar ka mid ah sifooyinka aasaasiga ah ee baahinta maamulka siyaasadeed, maamuleed iyo maaliyadeed oo ku saleysan nidaamka ay hormariyeen Boex iyo Yilmaz.[5]

## 2.2 Sifooyinka Baahinta Maamulka Siyaasadeed

Baahinta maamulka siyaasadeed waa mid ka mid ah seddaxda qaybood ee ugu muhiimsan baahinta maamulka. La'aanta horumarka weyn oo laga geysto baahinta maamulka siyaasadeed dadaalada badankooda ee lagu hirgelinayo mabaadiida baahinta maamulka lama gaari karo. Sidaas awgeed, fahanka sifooyinka iyo muuqaalada baahinta maamulka siyaasadeed waa bar bilowga lagu horumarinayo siyaasadaha baahinta maamulka iyo maaliyadda.

---

[3]Si la mid ah, Xeerka Is-maamulka Nepal ee 1999 wuxuu dhigayaa mabda'a ah in: 'Hay'adda Degaanka (ay tahay) in ay la xisaabtamaan dadka degaamadeeda'

[4]Sida tusaale ahaan Xeerka Dowladda Hoose ee Uganka 1997 wuxuu dhigayaa mabda lagu caddeynayo: 'maamul dareen aad ah u leh dheddig-laboodka, siyaasadda iyo dimuqraadiyadda oo laga hirgeliyay maamulada dowladaha hoose'.

[5]Boex, Jamie iyo Serdar Yilmaz, Qaabdhismeed Ka Baaran-degid oo loogu talogalay Qiimeynta Maamul Hoosaad La Baahiyay iyo Laanta Guud ee Degaanka, Diseembar 2010, IDLG Working Paper No. 2010-06, Xarunta Machadka Urban ee qaabilsan Horumarinta Caalamiga iyo Maamulka.

Marka la eego baahinta maamulka siyaasadda, xiriirka ka dhaxeeya hay'adaha fulinta iyo sharci dejinta ee ka socda heerka dhexe iyo kuwa hoose waa muhiim. Waxaa jira baahi loo qabo kala qaadidda awoodaha iyo waajibaadyada mas'uuliyiinta laga soo magacaabay mid kastoo ka mid ah heerarkan si loo helo fursad maamulka si buuxa loogu horumarinayo ilaa heerka ugu hooseeya ayadoon la heyn farogelin badan oo ka imaanaya maamulada dhexe.

Waxyaabaha muhiimka ah ee uu ka kooban yahay nidaamka maamulka baahsan ee siyaasadda waxaa ka mid ah (1) kala saarista cad ee maamulka siyaasadeed ee u dhaxeeya heerarka dowladda, (2) hirgelinta sharciyada doorashada iyo geeddi-socodyada doorashada ee keenaya doorasho cadaalad ku dhisan oo xor ah, (3) nidaam xisbiyo siyaasadeed tartama kuna dhisan fursad lagu ololeynayo laguna raadsanayo taageerada codbixiyeyaasha, iyo (4) habab lagu siinayo ka qaybqaadasho degaanka ah iyo la-xisaabtan muwaadiniinta mas'uuliyiinta la doortay.

### 2.2.A Doorashada Gollayaasha Degaanka

Furnaanshaha iyo tartanka loo galayo xafiisyada gollayaasha degaanka waa wax aasaasi u ah baahinta maamulka siyaasadeed. Arrimaha laga yaabo in ay saameyso tani wadamo badan oo ku jira heerka kala guurka ah waa xoriyadda loogu tartamayo xafiis siyaasadeed la'aanta eexasho siyaasadeed, dhaqan ama qowmiyadeed ee laga yaabo in ay saameyso suurtagalnimada in dadka, gaar ahaan kuwa laga tiro badan yahay iyo haweenka, ay awoodaan in ay ku guuleystaan doorashooyinka gollayaasha degaanka.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Geeddi-socodka doorashada tooska ah ee gollayaasha degaanka ayaa la hirgelinayaa oo ku dhisan xulasho takoorid la'aan, tartan, furanaan iyo ololeyn loogu talogalay xafiisyada gollaha degaanka.**

### 2.2.B Ka Qaybqaadashada Muwaadinka Go'aan Gaarista

Xaq u yeelashada muwaadiniinta in ay ka qaybqaataan geeddi-socodka siyaasadeen ee aan lahayn saameynta loo baahnayn ama cadaadiska waa muuqaalka kale ee baahinta siyaasadda oo muhiim ah. Tani waxaa lagu wanaajinayaa shuruudaha ku saabsan dowladaha hoose in ay bixiyaan macluumaad ku saabsan siyaasadaha iyo qorsheyaasha loogu talogalay bulshadooda iyo in ay qabtaan madalo furan oo loogu talogalay wada-hadalka arrimahan, labaduba inta lagu guda jiro geeddi-socodyada doorashada iyo ololeyaasha siyaasadeed.

Hab lagu hubinayo in ka qaybqaadashadan muwaadinka loo marayo ururada xaafadda, dhisidda guddiyo muwaadin oo wax ka qabanaya arrimaha degaanka, sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha, fayodhawrka, horumarinta dhaqaale iyo qorsheynta kaabayaasha bulshada.

Qoondayn lagu bixinayo geeddi-socod miisaaniyad furan oo loo marayo dhageysiyada miisaaniyadda guud iyo bixinta macluumaad ku saabsan miisaaniyadda kharashadka, dakhliyada iyo barnaamijyada bixinta adeegyada ee muwaadiniinta degaanka.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Ka qayqaadashada muwaadinka waxaa la gaarsiinayaa ilaa heerka ugu sareeya ee suurtagalka ah iyadoo loo marayo qaadashada sharciyada ka qaybqaadashada muwaadinta heerarka dowladda hoose ee u baahan qabashada madalo bulshada oo ku saabsan go'aanada horumarka degaanka iyo miisaaniyadda, iyo sameynta guddiyo bulshada ku dhisan ee loogu talogalay waaxyada, sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo adeegyada fayodhawrka, iyo qorshaynta iyo dhisidda kaabayaasha bulshada.**

### 2.2.C Mas'uuliyiin Degaanka Laga Soo Magacaabay

Qodob kaloo muhiim ah ee loogu talogalay baahinta maamulka siyaasadeed waa awoodda uu gollaha degaanka ku sameynayo magacaabista jagooyinka maamulka sare ee fulinta ee muhiimka ah ee dowladda

hoose. Tani waxay ka hortageystaa in laga fogaado khilaaf u dhaxeeya maamulada sare ee fulinta iyo maareeyeyaasha barnaamijka ee khuseeya shaqaaleyntooda iyo shaqo ka cayrintooda, qiimeynta wax qabadkooda, iyo shuruudaha warbixineed ee mas'uuliyiinta siyaasadeed ee degaanka laga soo doortay.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Saraakiisha maamulka iyo guddoonka waxaa lagu soo magacaabayaa gudaha qorshaha sharci ee adeegga shacabka waxaana lagu soo magacaanayaa go'aanka gollaha degaanka waxayna hoos imaanayaan xulashadooda, qiimayn waxqabasho, iyo go'aano shaqo ka cayrin.**

## 2.3 Sifooyinka Baahinta Maamulka Maamuleed

Ujeeddada baahinta maamulka waa in la siiyo maamulada degaanka awoodda ay ku sameysanayaan xeerar iyo sharciyo ayaga u gaar ah ee lagu hirgelinayo sharciyada iyo siyaadahooda degaanka lagu go'aamiyay. Waa muhiim in saraakiisha degaanka ay awood u leeyihiin meelaha go'aaminta qorsheyntooda, maalgelintooda, shaqaalaha, iyo hababka lagu bixinayo adeegyada guud ee degaanka.

### 2.3.A Awooddo Nidaamin Loogu Talogalay Qorshaynta Kabayaasha Degaanka

Awoodda lagu qorsheynayo laguna hirgelinayo qorsheynta kaabayaasha degaanka waa mid ka mid ah muuqaalada baahinta maamulka la xiriira ee muhiimka ah ee ay tahay in la siiyo gollayaasha degaanka. Gollayaasha degaanka guud ahaan waxay hayaan macluumaadka ugu badan ee ku saabsan baahiyada dhismeyaasha iyo kaabayaasha degaanka waxayna leeyihiin fursad ay kaga dhageysanayaan muwaadiniinta ka ra'yi bixinta baahiyadooda ee adeegyadan. Gudaha awooddan nidaaminta gollayaasha degaanka waa in ay yeeshaan awoodda lagu go'aaminayo horumarka dhaqaale ee degaanka, qorsheynta adeegsiga dhulka, xuduudaha dhulka, iyo shuruudaha dhisidda.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Awoodda: Gollayaasha degaanka iyo guddoonka maamulka waxay awood buuxda u yeelanayaan in ay go'aamiyaan shuruudaha qorshaynta kaabayaasha degaanka ee loogu talogalay dowladahooda hoose, oo ku xiran xeerarka qorshaynta heerka qaran iyo ka qabyqaadashada muwaadinka ee go'aanada qorshaynta ee heerka degaanka.**

### 2.3.B Maamulka Maaliyadda Guud iyo Wax Soo-iibsashada ee Degaanka

Maamulka maaliyadeed iyo is-maamul hoosaadka sidoo kale waa qodob muhiim ah oo go'aaminaya xadka baahinta maamulka ee maamulada degaanka. Waa in ay jirto farogelin yar ama kontoroolidda geeddi-socodka miisaaniyadda dowladda hoose oo kaga imaanaya maamulada dhexe oo aan ka ahayn in la xaqiijiyo shuruudaha lagu soo aasaasay heerka dhexe ee loogu talogalay miisaaniyad isku dheellitiran, isticmaalka ilaha dakhliga ee la oggol yahay, iyo xaddadka deynta iyo deynsashada in loogu hoggaansamo geeddi-socodka go'aanka miisaaniyadda. Heerka dhexe waa in uu hubiyo in dowladaha hoose ay helaan deeqo aan shuruud ku xirnayn iyo kabab maaliyadeed si ay u daboolaan farqigooda maaliyadeed ee quman iyo in ay yeeshaan awood maaliyadeed oo ku filan ee loogu talogalay ilahooda dhaqaale. Awoodda lagu galayo wax soo-iibsiga iyo qandaraasyada kale waa in ay sidoo kale ka madaxbannaanaadan kontoroolidda gudaha shuruudaha heerarka dowaladda dhexe ee loogu talogalay wax soo-iibsigaa iyo xisaab hubinta lacag bixinada.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Gollayaasha degaanka iyo shaqaalaha maamulka waxay u yeelanayaan awood buuxda in ay hirgeliyaan shuruudahooda dakhliga iyo adeegsiga lacagaha ee dhaca gudaha geed-ssocodka miisaaniyadda rasmiga oo u dhigmi kara shuruudaha maaliyadeed ee heerka qaranka.** Go'aanada ku saabsan waa soo-iibsiga iyo heshiisyada waxay noqonayaan kuwo dhaca gudaha awoodda gollaha degaanka iyo shuruudaha ka warbixinta iyo sharciga maaliyadeed ee heerka qaran.

### 2.3.C Maamulka Shaqaalaha ee Degaanka

Sida ay muhiimka u tahay in la yeesho awoodda lagu gaarayo go'aanada maareynta maaliyadeed, dowladaha hoose ayadoo loo marayo saraakiisha la soo doortay iyo kuwa la soo magacaabay waxay u baahan yihiin awood lagu gaarayo go'aano ku saabsan shaqada ee gudaha qaabdhismeedyada maamulka iyo kuwa hay'adeed ee dowladda hoose. Awooddan waa in ay waafaqsanaato sharciyada iyo xeeradka u degsan adeegga shacabka ee laga yaabo in loo soo ansixiyay si heer dowladda dhexe ahaan ah, balse shaqo qorista, xulashada, qiimaynta wax qabasho, iyo ilaha kale ee laga eego nidaamka shaqaalaha.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Maamulka hirgelinaya nidaamka maareyta shaqaalaha ee loogu talogalay qorista shaqaaha, xulista, qiimayn waxqabasho, iyo shaqo ka cayrinta waxay noqonaysaa shaqada gollaha degaanka in uu go'aamiyo oo ku saleysan shuruudaha adeegga shacabka ee heerka qaran.**

### 2.3.D Maamulka Adeegyada Guud ee Degaanka

Maamulka iyo sidoo kale awoodda dowladda hoose ay ku bixinayso adeegyada guuda ee gudaha ilahooda dhaqaale, labaduba shaqaalaha iyo maaliyaddaba, waa aragti muhiim u ah baahinta maamulka. Xaqiiqdii, waa wax aad muhiim u ah in lagu kala saaro haddii baahinta maamulka dhab ahaantii si buux loo hirgeliyay. Golaha degaanka iyo adeegyada maamulka sare ee lagu go'aaminayo heerka adeeyada la bixinayo laguna helayo kadibna lagu maareynayo khayraadyada lagu bixinayo adeegyada waxay aasaas u yihiin nidaamka baahinta maamulka.

Waa muhiim in la fahamo awoodda bixinta adeegyadan in ay la xiriirto go'aanada degaanka ee ku saabsan heerka adeegyada la bixinayo. Si kastaba, macnaheedu ma aha in dowladda hoose aysan noqon la'aanta shuruudaha qaar ee loogu talogalay tayada iyo waxtarka bixinta adeegyadan. Guud ahaan, doorka lagu aasaasayo heerarka waxqabadka ee adeegyada sida waxbarashada, caafimaadka, fayodhawrka, iyo adeegyada kale waxay dhacaan gudaha awooda heerka dhexe ee dowladda. Tani waxay xaqiijinaysaa in dhammaan muwaadiniinta ay helaan heerar la mid ah adeegyada dadweynaha ee muhiimka ah ee heerka dhexe uu mas'uuliyad ka saaran tahay in uu xaqiijiyo in dhammaan muwaadiniinta ay helaan. Meelaha muhiimka ah ee ay tahay in heerarka heerka dhexe ahaan loo soo rogo waa manhajka dugsiyada, heerarka tayada daryeelka caafimaad, baaritaanka caafimaadka, heerarka tayada dhismaha, iyo meelaha kale oo ay ka jiraan danaha qaranka ee isburinaya ee difaacidda caafimaadka iyo badbaadada muwaadiniinta.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Dowladaha hoose waxay yeelanayaan awoodaha dhammeystiran ee lagu bixinayo adeegyada guud ee degaanka ee gudaha mabda'a habka kor ka maamulidda iyo go'aaminta awoodaha shaqaalaha iyo maaliyadda ee dowladda hoose**.

### 2.3.E Awood kalageynta Bixinta Adeegyada

Bixinta adeegyada mararka qaarkood waxay u baahan kartaa in heerka dhexe ayadoo loo marayo wasaaradaha leh xafiisyo hoosaad qaran in ay si toos ah u siiyaan adeegyada muwaadiniinta bedelkii laga dooni lahaa in dowladda hoose ay tani sameyso. Tusaale ahaan, wasaaradaha dhexe waxay bixinayaan waxa loo yaqaano bixinta adeegyada awoodahooda kalageysan. Tani waxay ka dhici kartaa tuusaale ahaan meelaha dowladaha hoose aysan haysan dhaqaale iyo shaqaale ay ku bixiyaan adeeggan. Hase-yeeshee, meesha ay dowladda hoose ay haysato awoodda iyo dhaqaalaha lagu bixinayo adeegga, waa in loo xilsaaraa heerkaasi dowladda ayadoo loo hoggaansamayo mabada'a habka kor ka maamulidda.

Wadamo badan oo ku jira xaalado kala guur ah, awoodda qaybaha dowladda hoose wali way xaddidan tahay intaba dhaqaalaha iyo shaqaalahaba waxaysana lahayn heer siyaasadeed ee baahinta maamulka uu si waxtar leh uu wax ugu qabanayo baahiyada muwaadinka. Halka ay xaaladdu sidaani tahay, xafsiiyada qaran-

hoosaadka ee wasaaradaha dhexe ee ku yaala degaamadan waa in ay bixiyaan adeegyada muhiimka ah, sida adeegyada caafimaadka, waxbarashada, biyaha, iyo fayo-dhawrka.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Bixinta adeegyada ee xafiisyada awoodooda kalgeysan ee wasaaradaha dhexe waxaa lagu salaynayaa la'aanta awoodaha maaliyadeed iyo mida shaqaale ee dowladda hoose iyo qaabka waxa lagu doorto iyo geeddi-socod qiimeyn ee lagu go'aaminayo in dowladda hoose aysan haysan awoodahan. Tixgelin ayaa la siinayaa adeegyada muhiimadda qaran leh, sida waxbarashada iyo caafimaadka, halka danaha heerka qaran ee sinnaanta bixinta adeegyada iyo heerarka heerka qaranka aysan ka soo bixi karin dowladaha hoose.**

### 2.3.F Baahinta Maamulka Bixinta Adeegyada

Dowladaha hoose ee haysta awoodaha shaqaale iyo dhaqaale ee ay si tayo iyo hawlkarnimo leh ugu bixin karaa adeegyada waa in awood loo siiyo si ay kuwani ugu bixiyaan gudaha nidaamka sida buuxda maamulkiisa loo baahiyay. Tani waxay hubinaysaa in baahiyada muwaadiniinta degaanka iyo mudnaanaha bixinta adeegyada ay sida ugu waxtarka badan loo go'aamiyo iyo in adeegyada loo bixiyo habka ugu kharashka yar.

Baahinta maamulka iyo awood kalageynta waa in aan loo arkin habab tartamaya ama aan wada jiri karin ee bixinta adeegyada, balse loo arko habab dhammeystiran oo laga faa'iideysan karo ayadoo lagu saleynayo awoodaha dowlaha dhexe iyo dowadda dhexe si loo bixiyo adeegyadan.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Baahinta awooda waxay noqonaysaa habka la doorbidayo ee bixinta adeegyada ee uu hagayo mabda'a habka kor ka maamuliida iyo awoodaha dowladda hoose ee ku dhisan nidaamkooda kala saarista iyo awoodaha bixinta adeegyada ee qaybahan degaanka ah.**

## 2.4 Sifooyinka Baahinta Maamulka Maaliyadeed

Baahinta maamulka maaliyadeed wuxuu bixinayaa qaabka loogu qoondaynayo khayraadka maaliyadeed dowlaha hoose waxaana ka mid ah xiriirka maaliyadeed ee u dhaxeeya dowladaha hoose iyo dowladda dhexe. Filnaanshaha xiriirka baahinta maamulka maaliyadeed waa aasaaska ee waxyaabaha ka koobma ee siyaasad ahaan la baahiyay iyo maamulidda hababka bixinta adeegyada loo hirgelin karo.

Sida baahinta maamulka iyo baahinta maamulka siyaasadeed ay ugu dhisan yihiin qaybo gaar ah, baahinta maamulka maaliyadeed waxay ku dhisan tahay afar qaybood oo gaar ah. Kuwani waxaa lagu sharxay qaybahan soo socda.

### 2.4.A Qoondaynta Kharashka

Qoondaynta kharashka waa shaqooyinka bixinta adeegyada ee loo xilsaaray in dowladaha hoose ay qabtaan. Kuwani sida caadiga ah waa shaqooyinka waxbarashada, caafimaadka, biyaha, fayodhawrka, waddooyinka, kuwa kale oo adeegyada bulshada ah oo badan, shaqooyinka madadaalda iyo dhaqanka.

Aasaaska qoondaynta kharashyada wuxuu si toos ah ula xiriira mabda'a habka kor ka maamulidda. Mabda'a wuxuu sheegayaa in adeegyada uu bixiyo heerka ugu hooseeya ee dowladda ee leh awoodda uu si tayo iyo hawlkarinimo leh ugu bixinayo adeegga.

Ma jira heer aasaas ah oo lagu go'aaminayo adeegyada loo xilsaarayo dowladaha hoose waxaana si gaar ah u hoos imaanayaan kala duwanaanshaha awoodaha maaliyadda iyo shaqaalaha. Waxaa kaloo ka jira farqiyo waaweyn wadamadama oo dhan oo ku saabsan qoondayntan wadan kastana wuxuu u baahan yahay in uu qeexo qoondaynta kharashka oo ku saleysan shuruudahooda siyaasadeed, bulsho, dhaqan, sidoo kale tilmaamaha juqraafiyeed.

Guud ahaan, qoondaynya kharashka waxaa loogu qoondeeyaa midkood aasaaska shaqo wadaagidda ama shaqada gaarka ah. Shaqooyinka gaarka ah waa kuwa sida gaarka ah loogu qoondeeyay dowladda hoose in ay hirgeliso; sida waddo degaanka iyo dayactirka jid-cadeyaasha, iyo kuwa leh shaqooyinka la wadaago oo ay tahay in labadubada dowladda hoose iyo dhexe ay doorar u xilsaaran yihiin. Doorka la wadaago waa waxbarashada iyo caafimaadka caadiga ah ee ay dowladda hoose ka mas'uulka tahay bixinta adeegyada dhabta ah, balse heerka dhexe ay bixiyaan taageerada dhaqaale ee loogu talogalay hirgelintan.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Qoondaynta karashka hawlaha adeegga dadweynaha waxaa la sameeyaa ayadoo lagu saleynayo aasaaska gooniga ah ee kala saarista dowladda hoose, awoodaha shaqaale iyo mida maaliyadeed, iyo muhiimadda bixinta sinnaanta adeegyada loo gaarsiinayo muwaadiniinta degaanka oo ku dhisan heerarka tayada heerka qaran.**

### 2.4.B Qoondaynta Dakhli iyo Maamulka Dakhliga Degaanka

Sida qoondaynta kharashka oo kale qoondaynta dakhli waxay ku saleysan tahay khayraadyada dakhli ee aadka loo heli karo ee ayna qaadi karaan dowladaha hoose. Canshuuraha qaarkood waxay si gaar ah ugu habboon yihiin dowladaha hoose, sida canshuuraha guryaha, canshuuraha ganacsiga, iyo ujrooyinka isticmaalaha adeegyada ee uu muwaadinka ka faa'iideysanayo, sida gaadiidka, biyaha, qashin ururinta iyo adeegyada dadweynaha ee degaanka laga bixiyo.

Dakhliyada ilaha gaarka ah, sida canshuurta guryaha iyo canshuurada kale ee degaanka, waa in ay ka dhexjiraan awooda dowladda hoose in ay caddeyso aasaaska canshuurta iyo xaddiga canshuurta iyo in loo ururiyo cashuurtaasi si heerka hoose ah. Nasiib daro, tani ma aha xaaladda inta badan ee dowlahada hoose, xaaladaha badankood heerka dhexe kaliya ma dejiyo aasaaska iyo xaddiga canshuurta, balse waxaa laga yaabaa in uu ururiyo canshuurta ama uu la wadaago canshuurta heer canshuurta dowladda dhexe ah, sida canshuurta dakhliga shakhsiyeed. Xaaladahan, baahinta maamulka maaliyadeed ee dowladaha hoose waxay ku khasban yihiin in ay maamulaan madaxbannaanida maaliyadeed ee gaarka u ah.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Hawlgelinta dakhliga iyo awoodda maaliyadeed ee ugu badan ee ilaha dakhliga waxaa la taageerayaa ayadoo la oggolaanayo is-maamulka maaliyadeed ee dowladda hoose si loo go'aamiyo aasaaska canshuurta iyo in la dejiyo sicirka canshuurta ee loogu talogalay tiro ilo dakhli u gooni ah oo la xushay iyo lacagaha laga qaadayo. Dowladaha hoose waxay si buuxda mas'uul ugu noqonayaan nidaamka canshuur qaadidda oo ku dhisan aqoonsiga canshuur bixiyeyaasha iyo go'aaminta canshuurta saxda ah ee la bixinayo.**

### 2.4.C Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha ka Dhaxeeya

Ilaa iyo heerka ay dowladaha hoose aysan awoodin in ay ku maalgeliso qoondayntooda kharashka dakhliyada ayaga u gaarka ah, kabka maaliyadeed ee dowladda dhexe ooga imaanaya dowladda hoose ayaa looga faa'iideystaa si loo daboolo farqigan maaliyadeed. Heerka dhexe wuxuu u baahan yahay in uu go'aamiyo isha laga helayo lacagaha isugeynta kabka, hababka qoondaynta kala duwan ee sida ku filan loogu daboolayo farqiga maaliyadeed ee kharashka degaanka ee dakhliyada, iyo hababka lagu soo wareejinayo khayraadyadan ayadoo loo marayo midkood kabab ku xiran shuruud ama mida aan shuruudda ku xirnayn.

Kababka loo qoondeeyey ee ku saleysan shuruudo aan shardiga ku xirnayn waxay siyaan dowladaha hoose in ay si aad ah xor ugu ahaadaaan go'aanka qoondaynta maalgelinta ujeeddooyinkooda. Kuwan waa in loo adeegsado in lagu daboolo kharashka shaqooyinka guud ee dowlaha hoose. Deeqaha shuruudda ku xiran waa in loo adeegsado shaqooyin gaar ah sida mashaariicda waxbarashada, caafimaadka, iyo dhismaha.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Go'aaminta kabka dowladaha ka dhaxeeya waxaa lagu**

**saleynayaa aasaas ujeeddo iyo hufahaan iyo tixgelinta kala duwanaanshaha ee kala saarista dowladda hoose, arrimaha juquraafiga iyo meesha ay ku taalo, degsiimada dadka, iyo xaaladaha la xiriira dhaqaalaha iyo bulshada.**

### 2.4.D Deynta iyo Deynsashada Dowladda Hoose

Qaybta afaraad ee mashruuca baahinta maamulka maaliyadeed waa si fiican u adeegsiga deynta ama deynsashada lagu maalgelinayo qayb ka mid ah shaqooyinka dowladda hoose. Waxaa jira adeegyo badan oo kuwa dowladda hoose ah oo u baahan maalgelin lacageed oo badan ee aanan lagu maalgelin karin ilaha dakhliga sannadlaha. Waxaa jira mashruucyo dhismo guud ee loogu talogalay adeegyada sida dhismaha jiddadka, biyo gelinta, iyo waxyaabaha kale ee la maalgeliyo. Kuwani waa kharashyada loogu talogalay waxyaabaha la adeegsan karo muddo ka badan hal sano, sidaas awgeed, waa in loo tixgeliyo maalgelino ahaan.

Si loo maalgeliyo mashaariicdan, inta badan waa muhiim in dowladda hoose ay soo deensato lacago laga bixinayo dakhliyadooda mustaqbalka si ay u maalgeliso mashaariicdan. Tani waxay u oggolaanaysaa in dowladda hoose ay ka maalgeliso mashaariicdan midkood dakhliyada ayada u gaarka aha ama ujrooyinka lagu soo dabaqi doono adeegsiga tasiilaadyada la maalgeliyay.

Dowladaha hoose waxay u baahan yihiin in ay yeeshaan awood maaliyadeed oo ay ku maalgelinayaan mashaariicdan ayna awood ugu yeelanayaan in ay deyn soo qaataan oo ay ku maalgelinayaan mashaariicdan. Sidaas-awgeed, waxaa jira xaddi badan oo ah xeerar iyo kontorool maaliyadeed ee lagu dabaqayo dowladaha hoose ee doonaya in ay lacag deynsadaan. Wadamada ku jira marxaladda kala guurka badankooda, dowladda dhexe ayaa hagaajinaysa heerka deynta ay dowladda hoose heli karto waxayna ilaalinaysaa xuquuqda lagu ansixinayo bixinta deynta ama deynsasho kasta ee dowladda hoose ah.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Dowladaha hoose waxay awood u yeelanayaan in ay lacago soo deensadaan ayna u adeegsadaan deynta u jeedooyin degaanka ah oo ku xaddidan awoodooda maaliyadeed iyo qorshaha sharciga ee qaran. Go'aanada adeegsigga deynta waxaa lagu saleynayaa wada hadalada dadweynaha ee caddadka lacageed iyo adeegsiga deynta ee ujeeddooyinka kabayaasha degaanka waxaana ku waajibta dib u hubinta maamulka heerka qaran.**

### 2.4.E Isku dheelitiridda Siman ama Qumman

Mashruuca baahinta maamulka maaliyadeed, kababka maaliyadeed ee dowladaha ka dhaxeeya waxay wax ka qabadanayaan isku dheelitirnaanta siman ee dowladda hoose wajahayso. Isku dheetirnaanta qumman waxay la xiriirtaa kala duwanaanshaha u dhaxeeya baahiyada kharashka dowladaha hoose ee loogu talogalay shaqooyinka loo qoondeeyay iyo awoodooda dakhli qaadidda. Kababka waxay isku soo dhoweynayaan isku dheelitirnaan la'aanta qumman ee dowladda dhexe.

Isku dheelitirka siman wuxuu ka dhigan yahay kala duwanaanshaha ka jira dowladaha hoose oo dhan marka la eego baahiyadooda kharashka iyo awooddooda maaliyadeed. Dowladaha hoose waxay yeelanayaan baahiyo kharashaad kala duwan iyo dakhliyo ayaga u gaar ah. Isku dheelitirnaan la'aantan ka jirta dowladaha hoose oo dhan waxaa loo yaqaanaa isku dheelitirnaan la'aanta siman. Kababka waxay isku dayayaan in ay simaan isku dheelitirnaan la'aanta ka jirta dowladahan hoose ee leh shuruudaha kharashka iyo ilaha dhakhli ee la midka ah.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Ilaa iyo heerka suurtagalka ah iyo gudaha xaddadyada ilaha dakhliga dhexe, kababka maaliyadeed ee dowladaha ka dhaxeeya waxay raadsanaysa in ay ka guulgaarto isku dheellitiridda qumman ee kharashka iyo dhakhliyada dowladda hoose si loo buuxiyo faraqa maaliyadeed ee baahiyada maalgelinta. Isku dheellitirnaanta siman waxaa lagu gaarayaa ayadoo la adeegsanayo qaybaha kababka maaliyadeed ee kala duwan ee ka dhexjira dowladaha hoose oo ku saleysan kala saarista dowlaha hoose, iyo arrimaha ka midka ah qaacidooyinka kabka.**

### 2.4.F  Waadaxnimada Qaacidooyinka Qoondaynta

Aad ayay muhiim u tahay in qaacidooyinka qoondeynta kabka la sameeyo ayadoo lagu saleynayo shuruud ujeeddo aasaasi ah qaaciddada qoondeyntada waxaa loo adeegsadaa hab waadaxnimo oo ay garanayaan ayna fahmi karaan dowladaha hoose.  Tani waxay ka hortagaysaa suurtagalnimada u kala eexashada iyo hiilashada ee qoondaynyada waxayna hubinaysaa in kababka ay u adeegaan ujeeddada sixidda isku dheelitirnaan la'aanta siman iyo mida quman ee ah ujeeddada kababka ka dhaxeeya dowladaha.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka:  Qaacidooyinka qoondeynta xawilaadda waxay ku saleysnaan doonaan ujeeddada iyo arrimaha la ansixiyey waxaan si furan loogala hadlayaa wakiilada saamileyaasha dowladda hoose iyo dolwadda dhexe ayadoo loo marayo geedi-socod wada tashi oo rasmi ah.**

### 2.4.G Awoodda Maaliyadeed

Awoodda maaliyadeed waa cabbirka ilaha maaliyadeed ee ay heli karto dowladda hoose si ay u maalgeliso kharashyadadeeda.  Waa muhiim in dowladaha hoose ay adeegsadaan dhammaan ilaha dakhliga ayaga gaarka u ah ee la heli karo ayna gaaraan heerka ugu sareeya ee dakhli qaadidda suurtagalka ah.  Mashruuca kabka dowladaha ka dhaxeeya waa in loo adeegsadaa cabbirka awoodaa maaliyadeed oo ku saleysan waxa ah in dowladda hoose ay suurtagalka tahay inay u qaado dakhli ahaan sida isir ka mid ah qaacidooyinka kabka ahaan.  Tani waxay hubinaysaa in kababka lagu saleeyo taageerida isla ekaysiinta quman iyo mida siman ee ka dhexjirta dowladaha hoose.  Waxay sidoo kale siinaysaa dheerigelin dowladaha hoose in ay si buuxda si waxtar leh ugu adeegsadaan ilahooda dakhli ama halista in kababkooda la yareeyo haddii aysan ka guulgaarin awoodooda maaliyadeed ee buuxda.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka:  Adeegsigga tallaabooyinka awoodda maaliyadeed waxaa lagu darayaa horumarinta kabka ka dhaxeeya dowladaha iyo dhiirigelinada la siiyo dowladaha hoose si loo ballaariyo ilahooda dakhli iyo ururinta dakhliyada.**

### 2.4.H Waajibaadyada Aanan La Maalgelinin

Waajibaadyada aanan la maalgelinin waa dhibaato weyn ee ka jirta horumarinta nidaamka baahinta maamulka maaliyadeed.  Waajibaadyada aanan la maalgelinin waxay dhacaan marka heerka dowladda dhexe uu ku soo wareejiyo mas'uuliyadda bixinta adeegyada dadweynaha dowladaha hoose ayadoon sidoo kale siinin khayraadyada maaliyadeed ee lagu daboolayo baahiyada kharashyada shaqooyinkan.  Tani waxay noqonaysaa hab dowladda dhexe ay isaga dejinayso waajibaadyadeeda ayna isaga ilaalinayso mas'uuliyadda adeegyadan.  Waajibaadyada aanan la maalgelinin waa in aanan lagu oggolaanin qorshaha sharci waana in aanan loo adeegsanin hab lagu gaarayo baahinta maamulka maaliyadeed.

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka:  Dowladda dhexe kuma wareejinayso dowladaha hoose wixii shaqooyin ah ee aan maalgelintooda la bixinin si ay u bixiso kharashyadan bixinta adeegyada.**

### 2.4.I  Aasaaska Qoondaynta Kala Duwan ee Loogu Talogalay Degaamada Miyiga iyo Magaalooyinka

Wadamo badan ee maraya heerka kala guurka waxay hirgeliyaan mashruuca baahinta maamulka oo loogu adeegsan karo qaacido qoondayn isku mid ah dhammaan dowladaha hoose, labaduba dowladaha hoose ee miyiga iyo kuwa magaalooyinka.  Tani waxay abuuri kartaa farqi weyn oo u dhaxeeya kababka mana tixgelinayso kala duwanaanshaha tirada dadka, mugga dadweynaha, xajimiga dhulka dowladda hoose, sifooyinka juqraafiyeed iyo ilaha dakhliga ee sida  xooga badan ugu kala duwan degaamada magaalada iyo miyiga.  Sida uu muujiyay Bahl " Dowladaha qaran-hoosaadka waxay leeyihiin awooda aad u kala duwan ee ay ku bixinayaan ayna ku maalgelinayaan adeegyada, iyo xaqiiqdii awoodo kala duwan oo ay deyn ku helayaan. Waxaa laga maarmaan noqon karta in la sameeyo nidaam kala duwanaansho si cad loogu

aqoonsan karo oo loola jeeda halka heerarka kala duwan ee dowlada lagu siinayo awoodo maalgelin iyo mas'uuliyadda kharashka. Meelaha ku yaala dabaqada hoose waxay aad ugu tiirsanaan karaan deeqo, ayadoo meelaha aadka u horumarsanna ay aad ugu tiirsanaan karaan canshuuraha degaanka, waxayna soo qaadaan karaan deyn si ay u maalgeliyaan kharashyada ku kacaya raasumaal."[6]

**Bayaanka Siyaasadda Baahinta Maamulka: Qoondaynta kabka waxay ku saleysan doonaan kala duwanaanshaha u dhaxeeya dowladaha hoose ee ay ku badan yihiin degaamada miyiga iyo magaalada ah oo ku saleysan cabbiraadyada degaanka iyo tirada ama mugga dadweynaha ee lagu aasaasay shardhiga nidaamka kala saarista dowladda hoose.**

# *3 Xaaladda Baahinta Maamulka ee Puntland*

Qaybtan waxaan dib ugu eegaynaa xaaladda hadda ee khuseysa arrimaha nidaamka maamulka baahsan ee Puntland. Tani waxay ka hadlaysaa meelaha soo socda ee ah waxa ay ka koobanto sifada baahinta ee lagu tilmaamay qaybta sare.

## 3.1 Qorshaha Sharci

Qaybta koowaad ee Qaybta 4 ee Dastuurka Puntland wuxuu khuseeyaa maamulada degmooyinka iyo gobolada. Ayadoo la eegayo dastuurka 'Puntland waxay ku dhaqantaa mabaadiida baahinta maamulka (ee ka bilaabanaya hoos ilaa kor)'. Dastuurka wuxuu hoosta ka xariiqayaa doorka muhiimka ah ee dowladda ay 'dib u habeyn iyo nidaamin ugu sameynayso maamulada Gobolada iyo degmooyinka ee Puntland'. Siyaasaddan sidaas awgeed waxay qayb ka tahay codsiga dastuurka dib u habeynta baahinta maamulka.

Sharciga waxaa lagu hindisay in la taageero hirgelinta wax uu u baahan yahay dastuurka waa Sharciga L. 7 ee 18 Sibteembar 2003 oo cinwaankiisu uu yahay 'Sharciyada Golloyaasha Degmada ee Dowladda Puntland ee Soomaaliya'. Sharciga L. 7 waxaa ansixiyay Baarlamaanka kadibna waxaa ku taageeray Madaxweynha Puntland.

Sharciga L. 7 wuxuu tilmaamayaa in maamulka Dowladda Hoose oo ku dhisan yahay mabda'a is-maamulidda dadka sida ay ku caddahay Qodobka 83 ee Dastuurka Dowladda Puntland ee Soomaaliya. Dhismaha Dowladda Hoose wuxuu qayb ka yahay Dowladda Dhexe ee Dowladda Puntland ee Soomaaliya siyaasad ahaana waxaa matalaya Wasaaradda Dowladda Hoose iyo Horumarinta Miyiga.

## 3.2 Baahinta Maamulka Siyaasadeed

### 3.2.A Doorashada Gollayaasha Degaanka

Sharciga wuxuu dhigayaa qaabab maamul loo marayo golle la doorto, oo ay ka mid tahay tirada xubnaha la magacaabayo, ansax ahaanta xubnaha, ruqsaynta, doorarka iyo mas'uuliyadaha (Qodobka 3-8 iyo 10-15 iyo kuwo kale). Wuxuu bixinayaa muuqaala guud ee doorarka iyo mas'uuliyadaha guddiga joogtada ah iyo guddiga fulinta sidoo kale saraakiisha sarsare ee heerka degmo ee harsan. Waxaa intaasi dheer oo ka mid ah heerarka kala duwan ee maamulka (sida uu qoray Sharciga L.7 sidoo kale "Xeerarka ku saabsan Qaabdhismeedka Gollayaasha Degmada ee Dowladda Puntland ee Soomaaliya ' ee ku lifaaqan laga soo bilaabo Febraayo 2005).

[6]Bahl, Roy, 1999, Sharciyada Hirgelinta ee Baahinta Maamulka Maaliyadeed, Warqadda shaqada Barnaamijka Daraasadaha Caalamiga ah 99-1, Atlanta: Dugsiga Daraasadaha Siyaasdda Andrew Young, Jaamacadda Gobolka Georgia

Dastuurka Puntland iyo Sharciga Doorashada waxay si cad u muujinayaan geeddi-socodyada doorashada, farsmada iyo habraacyada kale.

Muddada xafiiska ee gollayaasha degaanka waa 5 sano. Puntland waxay ka kooban tahay 43 degmo oo wakhti xaadirka leh 10 gollaayaal degaan oo shaqeynaya.

Guddiga Doorashooyinka Puntland ee kumeelgaarka ah  waa hay'adda lagu aaminay in ay fidiyaan ayna farsamo ahaan fududeeyaan geeddi-socodka doorashada.

Hadda la joogo, gollayaasha degaanka waxaa la dhisay ayadoo oo qaab qabiileed loogu qaybsaday kursiyada gollaha.  Inkastoo ay jireen dadaalo la sameeyay si loo qabto doorashooyinka dimuqraadiga ah ee ugu horeeya ee gollaha degaanka Puntland 15[ka] Luulyo, waa lagu guuldareystay walina Puntland waxay ku sii socotaa nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan.

Muddada xafiiska ee gollayaasha degaanka waa 5 sano. Puntland waxay ka kooban tahay 43 degmo oo wakhti xaadirkan leh 10 gollaayaal degaan oo shaqeynaya.  33ka degmo kale malaha gollayaal degaan, balse waxay leeyihiin maamulo degmo oo shaqeynaya.

Doorashooyinka gollaha degaanka waxaa loo jadwaleeyahay in ay qabsoomaan 15 Luulyo, 2013, Hase yeeshee, maalinta ka horeysay doorashada Madaxweynaha wuxuu soosaaray digreeto lagu baajinayo doorashooyinka oo ay sabab u ahayd xaalado colaadeed oo imaan karay.   Doorashooyinkan wakhti kale looma qaban.

### 3.2.B Ka Qaybqaadashada Muwaadinka Go'aan Gaarista

Dastuurka wuxuu sii qeexayaa baahida loo qabo ka qaybqaadashada dhanka hoose iyo waadaxnimada sharaxaadda baahintaasi maamulka ' waa in lagu saleyaa nidaamka is-maamulka ee oo ay ka qaybqaadanayaan kooxaha bulshada' iyo in 'Kooxaha bulshada ay doortaan Gollaha Dejiya Sharciga'.

Dastuurka Puntland wuxuu raacayaa qiimeyaasha ka qaybqaadashada siyaasadeed iyo la-xisaabtanka iyo waadaxnimda xaga sare/xaga hoose loo dhaadacayo.  Wuxuu sidoo kale xaqiijinayaa baaritaanada iyo isku dhiilitirnaanta ka jirta hay'adaha dowladda.

Ka qaybqaadashada dadweynaha dowladda hoose waa mid ku yara daciif ah Puntland. Dadaalo ayaa socda oo looga qaybgalinaya bulshooyinka sidoo kale in la soo bandhigo hab ay wadaagan dowladda iyo dadka oo gacan ka gaysanaya horumarinta dhaqaalaha degaanka. Ma jirto siyaasado cad oo la hubo oo lagu kalsoonaan karo ee kor u qaadaysa ka qaybqaadashada siyaasadeed iyo la-xisaabtanka la wadaago ee heerarka hoose iyo kuwa dhexe.

Degmooyinka ka qaybqaatay barnaamijka JPLG waxay sameysteen geeddi-socod iyo habraacyo ee muwaadiniinta loogu qaygelinayo go'aan qaadasahda tanina waxay u noqon kartaa tusaale degmooyinka kale.

### 3.2.C Mas'uuliyiin Degaanka Laga Soo Magacaabay

Ayadoo la hoostagaya qodobada Sharciga L. 7 ee ku saabsan Gollayaasha Degaanka, Qodobka 29 wuxuu ka hadlayaa in shaqaalaynta xafiisyada dowladda hoose lagu xuso sharci gaar ah oo ay diyaarinayso Wasaaradda Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga (hadda ka sameysan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga).

Gudaha shaqaalaynta dowladda hoose, Xoghayaha Gollaha Degaanka waxaa soo magacaabaya Wasaaradda Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga sida uu qabo Qodobka 30 ee Sharciga L.7. Hase-yeeshee,

xoghayaha iyo shaqaalaha kale ee degaanka waa in ay ugu warbixiyaan waajibaadyadooda shaqo Duqa Magaalada sida la faray Duqa Magaalada.

Waxaa siidheer jagada xoghayaha Gollaha Degaanka, in wasaaradaha ay magacaabayaan shaqaale heer degmo ah, sida Sarkaalka Waxbarashada Degmada qaabilsan oo ay soo magacaabayso Wasaaradda Waxbarashada, Sarkaalka Caafimaadka Degmada u qaabilsan oo ay soo magacaabayso Wasaaradda Caafimaadka, oo ku lug yeelaneyso taageerada Duqa Magaalada ee heerka Degmo oo isku xiraya shaqada wasaasadaha ee gudaha degmada.

## 3.3 Baahinta Maamulka

### 3.3.A Awoodaha Nidaaminta iyo Qorshaynta Kabayaasha Degaanka

**Qodoba 9.9 ee Sharciga L. 7 wuxuu bixinayaa aasaaska sharci ee loogu talogalay in gollaha degaanka ay farogeliyaan qorshaynta adeegsiga dhulka ku yaala degmooyinka, tuulooyinka iyo magaalooyinka ee horumarinta adeegsiga dhulka ama Qorshaha Magaalo. Tani waxaa laga fuliyay xaaladaha qaar, sida Garoowe, oo leh dukumeenti, loo yaqaano Jaartar ama Axdi, kaasi oo bixiya qeexitaanada qaar ee adeegsiga dhulka iyo qorshaynta xadka degmada.**

**Oggolaanshaha dhisidda dhismo waa shaqada Waaxda Dhulka ee gudaha Waaxda Hawlaha Guud ee degmada. Waxay meelmariyaan heerarka qaarkood ee dhismo dhisidda. Tusaale ahaan, dhismooyin laamiyeeri ah ayaa waxaa ka dhistay xuquuqda degmada gudaheeda muhaajiriinta qaar ama shakhsiyaad gudaha ku barokacay dhismaha loo adeegsanayo waxyaabaha laamiyeeriyada ahna lama oggolaha. Dowladda hoose ee degmada waxay damacsan tahay in ay burburiso dhismooyinkan mustaqbalka dhow.**

**Garoowe sidoo kale waxay leedahay nidaamka khariiddada GIS oo ay sameysay hay'adda UNHabibtat oo bixiya khariidadaha satilaytka ee dhismooyinka iyo bededka dhulka ee degmada gudaheeda ah. Tani waxaa loo adeegsanayaa ujeeddooyin qorshayn sidoo kale u canshuur ururinta habboon.**

**Adeegsiga dhul kasta iyo hababka qorshaynta kaabayaasha ee dibadda ka ah degmooyinka waaweyn lama garanayo, balse waxay u muuqataa in aysan suurtagal ahayn. Kaliya degaannada degmada JPLG ayaa ka jiray horumarinta qorshaynta kaabayaasa sida qayb ka mid ah geeddi-socodla Qorshaha Horumarinta Degmada ahaan.**

**Dhismaha Gollaha Garoowe gudahiisa waxaa jira Guddiga Hawlaha Guud oo kor ka ilaaliya Waaxda Hawlaha Guud tanina waxay bixinaysaa aasaaska qaar ee go'aan gaaridda bulshada oo ku saabsan qorshaynta adeegsiga dhulka.**

### 3.3.B Maamulka Maaliyadda Guud iyo Wax Soo-iibsiga ee Degaanka

Miisaaniyada degaanka waxaa qaabeeya oona ansixiya gollaha degaanka waxaana kadib loo gudbiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga (MOI) si ay ugu sameyso dib u hubin farsamo miisaaniyadda. Miisaaniyadda sidoo kale waxaa loo diraa Wasaaradda Maaliyadda, balse baaris xeeldheer laguma sameynayo wixii sixitaan farsamo ama maaliyadeed ah. Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI) waxay u gudbinaysaa miisaaniyadda dowladda hoose baarlamaanka si uu dib u hubin ugu sameeyo kadibna uu u codeeyo qaadashadeeda. Miisaaniyadda dowladda hoose waxay ka baxsan tahay miisaaniyadda dowladda dhexe.

Sida ay qabto Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI), baarlamaanka wuxuu dib u hubinayaa miisaanyadda dowladda hoose wuxuuna ku xusayaa isbedelada meelaha qaar ee miisaaniyadda, gaar ahaan canshuuraha

degaanka ama tusmada ascaarta ee gollaha degaanka uu ku taliyay. Marka baarlamaanka uu muujiyo isbedelada uuna u codeeyo miisaaniyadda waxaa lagu soo celinayaa gollaha degaanka si ay u ansixiyaan isbedelada uu baarlamaanku sameeyeen.

Hase-yeeshee, Xoghayaha Baarlamaanka wuxuu tilmaamay in ay waligooda helin miisaaniyadaha degmada inkastoo ay wayddiisteen. Baarlamaanka wuxuu jeclaan lahaa in uu yeesho nidaam miisaaniyad midaysan oo ay wasaaradaha dowladda dhexe iyo miisaaniyada degmada la isugu geeyo hal dukumeenti miisaaniyad.

Wasaaradda Maaliyadda (MoF) waxay tilmaantay in sannadka xiga miisaaniyadaha degaanka lagu dari doono geeddi-socodka qaab-dhismeedka miisaaniyadda guud ee dowladda dhexe kadibna miisaaniyadda midaysan ayaa la hirgelinayaa.

Waxaa jira geeddi-socod wax soo-iibsiga caadiga ah ee ay adeegsadeen heerarka hoose iyo heerka dhexe oo ku saleysan geeddi-socoda wax iibsashada lagu tartama. Geeddi-socodka qandaraas bixinta wuxuu ku saleysan yahay horumarinta tilmaamaha gaarka ah ee qandaraaska, soosaaris, u soo bandhigidda dadweynaha, qandaraasyo lagu heshiiyay, qiimeynta guddiga qandaraaska, iyo ku abaalmarinta soo bandhigidda ugu waxqabad fiican eena ku saleysan kharashka. Geeddi-socodka iibsiga si madaxbannaan looguma qiimeyn karo darsadan.

### 3.3.C Maamulka Shaqaalaha ee Degaanka

Waxaa jira sharci adeegga shacabka khuseeya oo ay hirgelisay Wasaaradda Shaqaalaha sida qayb ka mid ah hab furan oo mudnaan lagu tartamo leh oona ku saleysan nidaamka adeegga shacabka. Waxay tilmaamaysaa geeddi-socodka booska shaqaaleynta iyo geeddi-socodka xulashada iyo haynta.

Degmada Garoowe warbixinteeda tirakoobka waxay tilmaamaysaa in ay shaqaalaynteeda ay ku saleysan tahay mudnaan tartan dhawrkii sannadood ee la soo dhaafey. Degmada waxay leedahay waaxda hawlwadeenada taasi oo mas’uul ka ah hirgelinta xeerarka shaqaaleynta ee ka dhexjira maamulka degmada.

Ma cadda sida wanaagsan ee geeddi-socodka shaqaalaynta iyo isha ku haynta nidaamka adeegga shacabka ay u waafaqayaan heerarka sharciga adeegga shacabka. Waxay u muuqataa in geeddi-socodka heerka degmo in ay si aad ah saameyn ugu leeyihiin xiriirada qabiilka.

### 3.3.D Maamulka Adeegyada Guud ee Degaanka

Qodobka 10 ee Sharciga L. 7 ee khuseeya Gollayaasha Degaanka waxay qeexayaa waaxyada laga oggol yahay gudaha maamulada degmada. Wuxuuna qorayaa waaxyadan soo socda:

- Waaxda Hawlaha Guud
- Waaxda Arrimaha Bulshada
- Waaxda Maaliyadda
- Waaxda Dakhliga/Canshuuraha
- Waaxda Kormeeridda iyo Baaritaanka

Qodobka 10 sidoo kale wuxuu tilmaamayaa in waaxyada kale sidoo kale loogu oggolaan karo codsiga Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo fasax loogu darayo waaxyo dheeraad ah maamulka degmada. Tusaale ahaan, Degmada Garoowe waxay leedahay waaxyadan soo socda:

1. Waaxda Maaliyadda iyo Maamulka
    - Dakhliga iyo Canshuur qaadidda
    - Maaliyadda
    - Hawlwadeennada

2. Waaxda Hawlaha Guud
    - Dhulka
3. Waaxda Adeegyada Bulshada
4. Waaxda Qorshaynta
5. Waaxda Korjoogteynta

## 3.4 Baahinta Maamulka Maaliyadeed

### 3.4.A Qoondaynta Kharashka

Waxa soo socda waxay faahfaahinayaan kharashyada qaybaha kala duwan ee heerka Dowladda Dhexe.

**Jadwalka 1 Isugeynta Kharashyada Dowladda – Sannadka Gundhigga 2012**

| # | Kharakhka | Caddadka Sh. So | % |
|---|---|---|---|
| 1 | Waaxda Amniga | 41,512,871,000 | 43 |
| 2 | Waaxda Cadaaladda | 2,097,155,000 | 2 |
| 3 | Adeegyada Bulshada iyo Horumarinta Kaabayaasha | 11,371,163,000 | 12 |
| 4 | Miisaaniyadda Soo Noqnoqota/joogtada ah | 29,978,260,000 | 31 |
| 5 | Dakhli Ururinta | 8,935,314,000 | 9 |
| 6 | Kharashka Loo Qoondeeyay Waxa Dhici Kara | 2,662,237,000 | 3 |
| | Isugeynta Guud Sh. So | 96,557,000,000 | 100% |

Isha laga soo qaatay: Wasaaradda Maaliyadda

Sida lagu muujiyay jadwalka kharashka ugu badan wuxuu ku baxaa Waaxda amniga, oo ku xigta kharashaadyada miisaaniyadda soo noqnoqota, oo ugu horrayn ah mushaaraadka, oo u dhiganta ku dhowaad seddax meelood hal meel isugeynta kharashyada dowladda dhexe. Kharashyada dakhli ururinta waa gunnada hawlqabad ahaanta loo siiyo canshuur qaadeyaasha si loogu dhiirigeliyo ururta canshuuraha. Halkan waa meesha geeddi-socodyada sida aadka wax u oolka ugu ah canshuur ururinta ay ku siin karaan qayb kayd ah miisaaniyadda dowladda dhexe.

Wax xog wadar ahaan ah lama heli karin oo ku saabsan kharashyada heerka dowladda ee degmada. Dhawr miisaaniyad degmo ayaa loo eegay si qayb ka mid ah horumarinta siyaasaddan ahaan si loo hubsado waxa ay yihiin kharashyada ugu badan ee dowladaha degmada. Hoos waxaa ku qoran waxyaabaha kharashka ee Degmada Qardho ee dhawrkii sannadood ee la soo dhaafey oo bixinaya calaamadaha qaar ee ah waxa ay yihiin ujeeddooyinka iyo heerarka kharashyada ee degmada. Lama garanayo sida ay u metalayso tani kharashyada heerka degmada oo dhan.

Sida lagu muujiyay caddadka miisaaniyada, mushaaraadka iyo kharashyada la xiriira, oo raacsan kharashyada maamulka waxay ka dhigan yihiin in ka badan 50% miisaaniyadda degmada. Caddadyo yar ayaa loo bixiyaa meelaha adeegga qaar iyo deeqaha shaqooyinka degaanka.

### Jadwalka 2 Kharashyada Qardho

| Kharashka | | Sannadada | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Madaxa** | **Sharaxaadda** | **2009 Dhabta ah** | **2010 Miisaaniyad ahaanta** | **Odorosidda 2011** | **Odorosidda 2012** | **Odorosidda 2013** |
| **Kharashka Dadka Shaqaalaha ah** | | | | | | |
| 1.1.1 | Mushaaraadka | **724,105,500** | 881,280,000 | 978,220,800 | 1,095,607,296 | 1,238,036,244 |
| 1.1.2 | Gunnada Guddiga Joogtada ah | **166,030,000** | 205,200,000 | 227,772,000 | 255,104,640 | 288,268,243 |
| 1.1.3 | Gunnada Xildhibaannada degaanka | **6,050,000** | 109,200,000 | 121,212,000 | 135,757,440 | 153,405,907 |
| 1.1.4 | Isu-duwaha Gobolka LG | **12,750,000** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| 1.2.5 | Gunnada Mas'uuliyiinta | **0** | 24,000,000 | 26,640,000 | 29,836,800 | 33,715,584 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **908,935,500** | **1,237,680,000** | 1,373,824,800 | 1,538,683,776 | 1,738,712,667 |
| **Xaaladaha Degdega ah** | | | | | | |
| 1.6.0 | Kharashyada aan la filayn | **15,515,589** | 283,359,360 | 283,359,360 | 283,359,360 | 283,359,360 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **15,515,589** | **283,359,360** | **283,359,360** | **283,359,360** | **283,359,360** |
| **Kharashadyada Maamulka** | | | | | | |
| 1.2.1.B | Daabacidda Dukumeentiyada | **110,500,000** | 156,000,000 | 173,160,000 | 193,939,200 | 219,151,296 |
| 1.2.1.T | Qalabka yaryar ee xafiisyada | **9,860,000** | 30,000,000 | 33,300,000 | 37,296,000 | 42,144,480 |
| 1.2.1.J | Shidaalka iyo Ooliyada | **493,857,000** | 623,635,200 | 692,235,072 | 775,303,281 | 876,092,707 |
| 1.2.1.X | Lacagaha caddaanka ah ee la isticmaalo | **22,610,000** | 21,600,000 | 23,976,000 | 26,853,120 | 30,344,026 |
| 1.2.1Kh | Lebiska Shaqaalaha | **3,776,000** | 0 | 31,169,530 | 34,003,123 | 36,836,117 |
| 1.2.2 | Qalabyada xafiiska | **7,506,000** | 22,800,000 | 25,308,000 | 28,344,960 | 32,029,805 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **648,109,000** | **854,035,200** | **979,148,602** | **1,095,739,684** | **1,236,598,431** |
| Kharashyada Horumarinta | | | | | | |
| 1.2.3.B | Dayactirka | **0** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| 1.2.3.T | Geedaha magaalada iyo waddo nadiifinta | **0** | 21,600,000 | 23,976,000 | 26,853,120 | 30,344,026 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **0** | **39,600,000** | **43,956,000** | **49,230,720** | **55,630,714** |
| Kharashyada Isgaarsiinta | | | | | | |
| 1.2.4 | Iidhehda/ogeysiiska | **7,350,000** | 12,000,000 | 13,320,000 | 14,918,400 | 16,857,792 |
| 1.2.5.B | Kirada baabuurta | **51,717,500** | 60,000,000 | 66,600,000 | 74,592,000 | 84,288,960 |
| 1.2.5T | Kirada guriga | **8,250,000** | 9,000,000 | 9,990,000 | 11,188,800 | 12,643,344 |
| 1.2.5.J | Wasaaradda maaliyadda | **5,340,000** | 0 | 0 | 0 | 0 |
| 1.2.6 | Gunnada safarka Gudaha ah | **44,800,000** | 120,000,000 | 133,200,000 | 149,184,000 | 168,577,920 |
| 1.20.7B | Kharashyada Isgaarsiinta | **13,475,000** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| 1.2.7T | Biyaha iyo Korontada | **5,364,000** | 51,600,000 | 57,276,000 | 64,149,120 | 72,488,506 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **136,296,500** | **270,600,000** | **300,366,000** | **336,409,920** | **380,143,210** |
| Kharashyada kale | | | | | | |
| 1.2.8.B | Kharashyada martigelinta | **24,940,000** | 30,000,000 | 33,300,000 | 37,296,000 | 42,144,480 |
| 1.2.8.T | Ciyaaro | **700,000** | 12,000,000 | 13,320,000 | 14,918,400 | 16,857,792 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **25,640,000** | **42,000,000** | **46,620,000** | **52,214,400** | **59,002,272** |
| **Deeqaha** | | | | | | |
| 1.40.1B | Masaakiinta | **55,320,000** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.4.1 T | Caafimaadka | **0** | 24,000,000 | 26,640,000 | 29,836,800 | 33,715,584 |
| 1.4.1.J | Misaajidyada | **2,600,000** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| 1.4.2 | Gunnada Maamulka Degmada | **90,240,000** | 120,000,000 | 133,200,000 | 149,184,000 | 168,577,920 |
| 2.1.1.B | Amniga | **852,782,000** | 247,939,440 | 275,212,778 | 308,238,312 | 348,309,292 |
| 2.1.1T | Waxbarashada | **26,340,000** | 36,000,000 | 39,960,000 | 44,755,200 | 50,573,376 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **1,027,282,000** | **463,939,440** | **514,972,778** | **576,769,512** | **651,749,548** |
| **Mashruucyada** | | | | | | |
| 2.2.1.B | Fayodhawrka | **94,288,500** | 108,000,000 | 119,880,000 | 134,265,600 | 151,720,128 |
| 2.2.1.T | Mashaariicda LG | **33,630,000** | 342,378,000 | 380,039,580 | 425,644,330 | 480,978,092 |
| 2.1.1.J | Gunnada ilaalada isbaarooyinka | **380,070,000** | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **507,988,500** | **450,378,000** | **499,919,580** | **559,909,930** | **632,698,220** |
| Deymaha | | | | | | |
| 3.2.1.B | Dib-u bixinta Deyn | **192,872,992** | 180,000,000 | 199,800,000 | 223,776,000 | 252,866,880 |
| 3.2.1.T | Deyn laga soo qaatay bangi | **135,000,000** | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Isugeyn Hoosaadka | | **327,787,992** | **180,000,000** | **199,800,000** | **223,776,000** | **252,866,880** |
| | | | | | | |
| Isugeynta guud | | **3,597,555,081** | **3,821,592,000** | **4,241,967,120** | **4,716,093,301** | **5,290,761,301** |

Dowladaha hoose waxay bixinayaan adeegyada lagu sharxay Sharciga L. 7 (Qaybta 2, Qodobka 9). Kuwan waxaa ka mid ah, balse aan ku xadidnayn:

- Daryeelka caafimaad ee guud iyo gaar ahaan fayodhawrka ee magaalooyinka iyo ka hortaga cudurada faafa.
- Dhisidda suuqyada labaduba xoolaha iyo badeecooyinka.
- Hindisidda iyo hirgelinta mashaariicda iyo barnaamijyada loogu talogalay horumarinta bulshada tusaale, daryeel caafimaad, iyo waxbarashada iwm.
- Dhisidda Dugisyada Hoose, Dugsiyada Quraanka, dugsiyada barbaarinta carruurta, dugsiyada horumarinta qoyska iyo maamulkooda.
- Dhisidda Xarumaha Caafimaadka Dhallaanka iyo Hooyada (xarumaha MCH).
- Dhiirrigelinta iyo horumarinta suugaanta iyo ciyaaraha.
- Dib-u cusboonaysiinta shabakadaha waddooyinka magaalooyinka degmada.

Gollaha Degaanka wuxuu sidoo kale mas’uul ka yahay taageeridda maamulka xoolaha, beerashada, amniga, biyaha, korontada, isgaarsiinta iyo ilaalinta degaanka.

Dabciga hawlgalada iyo adeegyada la filayao in la bixiyo waxaa si ballaaran loogu sharxay sharciyada jira.

Kharashyada laga helo deeqbixiyeyaasha iyo tabbarucaadda bulshada degaanka waa in lagu bixiyo mudnaanada degmada ee lagu muujiyay miisaaniyadda.

Marka la eego Dastuurka Puntland waxaa lagu cadeeyay in dowladda dhexe ee Puntland ay mas'uul ka tahay:

-Waxbarashada: dhammaan waxbarashada Puntland

-Caafimaadka: (isbitaalada iyo xarumaha Caafimaadka Dhallaanka iyo Hooyada)

- Dhismaha: (wixii ka baxdan labada isbaaro ee yaala magaalooyinka)

Hase-yeeshee, dowladda hoose waxay sidoo kale mas'uul ka tahay waxbarashada (dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe,) Baraha Caafimaadka iyo takhaatiirta daawo dhaqameedka. Waxaa jira jawahareer xagga doorarka iyo mas'uulyadaha adeegga bulshada ah oo u dhaxeeya Dowladda dhexe iyo Dowladda Hoose.

Sharciga L. 7 wuxuu u siiyaa degmooyinka in ay bixiyaan waajibaadyadooda iyo mas'uuliyadahooga sharciga ah ee maamulka degmada sida soo socota:

- adeegyada bulshada (rugta caafimad, dugsiga hoose iyo biyaha iyo fayodhawrka)
- dayactirida iyo dhisidda waddooyinka ku yaala xuduudaha degmooyinka
- dhisidda biyo-xireennada u dhaxeeya degmooyinka iyo magaalooyinka

### 3.4.B Qoondaynta Dakhliga iyo Maamulka Dakhliga Degaanka

Kuwan soo socda waxay bixinayaa tilmaamaha ilaha ugu waaweyn ee dakhliga ee heerka dowladda dhexe. Faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan ilaha dakhliga iyo hababka ururinka lama heli karin.

**Jadwalka 3 Isugeynta Dakhliga Dowladda – Sannadka Gundhiiga 2012**

| # | Dakhliga | Caddadka Sh. So | % |
|---|---|---|---|
| **1** | Canshuuraha Alaabta Dibadda Ka Timaada | 60,529,490,000 | 63 |
| **2** | Dakhliga Gudaha | 14,419,320,000 | 15 |
| **3** | Canshuurta Wax Soosaarka | 45,000,000 | 0.1 |
| **4** | Canshuurta Dakhliga | 3,764,790,000 | 4 |
| **5** | Canshuuraha Hantida | 11,206,900,000 | 11 |
| **6** | Dulsaarka Adeegga | 5,551,850,000 | 6 |
| **7** | Haraadiga iyo Tabbarucaadyada | 1,039,650,000 | 1 |
| | Isugeynta Guud Sh. So | 96,557,000,000 | 100% |

Isha laga soo qaatay: Wasaaradda Maaliyadda

Sida kharashyada oo kale, ma jirin xog laga heli karao caddadka wadarka dakhliyada dowladaha ee degmooyinka ee isugeynta dakhliyada dowladda. Si aan u helno xoogaa fikaro ah oo ku saabsan ilaha dakhliga dowladda degmooyinka, dakhliyada degmada Qardho ayaa hoos lagugu siiyay.

Waxaa jiro labo ilood oo dakhliga laga ururiyo labaduna waxaa lagu ururiyaa baraha isbaarooyinka ee badeecooyinka maraya degmada. Canshuurta lagu qaado isbaarada taala tuulada Elay waxay u dhigantaa ku dhowaad 25% ee dakhliga canshuurta laga qaado isbaarada magaaladana waxay u dhigantaa 15% dheeraadka ah ee isugeynta dakhliga. Ilaha kale ee dakhliga waa canshuuro saami ahaan yaryar oo laga qaado suuqa iyo canshuuraha badeecada ee la ururiyo ayadoo loo marayo canshuur ururiyaasha degaanka. Sidoo kale waxaa jira caddad dakhli badan oo ka imaanaya tabbarucaad iyo deynta dowladda dhexe. Caddadyada waxay ku dhow yihiin 15% kale ee isugeynta dakhliga. Sidaas-darteed, ko dhowaad in ka badan 50% ee dakhliga degaanka wuxuu ka imaanayaa seddaxdan ilood, labo ka mid ahna lagu qaado isbaarooyinka degmada dhexdooda ah.

### Jadwalka 4 Ilaha Dakhliga Qardho

| **Dakhliga** | **Sannadada** | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **Sharaxaadda** | **2009 Dhabta ah** | **2010 Miisaaniyad ahaan** | **Odorosidda 2011** | **Odorosidda 2012** | **Odorosidda 2013** |
| **Kabka degaanka** | | | | | |
| Canshuurta xoolaha | **147,180,000** | 210,000,000 | 233,100,000 | 261,072,000 | 295,011,360 |
| Cashuurta shatiga ganacsiga | **108,878,000** | 192,000,000 | 213,120,000 | 238,694,400 | 269,724,672 |
| Canshuurta aan tooska ahayn | **4,106,788** | 4,800,000 | 5,328,000 | 5,967,360 | 6,743,117 |
| Tabbarucaadda iyo deynta Dowladda dhexe | **300,000,000** | 507,192,000 | 562,983,120 | 630,541,094 | 712,511,437 |
| Isugeyn Hoosaadka | **560,164,788** | **913,992,000** | **1,014,531,120** | **1,136,274,854** | **1,283,990,585** |
| Canshuuraha hantida | | | | | |
| Canshuurta guryaha | **145,731,500** | 132,000,000 | 146,520,000 | 164,102,400 | 185,435,712 |
| Canshuurta qiimaha dhulka | **132,580,000** | 168,000,000 | 186,480,000 | 208,857,600 | 236,009,088 |
| Wareejinta dhulka | **36,804,000** | 144,000,000 | 159,840,000 | 179,020,800 | 202,293,504 |
| Isugeyn Hoosaadka | **315,115,500** | **444,000,000** | **492,840,000** | **551,980,800** | **623,738,304** |
| Ciqaabaha | | | | | |
| Qanaaxa | 64,800,000 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Isugeyn Hoosaadka | 64,800,000 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Canshuurta suuqa | | | | | |
| Canshuurta jaadka | **259,600,000** | 312,000,000 | 346,320,000 | 387,878,400 | 438,302,592 |
| Canshuurta caanaha | **0** | 30,000,000 | 33,300,000 | 37,296,000 | 42,144,480 |
| Canshuurta maqaarka | **0** | 12,000,000 | 13,320,000 | 14,918,400 | 16,857,792 |
| Canshuurta xamaaliga | **0** | 15,600,000 | 17,316,000 | 19,393,920 | 21,915,130 |
| Canshuurta xamaaliga rootiga | **0** | 6,000,000 | 6,660,000 | 7,459,200 | 8,428,896 |
| Canshuurka huudhayda | **0** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| Canshuurta Bagaashka | **0** | 24,000,000 | 26,640,000 | 29,836,800 | 33,715,584 |
| Canshuurta kabo tolada | **0** | 9,600,000 | 10,656,000 | 11,934,720 | 13,486,234 |
| Canshuurta harqaanleyaasha | **0** | 8,400,000 | 9,324,000 | 10,442,880 | 11,800,454 |
| Kiraynta hoolalka lagu kulmo | **0** | 54,000,000 | 59,940,000 | 67,132,800 | 75,860,064 |
| Canshuurta khudaarta | **0** | 19,200,000 | 21,312,000 | 23,869,440 | 26,972,467 |
| Canshuurta dhuxusha | **0** | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Canshuurta qoryaha dabka | **0** | 18,000,000 | 19,980,000 | 22,377,600 | 25,286,688 |
| Canshuurta ciidda iyo dhaqxaanta | **0** | 36,000,000 | 39,960,000 | 44,755,200 | 50,573,376 |
| Canshuurta kawaanka | **26,480,000** | 210,000,000 | 233,100,000 | 261,072,000 | 295,011,360 |
| Canshuurta biyooleyaasha | **0** | 7,200,000 | 7,992,000 | 8,951,040 | 10,114,675 |
| Canshuurta booyadaha biyaha | **486,458,000** | 24,000,000 | 26,640,000 | 29,836,800 | 33,715,584 |
| Diiwaangelinta dadweynaha | **5,034,000** | 24,000,000 | 26,640,000 | 29,836,800 | 33,715,584 |
| Warshada Caanaha | **0** | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Warshada Korontada | | 48,000,000 | 53,280,000 | 59,673,600 | 67,431,168 |
| Canshuurta shirkadaha | **244,348,000** | **75,600,000** | 83,916,000 | 93,985,920 | 106,204,090 |
| Canshuurta isbaarada tuulada Elay | **417,740,000** | 948,000,000 | 1,052,280,000 | 1,178,553,600 | 1,331,765,568 |
| Canshuurta isbaarada magaalada | **1,203,358,000** | 564,000,000 | 626,040,000 | 701,164,800 | 792,316,224 |
| Isugeyn Hoosaadka | **2,643,018,000** | **2,463,600,000** | **2,734,596,000** | **3,062,747,520** | **3,460,904,698** |
| | | | | | |
| Isugeynta guud | **3,583,098,288** | **3,821,592,000** | **4,241,967,120** | **4,751,003,174** | **5,368,633,587** |

Sharciga wuxuu siiyaa amar guud dowladaha maamulkooda baahsan si loo xaqiijiyo ururinta canshuurada iyo dakhliyada iyo waajibaad kastoo kale ee sharciga ama sharci kastoo kale ee siinaya dowladda hoose ama dakhli kastoo kale ee ka imaanaya waxqabadyada dowladaha hoose.

Marka la eego maaliyadaha, sharciga wuxuu bixiyaa xukun-wadaajin tixgelin leh wuxuuna si aad u gaar ah u quseeyaa sharciyada ay tahay in gollaha ay qaadi jireen (Qaybta 7, Qodobka 48a) ee laga soo bilaabo canshuurta hantidaa ilaa shatiyada ganacsiga. Wuxuu sidoo kale sharxayaa miisaaniyad dejinta iyo habraacyada xisaabaadka sidoo kale habraacyada wax soo-iibsiga iyo qandaraasyada.

Sharciga L. 7 wuxuu bixiyaa qorshaha qoondaynta dakhliga ee u dhaxeeya dowadda hoose iyo dowladda dhexe, balse hadda la joogo dakhliga dowladda hoose ee Puntland wuxuu aad ugu xaddaysan yahay ilo gaar ah, kaasi oo aan ku filnayn in uu daboolo baahiyada kharashyada.

Sharciga L. 7 ma sameynayo kala soocid cad oo u dhaxeeya ujrada lagu bixinayo adeegyada bulshada iyo kuwa dhaqaale iyo qaababka canshuurta ee loogu talogalay dejinta iyo shuruucda sicirada iyo kontoroolidda kuwani.
Maamulada dakhli ururinta sida suurtagalka ah laguma qeexin sharciga.

Dowladda hoose waxay leedahay awood ay ku ururinayso canshuur ayada u gaar ah iyo in ay maareyso ayna u maamusho si madaxbannaan waxqabadyada dakhli uruurinta.

Marka la eego Qodobka 35 ee Sharciga L. 7 gollayaasha degaanka waxay leeyihiin ilahan dakhli ee soo socda:

- Canshuurada iyo dulsaarka ganacsiyada ee Lifaaqa (A), ee sharcigan iyo wax kasto kale ee u oggolaaday sharciyada kale iyo xeerarka dowladda.
- Faa’iidooyinka laga helo raasumaalka ganacsi
- Dakhliyada kale ee laga helo ilaha dhaqaale ee ay abuureen ama adeegyada qandaraaska lagu siiyay dadweynaha.
- Deymaha Caalamiga iyo kuwa Degaanka, haddii loo oggolaado.
- Tabbarucaadka/deeqaha ugu yimaada Dowladda Dhexe, dibadaha iyo dadweynaha.

Lifaaqa A wuxuu faahfaahinayaa ilaha dakhliga ee gaarka ah ee ay u heli karaan gollayaasha degaanka sida soo socta:
a) Canshuuraha loo oggolaadahay Gollayaasha Degaanka

- Canshuuraha laga qaaro guryaha, guryaha alwaaxa ah iyo dhismooyinka kale
- Canshuuraha laga qaado biyo gelinta lagu naafiyo xoolaha, tallaalada iyo shahaadooyinka caafimaadka
- Canshuuraha ganacsiga xoolaha
- Canshuuraha shatiyaasha ganacsiga iyo calaamadaha ganacsi
- Canshuuraha dhul qoondeynta, dhismaha iyo ruqsadaha dayactirka
- Canshuuraha qiimaha dhulka

- Canshuuraha suuqyada badeecooyinka
- Canshuuraha kawaanka
- Canshuuraha xoolaha la dhoofiyo, uduga, xabagta, kalluunka,caleenta-cawbaarka, qoryaha xaabada ah iyo milixda.
- Canshuuraha cabbitaanada iyo jaadka
- Canshuuraha maqaarka xoolaha iyo badarka
- Ujrada (canshuuraha) gaari meel dhigashada
- Canshuuraha diiwaangelinta qofka, diiwaangelinta dhalashada, aqoonsiga, iyo warqadaha xaqiijinta asalnimada waxyaabaha.
- Canshuuraha makiinada bunka, miisaamidda iyo madadaalada
- Canshuuraha baalleyaasha korontada iyo taleefoonka
- Canshuuraha xargaha korontada, xargaha taleefoonka (labaduba xargaha dhulka hoostiisa mara iyo kuwa suranba)
- Canshuuraha biyaha magaalada
- Canshuuraha waxyaabaha laha dhoofiyo ama laga soo dejiyo Dowladda Puntland ee Soomaaliya.

Degmada Garoowe kuwan ayaa la muujiyay in ay yihiin ilaha ugu muhiimsan ee dakhliyada degaanka:
1. Canshuuridda Xoolaha
2. Shatiyada
3. Canshuurta Xarunta Madadaalada
4. Adeegyada (Korontada)
5. Canshuurta Aan Tooska Ahayn
6. Canshuuridda Guryaynta
7. Canshuuridda Dhulka
8. Wareejinta Hantiada Xaddidan
9. Canshuuraha Ciqaabaha
10. Canshuuraha Faagidda
11. Canshuurta suuqa
12. Canshuurta Qalidda
13. Diiwaangelinta Qoysaska

Degmada waxay shaqaalaysiisaa miniishiibiyo u xilsaaran canshuur ururinta. Waxaa jira 23 canshuur ururiye aan joogto ahayn.

### 3.4.C Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha ka Dhaxeeya

Hadda la joogo ma jiro hab kab dhaqaale oo nidaamsan oo dowladda hoose ugu imaanay dowladda dhexe. Kababka maaliyadeed ee dhaca waa gudaha qorshaha mashruucyada JPLG ee ka jira 3 degmo sidoo kale

kabka Garoowe ugu yimaada dowladda dhexe ee loogu talogalay kharashayada amniga ee ay bixiso dowladda degmada.

Waxaa jira qaar ka mid ah heer canshuur la wadaago ee canshuuraha dowladda saarto alaabaha dibadda laga keeno ee lagu ururiyo dekadaha iyo isbaarooyinka degmada. Dowladda degmada ama degmada waxay la haraysaa 5% ee canshuuraha la saaro alaabada dibadaha laga keeno ee lagu qaado barahaasi iyo wixii harana waxaa lagu wareejiyaa dowladda dhexe.

Canshuuraha alaabada dibadda laga qaado waxay ka dhigan yihiin 63% isugeynta dakhliyada dowladda. Hase-yeeshee, kharashyada dakhli ururinta ilaa xad waa qaali haddii laga soo qaado habka ururinta ee la adeegsanayo minishiibiyada. Ayadoo la raacayo xogta ku qoran isugeynta kharashyada dowladda ee 2012, kharashyada dakhli ururinta waxay isku noqdeen 9% ee isugeynta kharashyada. Tani waxaa sabab u ah xaqiiqda ah in dakhli ururiyaasha ay la haraan 10% dakhliga la ururiyay, oo u sii dheer mushaaraadkooda. Waxay sidoo kale ku qaataan 2% dheeraad ah shaqada wakhtiga dheeraadka ah ee isbaarooyinka.

#### 3.4.D Deynta iyo Deynsashada Dowladda

Qodobka 35 ee Sharciga L. 7 wuxuu qoraa in gollayaasha degaanka ay qaadan karaan deymo degaanka ah ama kuwo caalami ah, haddii ay u oggolaato Wasaaradda Maaliyadda. Ma jiro sharci ah xeer kale oo xaddidaya deynsashadan. Hase-yeeshee, dowladda hoose ee Garoowe waxay ka soo deynsatay Bangiga Dhexe lacago loogu talogalay mashaariic dhismo oo ku saleysnaa heshiis ay la gashay Wasaaradda Maaliyadda. Halkaasi waxaa ka muuqda in uu yahay nidaam aan rasmi ahayn ee dowladaha ay lacago ku deynsan karaan, balse uu u baahan yahay heshiiska lala galo Wasaaradda Maaliyadda.

### 3.5 Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Halisaha (SWOT) ee Loogu Talogalay Hirgelinta Baahinta Maamulka

Mawduuca sare wuxuu ka hadlay sifooyinka ugu muhiimsan qaarkood ee xaaladda hadda ee lagu horumarsiin kara baahinta maamulka ee Puntland. Falanqeyntan SWOT ee soo socota waxay bixinaysaa qoraalka kooban ee sifooyinka ugu muhiimsan ee qiimeyntan ee loogu talogalay horumarinta dheeraadka ah ee siyaasadda baahinta maamulka iyo qorshe hawleedka baahinta maamulka.

| **Awoodaha** | **Daciifnimada** |
|---|---|
| **- Dastuurka iyo Qorshaha Sharci ee Sharciga 7 ee loogu talogalay nidaamka maamul baahinta**<br>**-Ka jiritaanka bixinta adeegyada degmooyinka gudahooda**<br>**- shaqada gollayaasha degaanka oo lagu qeexay sharciga 7**<br>**- Mudnaanta sare iyo taageerada loo marayo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose (IMC)**<br>**- Ku jitaabinta Baahinta Maamulka 3 Degmo ayadoo JPLG bixinayso aasaaska baahinta maamulka maaliyadeed**<br>**- Ka shaqaynta qoondeynta shaqo ee degmada oo ku saleysan qiimeynta awoodda** | **-Ma jirto siyaasad guud oo ah baahinta maamulka**<br>**-Ilo dhaqaale xaddidan ee heerka dhexe ayadoo isha ugu muhiimsan dakhliga ay tahay cashuurta alaabaha dibadda laga keeno**<br>**-Kama jiro hab kab maaliyadeed nidaaamsan dhammaan degmooyinka**<br>**-Degmooyinka oo ka jirta shaqaale aqoon leh la'aan**<br>**-Ilo maaliyadeed iyo dakhli ururin xaddidan oo ka jirta degmooyinka**<br>**-sharciyada dowladda hoose ee khuseeya shaqada iyo awoodaha ee aan israacsanayn**<br>**- jahwareer ka jira shaqooyinka bixinta adeegyada ee u dhaxeeya wasaaradaha dowladda dhexe iyo degmooyinka hoose.** |

| | |
|---|---|
| **-Daraasado qiimeyn waaxaha ah oo si fiican loo sameeyay ee loogu talogalay baahinta maaulka**<br>**- Kala saarista degmooyinka oo ku saleysan dadweynaha iyo shuruudo kale**<br>**-Qorsheyaal lagu qeexayo xuduudaha degmada sannadka xigga**<br>**-Horumarinta ururka dowladda hoose ee ku metalaya danta dowladaha hoose geeddi-socodka baahinta maamulka**<br>**-Isticmaalka xaddidan ee deynta Bangiga Dhexe ee dowladaha hoose ayadoo oggolaansho laga helayo Wasaaradda Maaliyadda** | **-Doorashooyinka dowladda hoose oo aanan la fulinin**<br>**-Xuduudaha degmada lama qeexin waxaysana ka maarnayn farogelin siyaasadeed**<br>**-Tirakoobka lama dhammeystirin mana jirto diiwaan shacab oo ay heleen dadweynaha badankooda**<br>**-Adeeg gaarsiinta dadweynaha reer guuraaga ah aad ayay u adag tahay**<br>**-Ma jirto qeexitaan cad oo ah qoondaynta shaqo**<br>**- Waxaa loo baahan yahay dhexgelin badan ee degmooyinka degaanka iyo muwaadiniinta qeexitaanka yoolalka iyo ujeeddooyinka baahinta maamulka**<br>**- Shaqaalaha laga soo wareejinaya wasaaradaha dhexe ee loo soo wareejinayo degmooyinka lama qeexin**<br>**-Ma jirto istiraatiijiyad lagu gaarsiinayo baahinta maamulka dhammaad degmooyinka** |
| **Fursadaha** | **Halisaha** |
| **Meelaha ugu fursada badan waxaa ka mid ah:**<br>**- Qeexidda Xuduudaha Degmooyinka**<br>**- Qabashadan Doorashooyinka Gollaha Degaanka**<br>**- Caddeynta qoondaynta shaqo ee degmada iyo kuwa dowladda dhexe**<br>**- Baahida lagu qeexayo shaqooyinka iyo mas'uuliyadaha heerka gobol**<br>**- Tirakoobka dhammeystiran ee dadweynaha**<br>**- Suurtagalnimada dakhli wadaagidda dowaladda dhexe iyo degmooyinka**<br>**- Baahida qorshaha sharci dheeraadka ah ee nidaamka baahinta maamulka ee meelaha qoondaynta dakhliga iyo kharashaadka, iyo kabyada oo ku saleysan shuruud**<br>**-Suurtagalniamda in sare loo qaado ilaha dakhliga iyo awoodda ururinta ee heerarka Degmada a, awoodda xaddidan ee heerarka B iyo C.** | **- Wasaaradaha dhexe iyo hay'adaha kale ee dowladda oo aan doonaynin in ay baahiyaan shaqooyinka ayna wareejiyaan lacagaha.**<br>**-ma jiraan doorar iyo mas'uuliyado si cad u qeexan ee ah canshuuraha labaduba dowladda dhexe iyo dowladda hoose**<br>**-Suurtagalnimada xasilooni la'aan siyaasadeed iyo colaado**<br>**-Diidmada hawlwadeennada in loo wareejiyo maamulada degmada**<br>**-Farqi ballaaran oo u dhaxeeya mushaarka iyo dheefaha ee degmooyinka oo dhan ee aanana la simi karin** |

### 3.5.A Awoodaha

Waxaa ka jira tiro awoodo xaaladda hadda oo bixinaya aasaaska dhanka wanaagsan waxa ka eegga ee loogu talogalay taageeridda baahinta maamulka ee bixinta adeegyada ee dowladaha degmooyinka. Waxa ugu muhiimsan kuwani waa in ay ka go'an tahay dowladda hadda baahinta maamulka iyo ka qaygalka tooska ah

ee Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee qaabilsan Maamul Hoosaadka si ay u sii wadaan horumarinta iyo hirgelinta siyaassada baahinta maamulka ee firfircoon.

Waxaa sidoo kale jira aasaas taageero xoogan oo ka jira qorshaha sharci ee Dastuurka iyo sharciga L. 7 oo lagu sii wadayo baahinta maamulka. Qorshaha sharci, gaar ahaan Sharciga L. 7, wuxuu u baahanayaa xoogaa isku hagaajin iyo wax ka bedelid ah inta geeddi-socodka uu hore u sii-socdo si uu u cadeeyo qoondayta shaqooyinka ee qaybaha kala duwan ee degmada.

### 3.5.B Daciifnimada

Ayadoo ay ka jiraan awoodo xaaladda hadda la joogo ee muujinaya suurtagalnimada lagu sii-wadayo baahinta maamulka waxaa jira tiro daciifnimo ah oo la taaban kara oo u baahan in laga gudbo si ay baahinta maamulka ugu sii socoto si guul ah.

La'aanta siyaasadda guud ee baahinta maamulka, taasi oo uu dukumeentigan gacan ka geysanayo xalinteeda, ee ay qaateen Dowladda iyo dhammaan daneeyeyaasha waxayna u baahan tahay feejignaan dhab ah bilaha soo socda. Waxaa jira heshiis guud oo ku saabsan fikradda guud ee baahinta maamulka, balse waxyaabaha gaarka ah ee siyaasadda baahinta maamulka iyo qorshe hawleedka waaqaca ah ee loogu talogalay hirgelinta geeddi-socodka baahinta maamulka waxay u baahanayaan horumarin dheeraad ah bilaha soo socda.

Daciifnimo dheeraad ah waa ilaha dhaqaale ee Dowladda Dhexe xaddidan ee sare loogu qaadi lahaa labaduba baahinta maamulka iyo maaliyadda. Hadda la joogo, beesha caalamka ee deeqda bixisa aayaa siisa lacago badan oo loogu talogalay adeegyada, gaar ahaan caafimaadka iyo waxbarashada, oo aanan la soo marsiinin Dowladda Dhexe. Waxaa jiri kara baahi loo qabo hab Taageero Miisaaniyad Toos ah oo la siin karo Dowladda Dhexe si ay u bixiso dhaqaalaha loogu talogalay lacagaha sida tooska ugaga yimaada Degmooyinka Dowladda Dhexe ee loogu talogalay deeqaha shuruudda ku xiran ama kabka ah ee loogu talogalay waaxyada qaar, sida waxbarashada haddii ay jiraan kab lacag caddaan ah ee loogu talogalay in carruurta ay dhigtaan dugsiga.

Baahida loo qabo qeexitaanka xuquudaha degmada sidoo kale waa u muhiim go'aaminta aasaaska baahinta maaliyadda iyo bixinta adeegyada. Guddiga xuduudaha ayaa la soo jeediyay in uu shaqo bilaabo 2014 oo dhammeystiraya shaqadiisa sannadka barkiisa xuduudaha cusubna waxaa la qeexi karaa dhammaadka 2014 si tijaabinta baahinta adeegyada la soo xushay loo bilaabo 2015.

Isu-duwidda adeegyada u dhaxeeya wasaaradaha dhexe iyo degmooyinka waxay u baahan yihiin sidoo kale in si aad ah loo horumariyo, siiba marka la eego waxbarashada, caafimaadka, waddooyinka, iyo waaxaha khayraadka dabiiciga ah. Tani waxaa si dheeraad ah loogu caddeyn karaa dib u habaynta Sharciga L. 7, oo la dhammeystirayo dhammaadka 2015.

Ugu dambeyntii, baahida loo qabo hirgelinta doorashooyinka guddiga degaanka waa u muhiim in laga guul gaaro istiraatiijiyadda baahinta maamulka. Tani oo lagu daray qeexitaanka xuduudaha degmada waa labada meelood ee ugu muhiimsan in ay wax ka qabato Dowladda iyo Baarlamaanka labada sannadood ee soo socda. Muddo wakhti ee lagu horumarinayo nidaamka iyo diyaarinta doorashooyinka dowladda hoose waxaa loo baahan yahay in uu bilowdo bartamaha-2014 si shaqada Guddiga Xuduuda iyo nidaamka doorashada la isu-duwan wakhtiga diiwaangelinta codbixiyaha, magacaabista musharaxiinta, in la sameeyo olole siyaasadeed, iyo doorashadana waxay socon kartaa si aan dhib lahayn ilaa 2016.

### 3.5.C Fursadaha

Xaaladda baahinta maamulka ee Puntland waxay soo bandhigaysaa tiro caqabado u gaar ah xaaladda iyo fursadaha ay siyaasadda ka shaqeynayso in ay wax ka qabato.

Sida kor loogu sharxay, Sharciga L. 7 ayaa jira dastuurkana wuxuu bixiyaa boos ku filan in adeegyada la baahiyay la bixiyo. Waxaa siidheer, Puntland in uu ka jiro heshiis gudaha ah ee loogu baahan yahay xoojinta baahinta maamulka, iyo in laga qaybgeliyo dabiiciga taageero ee wasaaradaha waaxaha ee Puntland geeddi-socodkan. Intaa waxaa siidheer, ku tijaabinta bixinta adeegyada degmooyinka Puntland ugu waaweyn qaarkood – oo taageerta Qaramada Midoowe – waxay muujinaysaa in xukun-wadaajinta shaqooyinka qaar ay suurtagal tahay ayna bixinayso fursado loogu sii dhisayo casharadii laga bartay.

Fursadda lagu sameynayo xuduudaha degmada oo lala xiriirinayo qorsheyaasha lagu qabanayo doorashooyinka gollaha degaanka si loo bixiyo marxaladda kala guurka ee aan hakad ku jirin ee baahinta maamulka siyaasadeed waa fursad weyn oo lagu muujinayo rabitaanka siyaasadeed iyo awoodda hay'adeed ee lagu qabanayo geeddi-socodka baahinta maamulka ee Puntland.

Sidoo kale waxaa jira fursad ku filan in lagu horumariyo aasaaska dakhli ururinta degmooyinka iyo in la sameeyo nidaamka kabka oo ku saleysan qaacidooyin ujeeddo iyo shuruudda keenaysa qaybin aad u siman ee khayraadyada maaliyadeed ee xaddidan. Shaqo dheeraad ah ayaa looga baahan yahay wasaaradaha dowladda dhexe iyo degmooyinka si sare loogu qaado hababka dakhli ururinta iyo in laga dhigo ururintooda kuwa kharash yar.

### 3.5.D Halisaha

Xataa ayadoo ay jiraan awoodaha iyo fursadaha badan ee xagga sare lagu soo xusay waxaa jira haliso tixgelin leh gaaritaanka aragtida iyo hirgelinta nidaamka maamulka baahsan ee Puntland. Kuwani waxaa hoosta loogu qeexay si kooban.

Xasilooni diro Siyaasadeed iyo Xaalad Colaadeed

Ayadoo Puntland ay si fiican ugu horumartay marka la eego xasiloonida siyaasadeed iyo yareynta colaado, waxaa wali jira suurtagalnimada in xaaladaha qaar ay dhashaan oo dib-u kicinaya halisahan. Tani waxay ku yeelanaysaa saameyn aad u daran sii-socoshada geeddi-socodka baahinta maamulka waxayna xaddidaysaa suurtagalnimada lagu hirgelinayo bixinta adeegyada ee baahsan ee degmooyinka iyo waaxyada muhiimka ah. Suurtagalnimada colaadda waa in si joogto ah loola socdaa dhawrka sannadood ee soo socda inta tijaabinta baahinta maamulka ay socoto.

Labo u Qaybsanaanta Bixinta Adeegyada

Baahinta maamulka si kastaba waxaa caqabad ku ah labo u qaybsanaanta bixinta adeegyada ee aan sharciga ku dhisnayn ee Puntland, ayadoo shaqooyin isku mid ah ay qorsheeyaan ayna hirgeliyaan degmooyinka iyo sidoo kae waaxyada wasaaradaha.[7] Tusaale ahaan waxaa ka mid ah dhisidda iyo hawgelinta dugsiga iyo bukaan-eegtooyin caafimaad iyo ka hirgelinta baro-biyood degmooyinka.

Si dheeraad ah haddii looga hadlo labo u qaybsanaantan ka-warbixinta iyo la-xisaabtanka isku xiraya degmooyinka iyo heerka dhexe waa kuwo daciif ah, oo keenaysa dib ugu soo warbixinta xaddididan ee wasaaradaha dhexe ee qorsheynta iyo dhismaha shaqooyinka waaxyada. Sidoo kale geeddi-socodka qorshaynta waa dafiic ayadoo jirta isu-xir xaddidan oo u dhaxeeya waaxyada wasaaradaha iyo degmooyinka. Natiijada ka dhalanaysa waa in wasaaradaha aysan mar kasta ka warqabin baahiyada mana awoodaan in ay keenaan kuwani degmooyinka.

[7] Eeg sidoo kale daraasada ku saabsan Qiimeynta Shaqooyinka gudaha waaxda ee Waxbarashada, Caafimaadka iyo Fayadhowrka iyo Nadaafadda Biyaha (WASH) ee ka jira Puntland, oo wehliya gobol kale ( p xi) ee 'Ku xoojinta baahinta maamulka go'aan-gaaridda dowlada hoose ee is-maamusha waxay u baahan tahay in si cad loo caddeeyo qoondaynta la xiriirta shaqooyinka kala duwan ee dowladda hoose.'

Degmooyinka mar kasta lama tashtaan wasaaradaha waaxaha si ay u hubiyaan shaqooyinka ay qabtaan in ay bogaadinayaan siyaasadaha waaxda ama ay isku dubbaridayaan sidaas awgeed wasaaradaha waaxaha waxay bixinayaan kharashyada shaqada (tusaale ahaan, mushaaraadka macalimiinta dugsiyada hoose ama saadka caafimaadka Xarumaha Daryeelka Dhallaanka iyo Hooyada). Xaaladdan waxay mararka qaarkood keeni kartaa sii socosho yar iyo bixinta adeegyada oo qaali ah, oo aan khasab ahayn in ay ku saleysnaadaan geeddi-socodka qorsheynta hoos-kor sidaas darteedna waa loo dhan yahay.[8]

Sababaha labo u qaybsanaantan bixinta adeegyada waa isku jirka sharciyada, siyaasadaha iyo xeerka iska hor imaanaya ee ka jira heerka waaxa ee la xiriira L. sharciga 7; la'aan habraacyo qorsheyn iyo ka-warbixin oo u dhaxeeya degmada iyo heerka dowladda dhexe; sidoo kale la'aanta caddeyn u dhaxeysa hirgelinta hay'adaha dowladda ee ku saabsan xeerarka iyo habdhaqanada; sidoo kale baahiyada lagula wareegayo bixinta adeegyada ee ku saleysan geeddi-socodka qorsheyn oo loo dhan yahay .[9]

Si wax looga qabto labo u qaybsanaantan aan la jeclaysan waxaa laga sameeyay tiro daraasado ah waaxaha waxbarashada, caafimaadka, waddooyinka biyaha iyo maareynta khayraadka dabiiciga ah. Kuwani waxay wax ku daraysaa siyaasadda waxayna bixinaysaa aasaaska qorsheyaasha qaarkood ee lagu qoray siyaasadda. Talooyinka ugu waaweyn ee ka imaanaya daraasada waxaa ka mid ah:

- In la dhiso qaabdhismeed baahin siyaasadeed oo heer dowladeed ah.
- Baahida loo qabo in la hagaajiyo abaabulka dakhliga sidoo kale kababka dhaqaale si ay awood ugu yeeshaan dowladaha hoose bixinta adeegyada loo baahan yahay. Qayb ka mid ah tani waxay u baahan tahay hagaajinta qaacidada deeqda dowladda hoose ee hadda iyo adeegsiga suurtagalka ah ee deeqaha qaybaha oo ku saleysan xajmiga dadweynaha, tilmaameyaasha bulshada, horumarinta aadanaha iyo tusmaynta saboolnimada.
- Aqoonsiga qabanqaabada maamulka baahinta waaxda la doorbidayo ee loogu talogalay waax kasta, taasi oo ka mid noqon doonta fikradaha ku saabsan isku duwidda maaliyadaha iyo ka warbixinta.
- **Bixinta adeegyada waxay u baahan doontaa muujinta awoodaha degmooyinka ku darajaysan A, B iyo C**.

Daraasada shaqada sidoo kale waxaa lagu oggaaday in 'qulqulka bulshada iyo dadka gaarka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay, ururada aan dowliga aheyn, Qurba-joogta iyo deeqbixiyeyaasha in ay yihiin kuwa ugu muhiimsan ee dhaqaajiya bixinta adeegyada ee dhammaan waaxaha (caafimaadka, fayadhowrka, biyaha iyo nadaafadda iyo waxbarashada) sidaas awgeed, adeegyada waxay si aad ah ugu baahan caadi ahaan. Tani waxay muujinaysaa caqabad kaloo weyn ee loogu talogalay bixinta adeegyada la isku dubbaridada, halkaasoo oo ay ururada aan dowliga aheyn iyo deeqbixiyeyaasha ay ku bixinayaan meelgelinta iyo bixinta adeegyada, taasi oo xaalado badan aan khasab ahayn in ay isku dubbaridaan wasaaradaha waaxaha ama degmooyinka. **Waxaa sidaas darteeda jira heer iswaafajin daciif ah, taasi oo qayb ahaan ah natiijada la'aanta siyaasad la isku waafajinayo, balse sidoo kale ah natiijada hirgelinta gargaarka bini'aadminimo ee sii socda ama bixinta adeegyada nooc mashruuc lacagaha deeqaha ah.**

Sharci Ahaanshaha Dowladda Hoose

[8] Tusaala ahaan daraasada 2012 ee ku saabsan Qiimeynta Shaqada Waaxda Daraasada gudaha Waxbarashada, Caafimaadka iyo Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda (WASH) ee Puntland waxaa lagu oggaaday: "Durugsanaanta bulshada (dad badan waxay ka dib maraan raadka bixinta adeegyada ee adeegyada halkan lagu sharxay) iyo qaadashada hababka bixinta adeegyada si loo xaliyo durugsanaanra bulshada faquuqidda waxay noqonaysaa caqabadda siyaasadda muhiimka ah iyo qorshaynta."

[9] Tusaale ahaan Daraasada Qiimeynta Shaqada 2012 ee Puntland waxaa lagu oggaaday in: 'Xeerarka Waxbarashada iyo Biyaha aysan caawimaad ka geysanaynin meesha ka saaridda hadalka aan caddeyn ee ka jira heerka degmada, halkaasi oo Wasaaradaha waaxaha iyo dowladda hoose si wadajir ah ugu lug leeyihiin bixinta adeegyada.'

Waxaa jira caqabado muhiim ah oo dheeraad ah oo ka baxsan sharci dejinta iyo isbahaysiga. Tani waxaa ka mid ah cabaqadaha sharci ahaanshaha dowladaha hoose. Sharci ahaanta maamulka degmada wuxuu ka imaanayaa lahaanshaha degaanka laga soo doorto oo la xiriirta hawlaha degmooyinka. Tani waxaa la hindisay in ay la xiriirto la-xisaabtanka xagga dadka marka laga eego dhanka: (1) in ay doorteen dadka, iyo (2) in ay u gaarsiinayso adeegyada dadka hab wax ku ool ah ayadoo la eegayo baahiyadooda iyo mudnaanada. Sharci ahaanshahan mararka qaarkood caqabad ayaa soo wajahda. Caqabadaha ugu waaweyn waxay ka yimaadaad khayraadka xaddidan ee loo wareejiyay heerarka hoose ee dowladda oo xaddidaya ilaa inta suurtagalka ah bixinta adeegyada. Caqabadda labaan waa la'aanta waajibaad dimuqraadi ah iyo habdhaqanka degmooyin badan, oo wax looga qaban doono doorashooyin dowladda hoose ee la qorsheeyaya 2013.

Puntland, wakiilada dowladda hoose waxaa la soo xushaa ayadoo lagu saleynayo hanaan xulasho qabiil, kaasi oo bixinaya sharciyada balse sidoo kale soo bandhigaya caqabado marka la eego la-xisaabtanka dhanka hoose. Ayadoo dastuurka Puntland uu qorayo shuruudaha bixinta adeegyada dowladda hoose ee leh ka qaybqaadashada dadka (sida ay tijaabisay), ka qaybqaadashada dadweynaha qorsheynta iyo miisaaniyad dejinta markii hore waa la xaddiday.[10] Bixinta adeegyada bulshada waxaa laga sameeyay qaybo badan ee Puntland ah wakhti hore, balse guud ahaan hab aan la qorsheyn.

Sharciyada sidoo kale waxay ku xiran tahay dhaqanka iyo sidoo kale hab-dhismeedyada rasmiga ah ee ka jria heerka degaanka Puntland. Sida natiijada ka dhalatay la'aanta habab dowladeed oo waxtar leh wixii hadda ka horeeyay iyo ku tiirsanaanta nidaamyada qabiileed ee taariikhiga ah sida hay'ado amni iyo bixin adeeg ahaan, tiro ballaaran oo ah habab awood dhaqameed oo tartamaya ayaa ka jira labaduba heerka gobol iyo midka degaanka. Tani waxaa ka dhashay caqabado marka la hubinayo muuqaalka guud ee dowladda iyo kontoroolidda horumarinta heerka dowladda, balse waxaa si la mid ah u jira fursado lagu dhisayo hababka awoodda aan rasmiga ahayn ee jira.

Maalgelin La'aan

Xukun-wadaajinta iyo baahinta maamulka waxaa intaasi siidheer in ay culays saareyso maalgelin la'aanta hadda la joogo ee lagu bixinayo adeegyada. Dhanka kale degmooyinka waxay leeyihiin awood ay ku qaadayaan canshuuro magaalooyinka waaweyna mar hore ayay bilaabeen tani. Heerka maalgelinta loo qabtay bixinta adeegyada ee laga helay heerka dhexe si kastaba waxay ku xaddidan tahay ilaa iyo heerka ah in degmooyinka badankooda ay adeegsanayaan badnaanta lacagaha kharashadyada soo noqnoqda marka la eego bixinta adeegga (ka sokow deeqaha tijaabada ah ee laga helo JPLG kabka maaliyadeed ee hadda la joogo degmooyinka ay ka helaan dowladda dhexe waxay ku xadaysan yihiin 2.5% ee dakhliga la soo saaro.

Awoodda Dowladaha hoose

Ugu dambeyntii, waxaa jira caqabada awoodda dowladaha hoose. Awoodda maamulka degmada waa daciif, marka laga eego: (1) shaqaalaha jooga. Ayadoo ay jiraa tiro degmooyin haysta tiro xubno shaqaale oo ku filan, awoodda kuwani (oo loola jeedo heerka waxbarashada iyo khibradda) mar kasta ma gaarsiisana baahiyada ka hor imaanaya awoodda degmada ay ku bixinayso qoondaynyada kharashka hadda la joogo iyo kan mustaqbalka. (2) Heerka lacagaha loo qabtay bixinta adeegyada waxay ku xaddidan yihiin ilaa heerka ah in degmooyinka badankooda ay adeegsanayaan lacagaha badan ee kharashyada joogtada ah badelkii lagu bixin lahaa adeegyada. Iyo (3) ma jirto dhaqanka ah qorshayn mustaqbalka-fog kaliya degmooyinka ka hela taageerada JPLG ayaa leh qorsheyaal shaqo iyo miisaaniyad sannadle ah.[11] Awoodda sidoo kale ee u dhaxeysa qaybaha kala duwan ee degmooyinka A, B iyo C aad ayay u kala duwan tahay (asal ahaan kaliya A iyo B marka la eego Sharciga L. 7).

[10]Eeg sidoo kale Xarunta Cilm-baarista Horumarinta Puntland (2010): Khariidad Sameynta Ururada Nabadda, – Caqabadaha Amniga iyo Kala Dambeynta, Hanaanka dimuqraadiyadaynta, iyo Kala-geynta Awoodda Maamulada Degaanka, Qaybyo Qoraal
[11]Eeg sidoo kale warbixinada Nicolas Awortwi ee ku saabsan qiimeynta hay'adeed ee Puntland.

Awood la'aanta heerka degmo waxaa qayb ahaan loogu magdhowayaa shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka shaqaynaya bixinta adeegyada midkood hab farogelin dowladeed la'aan ama ayadoo loo soo marayo habka ay Wadaagaan Dadka iyo Dowladda (PPP). Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay gaar ahaan ku xoogan yihiin bixinta adeegyada biyaha sidoo kale waxbarashada dugsiga sare iyo dugsiga hoose ee ka jira magaalooyinka waaweyn ee Puntland. Sidaas darteed, daraasada waaxda waddada ee ay maalgelisay hay'adda ILO 2012 ee Puntland waxaa lagu ogaaday in qaabeynta iyo qorshaynta waddooyinka magaalooyinka iyo kuwa farcama in lagu wareejiyo dowladaha hoose balse hirgelinta waxay aad u wanaagsan tahay marka loo wakiisho shirkado gaar loo leeyahay.

Siyaasadda waxaa loo horumarinayaa in ay gacan ka geysato wax ka qabashada caqabadaha iyo dhisidda fursadaha kor lagu muujiyay.

# 4 Aasaasyada Loogu baahan yahay Hirgelinta Siyaasadda

## 4.1 Rabitaanka Siyaasadeed

Baahida loo qabo in baahinta awoodda loo meeleeyo sida arrin mudnaan sare u leh dowladda ahaan iyo ku meelaynta mas'uuliyadda hirgelinta heerka ugu sareeya ee dowladda waa wax aasaasi ahaan loo baahan yahay si loo hirgeliyo awood baahinta. Baahida loo qabo u doodidda baahinta maamulka si fiican ayaa loo aqoonsan yahay marla la eego sifooyinka barnaamijyada baahinta maamulka ee lagu guulaystay. Taageerayaasha xooga leh wuxuu u aqoonsaday Bahl in ay yihiin.17 (1) dadka iyo wakiilada ay doorteen, (2) Madaxweynaha, (3) Baarlamaanka, (4) dowladaha hoose ee magaalooyinka, iyo (5) deeqbixiyeyaasha dibadda.[12]
Waa muhiim in la abuuro rabitaan siyaasadeed iyo in la aqoonsado taageerada baahinta maamulka sida shuruudda hore ee si lagu guulaysto u hirgelinta baahinta maamulka.

## 4.2 Awood Dhisidda

Awoodda xaddidan ee dowlaha hoose ee ay tahay in ay la wareegaan mas'uuliyado waaweyn ee loogu talogalay bixinta adeegga iyo abuulka dakhliga waa caqabad weyn oo ka hor imaanaysa in la gaaro baahinta maamulka. Wasaaradaha dhexe waxay u adeegsadeen sida sababta carqaladaynaysa geeddi-socodyada baahinta maamulka. Sidaas awgeed, waa muhiim in la sameeyo waxa ay ka koobanto awood dhisidda dhacda gudaha barnaamijka awood baahinta. Tani waxaa la sameyn karaa ayadoo loo marayo adeegsiga saleysan deeq siinta dowladaha hoose oo ku kalifaysa in ay hirgeliyaan mashruucyo iyo maalgelin ka mid ah oo loogu talogalay awood dhisidda dowladda hoose ee loogu talogalay mashruucyadan.

Dadaalada awood dhisidda ayaa la sameynayaa si loo qiimeeyo kadibna loo aqoonsado xirfadaha muhiimka ah iyo awoodaha loogu baahan yahay in la qabto adeegyada la baahiyay ee loo qoondeeyay heerka degmo ee hoostagay nidaamka mustaqbalka ee bixinta adeegyada iyo dowlad wanaaga ee baahsan. Ayadoo lagu saleynayo qiimeyntan, barnaamij awood dhisid ayaa la qorsheynayaa kadibna la hirgelinayaa oo xaqiijinaya in hoggaamiyeyaasha dowladda hoose iyo maamulka sare la doorto, sidoo kale shaqaalaha, waxay yeelanayaan aqoonta, khibradda iyo awooda loo baahan yahay si ay si wax ku ool ah ugu bixiyaan adeegyada loo qoondeeyay.

## 4.3 Qaab-dhismeedka Sharciga

[12]Bahl, Roy. 1999. Sharciyada Hirgelinta Baahinta Maaliyadeed. Warqadda Shaqada Barnaamijka Daraasadaha Caalamiga 99-1. Atlanta: Dugsiga Daraasadaha Siyaasdda Andrew Young, Jaamacadda Gobolka Georgia

Hab sharciyeed waadix ah ee qeexaya doorarka, mas'uuliyadaha iyo awoodaha dowladda hoose waa wax aasaasi u ah in lagu guuleysto barnaamijka awood baahinta. Qaab-dhismeedkan sharci waa in ay ka mid noqdaan sharciyada dowladaha hoose ee qeexaya shaqadooda, habka ay u hawlagalayaan, sidoo kale geedi socodyada doorashada gollayaasha degaanka. Qaab-dhismeed sharci kale oo loo baahan yahay waa sharci ku saasban maaliyadda dowladda hoose, oo noqon kara sharci ku saabsan miisaaniyadda iyo maaliyadaha degaanka ama sharci ku saabsan xiriirada maaliyadda dowladaha ka dhaxeeya, kaasi oo qeexaya nidaamka maamulka maaliyadeed iyo isdhexgalka u dhaxeeya heerarka dowladda dhexe iyo tan hoose.

### 4.4 Siyaasadda Qaranka

Waa in ay sidoo kale jiraan dukumeentiyo siyaasad heer qaran waadix ah oo bixinaya himilada iyo ujeeddooyinka ayna tahay in barnaamijka awood baahanta uu taageero. Kuwani waxaa lagu dari karaa Qorshayaasha Horumarka Qaranka, Himilada 2020, ama noocyada kale ee ujeeddooyinka siyaasadda heerka qaran. Waa in ay sidoo kale jiraan istaraatiijiyado iyo siyaasado heerka laanta ah oo loogu talogalay waxbarashada, caafimaadka, horumarka dhaqaalaha, iyo qorsheyaasha kaabayaal lagu taageerayo horumarinta hanaanka miisaaniyadda ee ay tahay in dhexgeliyo hanaanada go'aanka qaab-dhismeedka miisaaniyadda muddada dhexe.

### 4.5 Ilaha Dhaqaale

Ka guul gaaridda awood baahinta waxay sidoo kale aad ugu xiran tahay ilaha dhaqaale ee ay heli karaan dowladaha hoose sidoo kale wadaagidda dakhliyada laga helo dowladda dhexe ama xawilaadyada maaliyadeed. Heer ku filan ee ah ilaha dhaqaale waa in loo xaqiijiyaa dowladaha hoose eel eh aasaaska dakhli ku habboon, sida canshuurta guryaha, canshuuraha degaanka iyo ujrooyinka, gaar ahaan lacagaha laga qaado adeegga, waa in xoogga la saaro bilowga hanaanka baahinta maamulka.

### 4.6 Shuuruudaha aasaasiga ah ee dheeraadka ah

Si loo gaaro aragtida iyo si loogu hoggaansamo dhammaan mabaadiida siyaasadda sidoo kale si gacan loogu gesyto yareynta saboolnimada ee heerka degaanka, dowlaha hoose waa in ay awoodaan aysan waxtar leh u bixiyaan adeegyadooda. Sidaas-awgeed, waa in ay jiraan ujeeddooyin dabaqad hoose oo ay tahay in siyaasadda ay soo bandhigto in ay u wanaajiso baahinta maamulka ee Puntland, kuwaasi oo hoos ku qoran.

Waxgalnimada baahinta maamulka waxaa si aad ah loogaga qayb qaadan karaa isku darka awoodda iyo waxtarka dowladaha hoose. Awoodda marka laga eego dhanka awoodidda in si ballaaran loo gaarsiiyo adeegyada dhammaan qaybaha dadweynaha iyo si waxtar leh u hubsashada in adeegyada (wax soosaarka) la bixiyo ayadoo la adeegsanayo heerka khayraadka ugu hooseeya (wax gelinta).

Awoodaha ugu hooseeya ee loo baahan yahay in ay shaqeeyaan, ee ay xaqiijinayso Dowladda Puntland waa:

1) Awood sharci, oo loola jeedo awoodda cad ee la wareejiyay iyo sharciyada iyo xeerarka xukuma hawlgalada dowaladaha hoose (tani sidoo kale waxaa loola jeedaa in sharciyada keenaya baahinta maamulka ee hoos tagaan sharciyada la xiriira ee heerarka sare,sida dastuurka).
2) Awoodaha lagu hirgelinaya ayadoo la tixraacayo shaqooyinka la wareejiyay. Marka si kale loo dhigo marka shaqooyinka la wareejiyo khayraadyada aadanaha iyo maaliyadda loo baahan yahay si loo hirgeliyo shaqooyinka waxay sidoo kale u baahan yihiin in la wareejiyo.
3) Nidaamyada gudaha iyo habraacyada waa in ay shaqeeyaan si ay awood ugu siiyaan dowladda hoose in ay fuliso, sida shaxda hay'adeed ee habboon, habraacyada maamulka maaliyadeed, habraacyada wax iibsiga, hababka ka warbixinta iyo wixii la mid ah; iyo baaritaanada gudaha iyo isku dheelitirnaanta.

4) Awoodda lagu xaqiijinayo in adeegyada la hirgeliyo ayadoo la tixraacayo qorsheyaasha. Tani khasab ma aha in ay noqoyo in dowladaha hoose ay yihiin kuwa sameynaya hirgelinta. Tani sidoo kale waxaa la sameyn karaa ayadoo loo marayo in cid kale la shaqaaleysiiyo, oo loola jeedo in ay jirto awood la isugu dubbaridayo bixinta adeegyada ee heerla hoose.
5) Isku duwidda habboon ee u dhaxeysa heerarka kala duwan ee dowladda. Sidaas awgeed waa in ay jiraan awood iyo hab-dhismeedyo shaqeynaya si loo hubsado isku dubbarididda u dhaxeysa degmooyinka iyo laamaha wasaarada ee degmada, gobolka iyo heera dhexe.
6) Waa in ay jirto awooda heerka dhexe ah oo sameynaysa hubinta tayada shaqada degmooyinka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa in ay yeelato awooda ay ku xaqiijinayso in degmooyinka u hawlgalaan si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka Puntland, ayadoo isla mar ahaantaasina hay’adaha laamaha ay tahay in ay yeeshaan awooda ay ku sameynayaa dib u eegista iyo hubinta tayada adeeg bixinta degmooyinka gudaha miciinsigooda. Sidoo kale, Masaaradda Qorshaynta waa in ay xaqiijiso in ay jirto is-shabahaadda habboon ee qorshaynta heerka degmo iyo midda qaranka.
7) Waa in ay jiraan habab shaqeynaya oo lagu xaqiijinayo in wakiilada ka socda dhammaan qaybaha bulshada, oo ay ka mid yihiin dumarka, dhalinyarada iyo dadka laga tiro badan yahay ay ka qaybqaataan qorshaynat bixinta adeegyada ee guda degaankooda, iyo in muwaadiniinta ay la-xisaabtamayaan degmooyinka.
8) Ugu dambeyntii, waa in ay jirto kala qaybsanaan shaqo oo u dhaxeeya wasaaradaha laamaha iyo dowladaha hoose ee ku saabsan qofka bixinaya adeegyada heerka degmo.

Dhammaan sideedda dhibcood waxaa wax ka qaban doono Dowladda Puntland muddo kadib. Hase-yeeshee, sida mabda’a ugu dambeeya ahaan siyaasaddan waxay noqonaysaa mid macquul ah, yoolalka iyo hanaanka lagu gaarayo yoolalkan waxaa la hirgelinayaa muddada wakhti la bixiyay gudaheeda ayadoo walina la tixgelinaya aragtida guud ee Puntland.

# *5 Yoolka 2020—Doorashada, Doorarka, Shaqooyinka iyo Dhaqaalaha ee Heerarka kala Duwan ee Dowladda Puntland ee Mustaqbalka*

Dhammaadka 2020 Xukuumadda Dowladda Puntland waxay hirgelinaysaa bixinta adeegyo wanaagsan ayadoo loo marayo dowlada hoose waadaxnimo leh, lala xisaabtamo oona laga qaybgalo. 2020 kala qaybsanaanta shaqada ee u dhaxeysa dowladaha hoose iyo wasaaradaha laamaha waxay noqonayaan kuwo cad oo qeexan jiritaan dowladeed kastana wuxuu yeelanayaa mas’uuliyad kali ah adeegyo si cad u qeexan. Kala qaybsanaanta shaqada waxaa ku xigaya kala qaybsanaanta khayraadka, oo u dhigma mas'uuliyadaha lagu heshiiyay.

Si loo gaaro yoolkan waxay u baahanaysaa falanqayn qoto dheer ee qoondaynta mas’uuliyadaha iyo khayraadka ugu habboon ee u dhaxeeya heerarka kala duwan ee dowladda iyo bixiyeyaasha adeegyada ee aan dowladda ahayn oo ku saleysan mabaadiida aasaasiga ah ee baahinta maamulka, oo qeexaya isbedelada (i) qorsheyaasha laamaha xukunkooda la wadaago, (ii) kala soocidda degmooyinka oo ka soo horjeedda qoondeynta shaqada, (iii) hanaanka ka qaybgalka qorshaynta, (iv) la-xisaabtanka, (v) hubinta tayada, (vi) habsami u socodka maalgelinada, iyo (vii) awoodda. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha ee Dowladda Hoose iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay bilaabayaan ayna isku duwayaan hanaanka noocaas ah.

## 5.1 Baahinta Maamulka Siyaasadeed

### 5.1.A Qiimeynta Baahinta Maamulka Siyaasadeed

### 5.1.B  Doorashooyinka

Puntland waxay leedahay dhaqan dheer oo lagu xulanayo wakiilada degaanka ayadoo loo marayo nidaam qabiil, balse sannadahii ugu dambeeyay ee la soo dhaafey waxay sidoo kale tijaabisay ayna qorsheysay habdhaqan dimuqraadiyadeed. Ayadoo qayb ka ah geeddi-socodka ka soo bixidda mabaadiida siyaasadda Puntland waxay ka shaqeynaysaa hirgelinta doorashooyin sida mustaqbal ahaan ee qaybta ugu muhiimsan ee xaqiijinta la-xisaabtanka heerka degaan. Sidaas awgeed, xubnaha gollaha degmada waxaa mustaqbalka la dooranayaa ayadoo la tixraacayo sharciga.

Si loo sii wanaajiyo geeddi-socodka dimuqraadiyada heerka degaan Puntland waxay tijaabinaysaa oo ayna hiigsanaysaa hirgleinta geeddi-socodyada la-tashiga bulshada ee ujeedkeedu tahay xulashada wakiilada gollayaasha xaafadaha (heerka ka soo hooseeya gollaha degmada). Geeddi-socodka xulashada gollaha xaafadda waxaa la qabanayaa ayadoo loo marayo geeddi-socod waadax ah (sida ay hirgeliyeen CDRD iyo JPLG) si loo hubsado metelaadda ballaaran ee raga iyo dumarka qabiilada kala duwan ee degaanka gollaha xaafadaha.

Qabashada doorashooyinka gollaha degaanka waa qayb muhiim u ah geeddi-socodka baahinta maamulka waana in wax looqa qabto qorshe hawleedka sannadada soo socda.  Ayadoo lagu saleynayo xog-wareysiyada loo qabtey horumarinta bayaankan siyaasadda, daneeyeyaasha khuseysa ee ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo ilaa duqayda degmooyinka waxay dareemaan in kuwani la qaban karo 2016 oo wakhtiga shaqooyinka baahinta maamulka ee dheeraadka ee waaxyada kala duwan ay bilaabayso in si buuxda loo hirgeliyo.

Waa muhiim in muddada kumeelgaarka ah kahor inta aan la qaban doorashooyinka gollaha degaanka, in dhawr tallaabo ay dhacaan.  Marka hore, waxaa loo baahan yahay in la qeexo xuduudaha degmooyinka ayadoo ay jirto suurtagalnimo ah in la isku daro ama la yareeyo tirada guud ee degmooyinka oo ku saleysan shuruud adeeg iyo dhaqaale badan.  Aasaasidda guddiga xuduudaha ee la sameynayo 2014 ayaa la wareegaya hawshan.

Marka labaad, isbedelada sharciga 7 waa in la hirgeliyo si loo qeexo mas'uuliyadaha degmooyinka ee waafaqsan bayaanka Siyaasaddan Baahinta maamulka.

Marka seddaxaad, u diyaargarowga doorashada ee leh diiwaangelinta codka iyo shuruudaha kale waa in ay bilowdaan bartamaha 2014 sidaas awgeed waxaa jiri kara wakhti ku filan in la sameeyo diiwaangelinta codeeyaha iyo ololaha macluumaadka ku saabsan doorashooyinka gollaha degmada.

### 5.1.C Ka Qaybqaadashada Dadweynaha

Si looga soo baxo mabda'a ka qaybqaadashada dadweynaha, gollayaasha degmada waxay ka shaqeynayaan in ay ka qaybgeliyaan muwaadiniin geeddi-socodyada qorsheynta meesha la yeeli karo.  Inta ay socoto muddada hirgelinta siyaasadda, gollayaasha degmada waxay ka qaybgelinayaan muwaadiniinka laga soo bilaabo geeddi-socodka hirgelinta iyo qorsheynta gollaha ilaa:

1) Hubinta in gollayaasha xaafadda ka qaybgalaan kala horumarinta iyo qorsheynta waxqabadyada horumarinta ee degaankooda, iyo in kuwan loo gudbiyo gollaha suurtagalniamda in lagu daro qorshaha guud ee degmada.
2) Daabicidda qorsheyaasha gollaha degmada iyo u soo bandhigidda kuwani muwaadininta ayadoo loo marayo geeddi-socodka dhageysiga dadweynaha.
3) Inta lagu guda jiro hirgelinta, in awood loo siiyo muwaadiniinta in ay ka qaybqaataan ilaalinta waxqabadyada iyo in ay awood loo siiyo in ay ka warbixiyaan weecsanaanta iyo in ay uga bixiyaan canshooyinka sida loogu baahdo.

4) Daabicidda miisaaniyadaha, xisaabaadka iyo warbixinada hanti dhawrka si muwaadiniinta ay awood ugu siiyaan kuwani in ay baaritaan xeeldheer ku sameeyaan isusocodka maaliyadda iyo in ay eegaan kala horumarinta maalgelinta ee ka dhanka ah qorsheyaasha loo soo bandhigay dadweynaha.

Tani waxaa loo baahan yahay in la bilaawo bilowga 2014 olole wacyigelinta bulshada ah ee ku saabsan Istiraatiijiyadda Baahinta maamulka iyo saameynyada ay tani ku yeelanayso bixinta adeegyada la siinayo muwaadiniinta. Canaasiirta lagu qeexayo xuduudaha degmada iyo doorashada gollayaasha degaanka waxay qayb muhiim ku ah ololahan.

Tani waa meel ay taageerada deeqbixiyeyaasha ay muhiim ugu noqonayso si loo sii horumariyo hirgelintya siyaasaddan baahinta maamulka.

### 5.1.D Ka Qaybgelinta

Si loo hubsado ka gaybgelinta buuxda ee dhammaan qaybaha bulshada Dowladda Puntland waxay ka shaqaynaysaa in ay kordhiso doorka haweenka iyo qaybaha la hayb sooco ee bulshada geeddi-socodka go'aan-qaadashada. Tani waxay noqon kartaa ayadoo loo marayo geeddi-socodyada tallaabada xoojinta ama hubsashada in geeddi-socodka qorshaynta uu bixinayo qoondaynyada khayraadka waajibka ah ayadoo la eegaya baahiyada haweenka iyo kooxaha la hayb sooco. Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay tijaabinaysaa hindiseyaasha noocaas ah in la biloowo sannadada.

## 5.2 Baahinta Maamulka Maamuleed

### 5.2.A Qiimeynta Baahinta Maamulka Maamuleed

**Qaybahan soo oscda waxay tilmaamayaan qaar ka mid ah meelaha ugu muhiimsan meesha dadaalo dheeraad ah loogu baahan yahay si loo kala cadeeyo doorka wasaaradaha dhexe iyo dowladaha hoose ee hirgelinta baahinta maamulka maamuleed, sii-wadiddda heerarka iyo tayada bixinta adeegyada iyo shaqooyinka ilaalinta iyo qiimeynta loogu talogalay bixinta adeegyada maamulka baahsan.**

### 5.2.B Doorka Wasaaradaha Dhexe iyo Dowladda Hoose

Waxaa jira baahi loo qabo horumarinta kala cadeynta doorarka iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee u dhaxeeya wasaaradaha dhexe iyo dowladaha hoose si loo taageero geeddi-socodka baahinta maamulka maamuleed. Hase-yeeshee, aragtida guud hadda ee Puntland waxaa ka jira xoogaa xaddad ah oo ku saabsan doorarka iyo mas’uuliyadaha loo wareejin karo dowladaha hoose ee kala saarista dowladda hoose ee kala duwan. Sidaas awgeed, hab lagu qeexayo doorarka iyo mas’uuliyadaha ayaa waxay ku saleysnaan doonaan go’aaminta awoodaha dowladaha hoose si ay u oggolaato shaqooyinka la soo wareejiyay.

Shaqooyinka maamulka dhexe sida lagu aqoonsaday daraasada qiimeynta shaqada waxaa loo aqoonsaday sida (1) Siyaasad Dejinta, (2) Qorshaynta Istiraatiijiyadeed, (3) Miisaaniyad Dejinta, (4) Fulinta, iyo (5) Nidaamka kontoroolidda iyo Addeecista. [13]

Shaqooyinkan xudunta ah waxaa loo sii kala qaybin karaa hab soo bandhigaya qeexitaanka cad ee doorka wasaarada dhexe iyo dhowladaha hoose. Qaybinta suurtagalka ah ee doorarkan waxaa lagu soo bandhigay hoose marka laga eego dhanka mas'uuliyadda aasaasiga ah iyo midda labaad.

[13] Geopolicity, Daraasad ku saabsan Qiimeynta Shaqadada Laanta ee Gudaha Waxbarashada, caafimaadka, iyo Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda ee Puntland, 15 Abriil, 2012.

**Jadwalka 5 Qoondaynta Shaqooyinka Xudunta Maamulka iyo Mas'uuliyada**

| Shaqada | Mas'uuliyadda Aasasiga ah | Mas'uuliyadda Labaad |
|---|---|---|
| Siyaasad Dejinta | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |
| Qorsheynta Istraatiijiyadeed | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |
| Miisaaniyad Dejinta | Dowladda Hoose | Wasaaradaha Dhexe |
| Fulinta | Dowladda Hoose | Wasaaradaha Dhexe |
| Nidaamka kontoroolidda iyo Addeecista | Wasaaradaha Dhexe | Dowladda Hoose |

### 5.2.C Qorshaynta iyo Heerar Dejinta

Dowladda Puntland waxay xaqiijinaysaa in adeegyada lagu bixiyaya heerka maamulka baahsan la soo qorsheeyo ayadoo loo marayo geeddi-socodka ka qaybgalka, waadaxnimada, iyo la-xisaabtanka. Isla mar ahaantaana adeegyada waa in lala simo qorshayaasha qaranka iyo heerarka tayada sida laga soo qaatay qorshayaasha laanta.

Geeddi-socodka qorsheynta ee loogu talogalay adeegyada laga bixiyay heerka degmooyinka waxaa lagu qorsheynayaa heerka degmo ahaan. Degmo kasta waxay la wareegaysaa geeddi-socodka qorsheynta ee ku saleysan:

1) Qorsheyaasha ka qaybgalka ee la sameeyay ayadoo loo marayo la-tashiyada bulshada ee loo dhan yahay.
2) Mudnaanaha guud ee degmada ee lagu muujiyay qaab-dhismeedka horumarinta degmada, oo loola jeedo (i) miisaaniyadda, iyo (ii) qorsheynta maalgelinta.
3) Qorsheynta gobolka, isku keenidda qaabdhismeedyada degmada.
4) Mudnaanaha qaranka ee lagu muujiyay qorshaha horumarinta qaranka iyo qorsheyaasha wasaaradaha waaxaha.

Degmada sidaas darteed waa in ay ku saleyso qorsheyaasha baahiyada ay muujiyeen muwaadiniinta sida lagu soo bandhigay geeddi-socodka qorsheynta gollaha xaafadda, iyo isla mar ahaantaana in ay hubsadaan in qorsheyaasha ay isla jaanqaadayaan qaabdhismeedka horumarinta degmada sidoo kale qorsheyaasha heerka qaran.

Qorsheyaasha waa in loo soo gudbiyo heerka gobol si loo hubsado isku dheelitrinaanta iyo isku dubbarididda gobolka, iyo ugu dambeyntii in Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxah ay hubiyaan in qorsheyaasha ay waafaqsan yihiin qorsheyaasha waaxda iyo qaranka. Haddii wax diidmo ah aan laga keenin qorsheyaasha toban maalmood gudahooda ee marka la soo gudbiyo qorsheyaasha, degmada waxay u hawlgalaysaa hirgelintooda. Xaaladaha ay jiraan diidmo laga keenay qorsheyaasha, tani waxaa loogaga hadlayaa guddiga ka kooban wasaaradda waaxda ee ku habboon, Wasaaradda Ariimaha Gudaha iyo Duga degmada /qofka guddoomiyaha ka ah.

### 5.2.D Hirgelinta

Shaqada hirgelinta waxaa la siinayaa dowladaha hoose gudaha qiimeynta awooda dowladaha hoose ay ku bixinayaan adeegga. Kala saarista dowladaha hoose ee gudaha nidaamka heer u kala soocidda hadda waxaa loo isticmaalayaa sida aasaaska lagu go'aaminayo awoodda hirgelinta bixinta adeegyada. Kuwa gaarsiisan awoodaha bixinta adeegyada marka laga eego dhanka shaqaalaha iyo maaliyadda waxay yeelanayaan mas'uuliyadda buuxda ee lagu bixinayo adeegga dadweynaha ee habka maamulka baahsan. Dowladahaasi hoose ee aan gaarsiisanayn awoodaha bixinta adeegyada waxay ku tiirsanaanayaan hababka bixinta adeegyada la kala geeyay ee wasaaradaha dhexe ay ku bixinayaan adeegyada.

### 5.2.E Korjoogteynta iyo Qiimeynta

Si dhow ugu xiridda geeddi-socodka qorsheynta muwaadiniinta sidoo kale qubarada ka socda wasaaradaha waaxaha waxay xoojinayaan la-xisaabtanka iyo hubinta tayada.

Degmooyinka waxay noqon doonaan kuwa ay la-xisaabtamaan dadka ayadoo loo marayo ka qaybgalka geeddi-socodka qorsheynta (ee kor lagu sharxay) iyo gollayaasha la doortay sida lagu qeexay Dastuurka. Tani waa la sii xoojinayaa, ayadoo dhammaan gollayaasha degmada ee mustaqbalka lagu waajibyeelayo in ay ka soo warbixiyaan horusocodka iyo maamulka dadweynaha (horusocodka ka dhanka ah qorsheyaasha, xisaabaadka ka dhanka ah miisaaniyadaha, ogeysiisyada wax soo-iibsiga iyo warbixinada hanti dhawrka) muwaadiniinta degmooyinka ayadoo loo marayo dhageysiyada dadweyne iyo daabacidda dukumeentiyada ugu muhiimsan.

Si loo hubsado tayada habboon ee qorsheyaasha degmada, degmooyinka waxay ka shaqeynayaan hubsashada in heerarka loo adeegsado adeegyada kala duwan aya waafaqsan yihiin xeerarka iyo qorsheyaasha waaxda. Wasaaradaha waaxaha waxay geynayaan kuwani dhammaan degmooyinka.

Wasaaradaha waaxaha waxay hubsanayaan in khubaro waaxda ka socda la heli karo si ay ugu hagaan degmooyinka geeddi-socodka qorsheynta sababtaas awgeedna waxaa la xaqiijinayaa tayo hubinta. Halka wakiilada waaxda heerka degmo (sida saraakiisha caafimaadka ama waxbarashada ee degmada) ay ka shaqeynayaan tani waxay ka dhigaysaa in ay u tagaan gollaha degmada waxayna kula talinayaan qorsheynta la xiriirta khibradda laantooda. Halka aysan ka jirin khubaro heer degmo ah, degmooyinka waxay wayddiisanayaan wasaaradda waaxda kuwaasi oo u soo diraya khubaro heer degmo ama heer gobol.

## 5.3 Baahinta Maamulka Maaliyadeed

### 5.3.A Qiimeynta Baahinta Maamulka Maaliyadeed

Mabda’a aasaasiga ah ee loogu talogalay baahinta maamulka wuxuu noqonayaa in maalgelinta ay raacayso shaqo. Si loo hubsado in siyaasadda la hirgelin karo, maalgelinta bixinta adeegyada waxaa ku xigaysa shaqada.

Hase-yeeshee, ayadoo la hoostagaya xaaladaha hadda jira dakhliga xaddidan ee dowladaha hoose, mabda’an aasaasiga ah way adkaanaysaa in la adeegsado. Sidaas awgeed, habka “shaqada ku lugta leh maaliyadda” ayaa lagu qaadanayaa xaaladaha gaarka ah ee dowladaha degaanka.

Waxaa lagu taliyay in habka loogu dhaqma wadamada badankooda ee sare u qaadidda dakhliyada kahor inta aan la adeegsan qoondaynta kharashka ay tahay in lagu dabaqo Puntland. Bahl wuxuu ku sheegay sida habka “dhammaadka-dambe”.[14]Bahl wuxuu sheegay labo sababood loo isticmaalayo habkan: (1) baahiyada loo qabo kharashka aad ayay u badan yihiin waxayna keenaysaa in dakhliyada iyo kababka lacageed aysan sida suurtagalka ah ugu filnayn maalgelinada loo baahan yahay, iyo (2) siyaasad ahaan way fududahay in lagu sameeyo isbedelo ilaha dakhliga marka loo eego in la qeexo qoondaynyada kharashka.

Ayadoo lagu saleynaya adeegsashada habka qiimeynta iyo naqshadeynta dakhliga, oo sidoo kale loo isticmaalayo qaaciddada qoondaynta lagu noqday, adeegyada kala duwan waxaa la qiimeynayaa qoondaynyadana mustaqbalka waxaa la siinayaa heerka dowladda ee hirgelinaya bixinta adeegyada.

[14]Bahl, Roy. 1999. Sharciyada Hirgelinta Baahinta Maamulka Maaliyadeed. Warqadda Shaqada Barnaamijka Daraasadaha Caalamiga 99-1. Atlanta: Dugsiga Daraasadaha Siyaasadda Andrew Young, Jaamacadda Gobolka Georgia

Maalgelinta degmooyinka waxay ku xirnaanaysaa shuruudaha adeegga waxayna la xiriiraysaa kala saaristooda sida midkood A, B ama C. Ayadoo la tixgelinayao isbedeladan qaaciddada qoondayna ee degmooyinka dib ayaa loogu noqonayaa si ay u kulmiyaan isbedeladan.

Si loo hubiyo in aysan jirin wax nidaamyo siman oo la abuuray iyo si loo sii wado geeddi-socodka dowlad dhisidda Puntland ayadoo la tixraacayo Baaqa Paris ee ku saabsan Waxtarka Gargaarka iyo heshiiska Qorshaha Cusub ee u dhaxeeyay deeqbixiyeyaasha iyo wadamada soo koraya dhammaan deeqaha deeqbixiyeyaasha adeegyada lagu sharxay siyaasaddan waa la hirgelinayaa ayadoo la eegayo kala qaybinta shaqada ee u dhaxeysa heerarka kala duwan ee dowladda Puntland sida lagu sheegay siyaasaddan.

### 5.3.B Qoondaynta Kharashka

Waa aasaasi in hab marxalado kala duwan leh la adeegsado marka laga sameynayo qoondaynta kharashka gudaha awoodaha dowladaha hoose. Habka waa in la bilaabo baahinta maamulka qoondaynta kharashka dowlaha hoose ee waaweyn iyo in loo oggolaado dowladaha hoose ee yaryar in ay dhisaan awoodaha kahor inta aysan la wareegin mas'uuliyadahan.

Qoondaynta kharashka waa la kala cadeynayaa ayadoo la habeynayo Sharciga L. 7 waxaana lagu saleynayaa qayabaha dowladda hoose iyo qiimeynta awoodda. Dowladaha hoose ee Qaybta A waxaa loo xilsaarayaa baaxadda buuxda ee qoondaynta shaqo ee loogu talogalay bixinta adeegyada ee qoondaysha shaqo ee jirta. Dowladaha hoose ee Qaybta B waxaa la siinayaa qoondeynta shaqo ee meelaha ay ku jirto danta iyo muhiimda degaanka , gaar ahaan biyaha, gaadiidka, fayodhawrka degaanka, iyo adeegayda kale ee degaanka. Qayba B waxaa kaliya loo xilsaarayaa mas’uuliyadda buuxda ee bixinta meelaha xaddidan ee waxbarashada iyo caafimaadka oo ku saleysan awoodahooda. Qaybta C waxaa la siinayaa qoondayn shaqo oo aad u xaddidan ee meelaha horumarinta kaabayaasha degaanka ee aan u baahnayn kabka maaliyadeed ee heerka dhexe, adeegyada baaritaanka degaan iyo dayactiridda kaabayaasha degaanka ee gudaha khayraadkooda maaliyadeed.

### 5.3.C Ilaha Dakhliga

Ilaha dakhliga ee dowladaha hoose waa la habeynayaa si ay u siiso awood badan dowladaha hoose si ay u aasaasto gubdhiga ilaha canshuurta dakhliga ayaga u gaarka ah iyo sicirada ee dhaca gudaha xuduudaha ee aan la dhaafi karin ee lagu cadeeyay Sharciga Ku Saabsan Maaliyadda Degaanka ee ay tahay in la diyaariyo kadibna la qaato labada sano ee xiga gudahooda.

Dadaal badan ayaa la bilaabayaa si sare loogu qaado ururinta canshuuraha guryaha iyo shatiyada ganacsiyada degaanka sida ilaha ugu waaweyn dakhliga degaanka ahaan. Baahinta maamulka dheeraadka ah ee maamulka dakhliga degaanka waxaa lagu saleyanayaa horumarinta nidaamka qumaatiga isku wada ee lagu xisaabinaya dakhliyada dowladda hoose ee laga helay dhammaanka ilaha dakhliga. Nidaamkla canshuur qaadidda rasmiga ayaa la hirgelinayaa kaasi oo dhammaan canshuurta iyo dakhliyada lagu xisaabinayo ayadoo loo marayo dukeemtiga habboon iyo diiwaannada rasiidka.

### 5.3.D Kababka Maaliyadeed ee Dowladaha Ka Dhaxeeya

Kababka maaliyadeed ee dowladaha ka dhaxeeya waxaa lagu saleynayaa qaaciddada qoondaynta waadaxnimada ee cad ee qeexi doonta oo ku saleysan kala duwanaanshaha u dhaxeeya qaybaha dowladda hoose. Lacago guud oo gooni ah ee heerka dowladda dhexe ah ayaa loo go’aaminayaa sida aasaaska loogu talogalay go’aaminta qoondayna ee dowlad hoose kasta.

Sannadka bilowga ah ee baahinta maamulka, isku dheelitirnaanta kababka maaliyadeed waxay noqonaysaa kab shuruud ku xiran oo leh ujeeddooyin gaar ah, sida taageerada waxbarasho, caafimaad iyo wanaajinta kaabayaasha degaanka. Waxaa jiri doona heer xadaysan oo ah kababka maaliyadeed ee aan shuruuda ku

xirnayn oo la siinaya dowalaha hoose oo ugu horreyntii lagu taageerayo qayb ka mid ah kharashka shaqaalaha iyo dayac-tirka xafiisyada dowladda hoose.

Deeqda ujeeddada-guud ee degmooyinka waa in la hirgeliyo si loo taageero adeegyada aasaasiga ah ee heerka degmo iyo taageeridda gollayaasha degaanka iyo shaqooyinka maamulka.

Kababka maaliyadeed waa in sidoo kale ay tixgeliyaan kala duwanaanshaha xaaladaha bulshada iyo dhaqaalaha iyo awoodda maaliyadeed iyo midda dhaqaale ee degmooyinka oo ku saleysan kala saarista degmooyinka magaalada iyo miyiga ah.

### 5.3.E Deynsashada

Suurtagalnimada dowalaha hoose ee ay deyn ku qaadanayaan waxaa lagu qeexayaa Sharciga ku saabsan Lacaga Degaanka ama Sharciga ku saabsan Deynqaadashada Degaanka. Deynsashada waxaa lagu xaddidayaa gudaha awooda maaliyadeed ee dowladaha degaanka waxay kaliyana suurtagal noqonaysaa si ay u daboosho baahiyada lacagta caddaanka ah ee muddada gaaban ee qaybta dowladda hoose. Soo saarista wax curaar ah ama deyn kale waxaa kaliya loo bixinayaa suurtagalnimada Qaybta A ee dowladaha hoose waana in ay ansixiso Wasaaradda Maaliyadda kahor inta aanan la qaadan.

# *6 Baahinta Maamulka Waaxaha*

Horumarinta qorsheyaasha baahinta maamulka waaxaha waxaa lagu saleynayaa ka qaybgalka firfircoon ee waasaaradaha dhexe ee khuseysa, dowlahada hoose iyo bulshada iyo daneeyeyaasha shirkadaha gaarka loo leeyahay. Geeddi-socodka wuxuu noqonayaa hanaan ka qaybgalkiisu si aad ah u sareeya kaasi oo dadaalo badan loo sameyn doono si loo horumariyo fikradaha guud ee ku saabsan shaqooyinka iyo shaqo hoosaadyada loo qoondaynayo dowlahada hoose oo ku saleysan qayabaha dowladda hoose iyo qiimeynta awoodda oo faahfaahsan. Tani waxay go'aaminaysaa khayraadka maaliyadda iyo shaqaalaha ee ay dowladaha hoose ka helaan dowladda dhexe.

Tusaale ku saabsan khariidada wadada isku nooca ah ee loogu talogalay horumarinta baahinta maamulka waxaa lagu soo bandhigay hoose. Qorshe hawleed aad gaar u ah oo wata dhacdo taariikheed ayaa lagu bixiyay Lifaaqa B.

**Arrimaha Ugu Muhiimsan ee Qorshe Hawleedka Baahinta Maamulka**

Tallaabooyinka:

1. Horumarinta Dukumeentiga iyo Xeerarka Siyaasadda ee Baahinta Maamulka
   a. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay qeexayaan ayna sugayaan qaadashada dowladda Xeerarka Siyaasadda ee Baahinta Maamulka
   b. Dowladdu waxay aasaasaysaa guddi qaabilsan xuduudaha si ay u cadeeyaan xuduudaha degmada
   c. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose wuxuu sameynayaa hab lagu qiimeynayo awoodaha heerarka degmo oo ku saleysan kala saaristooda iyo geynta waaxyadaha wasaaradaha ee ku habboon u adeegsigooda in lagu aqoonsado shaqooyinka gaarka ah ee maamulkooda lagu baahin karo degmooyinkan.
   c. Dowladdu waxay u qabanaysaa muddo cayiman doorashada gollaha degaanka waxayna socod siinaysaa hawsha lagu hirgelinayo ee raacsan cadeynta xuquuqdaha degmada
   d. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay siinayaan hagis iyo talo degmo kasta oo ku saabsan sameynta qiimeynta awoodda hawsha shaqo oo ayada u gaar ah iyo adeegyada ay sida waxtarka leh ugala wareegi karaan wasaaradahooda dhexe.

2. Waaxda Wasaaradeed Kasta waxay magacaabaysaa koox farsamo si loo hirgeliyo geeddi-socodka

a. Waaxda Wasaaradeed kasta waxay qaadanaysaa warqad fikradda guud ah oo ku saabsan baahinta maamulka

b. Kooxda farsamada Waaxda Wasaaradda waxay sameynayaa shaqo dib-u eegis ee ah shaqooyinka wasaaradda dhexe waxayna go'aaminaysaa aasaaska ay ku qoondaynayso shaqooyinkan ee heerarka tooska ah

c.Waaxaha Wasaaradaha waxay siinayaan Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose natiijooyinka dib-u eegsitooda shaqo iyo talooyin ku saabsan shaqooyinka iyo kala saarista shaqooyinka qaarkood ee lagu baahin karo maamulka degmooyinka.

d. Waaxda Wasaarad kasta waxay diyaarinaysaa Qorshe Tallaabo ee loogu talogalay baahinta maamulka shaqooyinkan

3. Aqoonsiga nusqaamaha sharciga iyo siyaasadda

a. Waaxda wasaarad kasta waxay dib-u eegis ku sameynaysaa nusqaamaha siyaasadaha iyo sharciga ee jira waxayna siinayaan Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose taloolin ku saabsan dib ugu noqoshada iyo wax ka badelidda sharciyada hadda iyo siyaasadaha lagu hirgelinayo baahinta adeegyada ee waaxyadooda

b. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose wuxuu xoojinayaa dhammaan nusqaamaha sharciga iyo siyaasadda ee ay aqoonsadeen waaxyada wasaaradaha iyo tallooyinkooda ee lagu darayo xirmada sharci dejinta ee sharciyada cusub iyo wax ka badelisyada ee loogu talogalay qaadashada Dowladda Sharci ku saabsan Baahinta maamulka

4. Diyaarinta Xeeladda Baahin Maamulka ee loogu talogalay Hirgelinta iyo Xulista gobolada iyo Degmooyinka Maraxadda Koowaad ee Tijaabada ah

a. Guddiga Isku-dhafka ah ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay diyaarinayaan Xeeladda Baahinta Maamulka ee faahfaahsan oo loogu talogalay Tijaabinta iyo Marxaladeynta Hirgelinta baahinta maamulka waaxda oo ku saleysan awoodaha la dhisay inta lagu guda jiray JPLG iyo in lagu sameeyo nuqulo shaabaha ku dayashada qaabka JPLG ee degmooyinka kale

b. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay xulanayaan Degmooyinka darajada A iyo B si loo Tijaabiyo Baahinta Maamulka Waaxda

5. Xulista Waaxaha iyo Adeegyada Maamulkooda La Baahinayo

a. Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose wuxuu xulanayaa laamaha mudan in awoodooda la baahiyo oo ku saleysan dib-u eegisyada shaqada ee ay qabatay Wasaaradaha waaxaha

b. Wasaaradaha Waaxaha ee loo xushay tijaabinta baahinta awoodaha shaqooyinkan waxay sameynayaan qorshe hirgelin ee loogu talogalay u wareejinta shaqooyinkan degmooyinka loo qoondeeyay.

6. Wasaaradaha Waaxaaha Waxay Hirgelinayaan Adeegyada Maamulkooda La Baahiyay

a. Waax wasaaradeed kasta waxay ka bilaabaysaa barnaamij tababar degmooyinka la xushay oo ku saabsan qabashada hawlaha la wareejiyay

b. Guddiga Isku Dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay ka bilaabayaan nidaam kormeerid iyo qiimeyn si loo qiimeeyo horumarka wareejinta hawlaha lagu baahiyay heerka degmo

7. U Wareejinta Lacagaha iyo Shaqaalaha Degmada

a. Wasaaradda Maaliyadda waxay u qoondaynaysaa ayadoo loo marayo qaaciddada lacag wareejinta lacagaha loo baahan yahay in lagu taageero hirgelinta shaqada ee heerka degmo

b. Shaqaalaha shaqada la wareejiyay waxaa lagu qorayaa shaqada dowladda ee degmada

8. Qiimeyta Tijaabinta Adeegga La Baahiyay

a. Guddiga Isku Dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay qiimeynayaan tijaabada shaqada bixinta adeegyada ee heerka Degmo waxayna go'aaminayaan isku hagaajinta iyo isbedelada lagu sameynayo mashruuca tijaabada

b. Guddiga Isku Dhafka ee Wasaaradaha waxay diyaarinayaan qorshe hirgelin oo is wata ee loogu talogalay ku baahinta shaqooyinka Degmooyinka A iyo B

9. Hirgelinta Dhammeystiran ee Baahinta Maamulka

a. Guddiga Isku Dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay hirgelinayaan baahinta maamulka oo dhammeystiran ee adeegyada la xushay ee degmooyinka ee leh awoodda lagu qabanayo adeeggan

b. Guddiga Isku Dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose waxay sameynayaan xeerar iyo habraacyo loogu talogalay sii socoshada shaqooyinka bixinta adeegyada ee wasaaradaha dhexe ee waaxahaasi iyo degmooyinka aanan dhici Karin in hirgelinta dhammeystiran laga sameeyo.

### 6.1 Gaadiidka iyo Waddooyinka

Qodobka 9.8 ee Sharciga L. 7 wuxuu tilmaamayaa in degmooyinka ay yeelanaysaan mas'uuliyadda dib-u cusboonaysiinta shabakadaha waddooyinka magaalooyinka degmada. Sidoo kale Qodobka 9.14 wuxuu dhigayaa in degmada ay yeelanayso mas'uuliyadda abaabulka iyo nidaaminta gaadiidka dadweynaha ee dadka isaga kala gooshayaan magaalooyinka.

Baahinta gaadiidka iyo waddooyinka waxaa laga sameynayaa gudaha qaab-dhismeed qorshayn heer qaran ah oo guud ee loogu talogalay gaadiidka.

Wasaaradda Hawlaha Guud waxay yeelanaysaa mas'uuliyadda sameynta siyaasad qorsheyn shabakada waddada istiraatiijiga ah iyo qeexidda qaybaha waddooyinka si loogu qoondeeyo mas'uuliyadaha dayactirka ee gudaha qaab-dhismeedka waddada istiraatiijiga ah. Maamulka Waddooyinka Waaweyn ee Puntland wuxuu leeyahay mas'uuliyadda bixinta dhismaha iyo dayactirka waddooyinka ka baxsan isbaarooyinka maamulka degmada.

Hadda la joogoa, dayac'tirka waddada waxaa lagu maalgeliyaa ayadoo la adeegsanaya lacag dheeraad ah oo la saaro canshuuraaha alaabaha laga soo dejiyo ee loogu talogalay gaadiidka la xiriira alaabada laga soo dejiyo dekadda Boosaaso. Tani waxay ku saleysan tahay in la dulsaaro dulsaar ah 15% caddadka lacageed ee canshuurta loo soo dhoofiyo, ma aha qiimaha alaabada la soo dejiyo. Tani waxaa loo adeegsadaa gawaarida, saliidda, ooliyada iyo waxyaabaha kale ee soo dega ee la xiriira hababka gaadiidka.

Dowlaha hoose ee Qaybta A waxay la wareegayaan mas'uuliyadda isku xirka waddooyinka degmada oo dhan ee gudaha xuduudahooda, marka laga reebo dhisidda waddooyinka waaweyn ee mara ama isku xira labo degmo ama in ka badan ama xuduudaha caalamiga ah.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay la wareegayaan mas'uuliyadda waddooyinka degaanka ee gudaha magaalooyinka ama degaamada horumarsan ee gudaha xuduudahooda. Waddo kasta oo laami ah waxay hoostagaysaa mas'uuliyadda Maamulka Waddooyinka Waaweyn ee Puntland ayadoo loo marayo awoodahooda baahsan ee bixinta adeegyada waxayna qiimeynayaan Qaybta degmada B ee kharashadyada dayactirka qaarkood.

Dowladaha hoose ee Qaybta C ma yeelanayaan mas'uuliyadda qayb ka mid ah isku xirka waddooyinka dhaca gudaha xuduudahooda. Maamulka Waddooyinka Waaweyn ee Puntland waxay mas'uul ka noqonayaan waddooyinkan, balse waxay dowladda hoose ee Qaybta C u qiimeynayaan dayactirka ku dhisan kharash-wadaagga.

Kabka lacageed oo ay Dowladda Hoose ka helayso Dowladda Dhexe

Degmooyinka Qaybta A waxay mas'uul ka noqonayaan dayactirka iyo dib u habaynta waddooyinka degaanadooda, marka laga reebo waddooyinka laamiga ah ee isku xira labo degmo ama in ka badan.

Degmooyinka Qaybta B waxay helayaan lacago kab ah oo ku saleysan mashruuca kala soocidda waddooyinka laamiga iyo kuwa aan laamiga ahayn iyo qoondayn ku saleysan isugeynta inta kiilomitir ee waddada ay dhacda degaanka degmada.

Degmooyinka Qaybta C ma yeelanayaan wax mas'uuliyadda waddada ama gaadiidka ee gudaha xuduudaha degmadooda ah.

## 6.2 Waxbarashada

Baahinta maamulka waaxda waxbarashada ee Puntland waxay wajahaysaa dhawr caqabadood. Waxaana ka mid ah kuwan soo socda:

- Dhibaatada siinta fursado waxbarasho carruurta bulshooyinka xoolo dhaqata ee reer guuraaga ah
- Farqiga fursadaha dugsi ee u dhaxeeya ardayda kala ah labka iyo dheddiga
- La'aanta dhaqaale ku filan oo laga hela dowladda dhexe si loo bixiyo tasiilaadyada dugsiga iyo in la isku haleeyo lacagaha laga helo beesha deeqbixiyaha.
- Kororka dugsiyada gaarka loo leeyanay in ay noqdaan aasaaska nidaamka waxbarasho oo aan lahayn xeerar iyo aqoonsi rasmi ah.
- Doorbididda in deeqbixiyeyaasha ay si toos ah u maalgeliyaan heerka degmo badelkii loo soo marsiin lahaa Waraaradda Waxbarashada si loo dhiso dugsi iyo la'aanta isu-duwid xulista goobta laga hirgalin lahaa tasiilaadyada dugsi.
- Kala duwanaanshaha baaxadda leh ee degmooyinka oo dhan marka la eego heerarka mushaarka macalamiinta.

Maalgelinta guud ee dugsiyada waxaa laga helaa seddax ilo waaweyn:

1. Lacagaha dugsiga ee waalidiintu ay bixiyaan meesha taasi ay ka suurowdo

2. Beesha Caalamka ee bixisa maalgelino loogu talogalay dhisidda dugsi iyo mushaaraadka heerka sare

3. Dowladda dhexe waxay kab lacageed u soo marsiisaa Wasaaradda Waxbarashada ee loogu talogalay mushaaraadka macalimiinta oo ku saleysan qiimo go'an oo ah $60 bil kasta 1000 macalimiin.

Wasaaradda Waxbarashada waxay leedahay qorshe istiraatiijiyadeed oo loogu talogalay bixinta adeegyada waxbarashada, balse ay tahay wali in ay diyaariso qoraal sheegaya sida loogu soo wareejinayo maamulka iyo mas'uuliyada qaar ka mid ah heerarka dowladda degmada ayado la eegaayo awoodooda la qimeeyay.

Heerka degmo wuxuu leeyahay mas'uuliyadda majaalka waxbarasho oo ku saleysan Qodobka 9.5 ee Sharciga 7 oo la xiriira dhisidda dugsiyada hoose, dugsiyada quraanka, dugsiyada barbaarinta carruurta, dugsiyada horumarinta qoyska iyo maamulkooda. Kuma cadda luuqaddan ilaa heerka gollaha degmada iyo maamulka ay u leeyihiin mas'uuliyadaha adeegyada waxbarashada. Tani waxay u baahanaysaa in lagu kala cadeeyo sharci dheeraad ah. Wakhti xaadirkan, maamulada degmada ma qabtaan wax shaqooyin maamul ah oo la xiriira dugsiyada. Waxaa kaliya jira isku xir u dhaxeeya xafiiska Duqa Degmada iyo Sarkaalka Waxbarashada Degmada ee ay soo magacaawday Wasaaradda Waxbarashada.

Baahinta maamulka waaxda waxbarashada waxay ku saleysnaanaysaa qaabka maamulka dhexe ee loo sameeyay doorka wasaaradaha dhexe iyo dowladaha hoose ee lagu sharxay qaybtii hore.

Wasaaradda Waxbarashada waxay yeelanaysaa shaqooyinka ugu muhiimsan ee siyaasad dejinta iyo qorsheynta istiraatiijiyadeed, sameynta kababka lacageed ee isle'ekayn oo lagu darayo miisaaniyadaha degaanka, iyo shaqada kormeeridda nidaaminta iyo u hoggaansanaanta. Shaqooyinkan waxaa laga sii-wadayaa degaamada lagu taageero qorsheynta waxbarashada degaanka iyo xeerarka, qiimeynta baahiyada, qiimeynta iyo korjoogtaynta bixinta adeegga waxbarashada dowladda hoose, heerarka loogu talogalay imtixaanadada iyo manhajka, iyo xallinta cabashooyinka hab-dhismeedka dowladda hoose gudaheeda ah.

Dowladaha hoose waxay yeelanayaa mas'uuliyadahan soo socda sida qoondayntadooda shaqo ee gudaha macnaha guud ee hab-dhismeedka dowladda hoose ahaan iyo guddiyada la macaamilaya adeegyada waxbarashada.

1. Go'aanada dakhliga iyo kharashyada degaanka ee lagu taageerayo bixinta adeegyada waxbarashada iyo maalgelinada raasumaalka oo ku saleysan siyaasadda Wasaaradda Waxbarashada iyo shuruudaha qorsheynta
2. Horumarinta habab talo oo ku dhisan beesha ee loogu talogalay qorsheynta waxbarashada
3. Ansixinta qorsheyaasha miisaaniyadaha iyo waxbarashada ee gollaha dowladda hoose
4. Qorsheynta tasiilaadyada dugsiga iyo dhisidda tasiilaadyada oo ku saleysan heerarka Wasaaradda Waxbarashada
5. Taageerada ururada bulshada ku dhisan ee danaynaya adeegyada waxbarashada.

Baahinta maamulka adeegyada waxbarashada waxaa lagu saleynayaa hab marxalado leh oo lagu qeexayo qiimeynta awoodda dowladaha hoose ee qayb kala saarid kasta. Baahinta maamulka waxbarashada ka hor dugsiga hoose, dugsiga hoose waxaa lagu baahinayaa dowladaha hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah oo lagu saleynayo qiimeynta awoodahooda sida ay go'aamisay Wasaaradda Waxbarashada. Habkan baahinta waxaa lagu tijaabinayaa dhawr dowlada hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah kadibna waxaa loo qiimeynayaa in si buuxda loogu dabaqo Qaybaha kale. Marka tani loogu guulgaaro dowladaha hoose ee Qaybta A waxay markaasi kadib la wareegayaan mas'uuliyadda waxbarashada dugsiga sare ee shaqada mas'uuliyadooda.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay kaliya ka mas'uul noqonayaan waxbarashda ka hor dugsiga hoose iyo dugsiga hoose. Dowladaha hoose ee Qaybta B lama siinayo mas'uulayadda Waxbarashada Dugsiga Sare.

Dowladaha hoose ee Qaybta C waxay kaliya ka mas'uul ka noqonayaan *waxbarashda ka hor dugsiga hoose* oo ku saleysan qiimeynta awoodda degaanka ay ku qabanayso hawshan.

Hirgalinta qodobada kor ku xusan waxay ku xirantahay marka dowladaha hoose dakhliga canshuuraha ka soo xarooda ay ku caddahay qoondaynta miisaaniyadda waxbarasho taasoo noqonaysa mushaar, adeeg, dayactirka dugsiyada iwm. Qoondayntan waa inay ku cadahay miisanyadda dowlada hoose inta aan la gaarin ka qayb galka dowladda dhexe iyo hay'adaha caalamiga ah.

Sidoo kale waa in la is-waafajiyo xeerka baahinta maamulka iyo sharuucda u Dagan Dowlada Puntland sida Dastuurka iyo Sharuucda Waxbarashada.

Wasaaradaha dhexe ayadoo loo marayo adeeg bixintooda baahsan waxay mas'uul ka noqonayaan waxbarashada sare iyo tacliinta sare, waxbarashada xirfadeed iyo mida farsamo iyo tababarka, iyo waxbarashada dadka waaweyn iyo midda aan rasmiga ahayn. Baahiyada waxbarashada gaarka ah waxay sidoo kale noqonaysaa mas'uuliyadda hababka baahsan ee bixinta adeegyada ee Wasaaradda Waxbarashada. Waxaa sidoo kale jiri doonta bixin gaar ah ee tasiilaadka waxbarashada guurguurta ee loo marayo Wasaaradda Waxbarashada ee loogu talogalay baahiyadaada waxbarasho ee dadweynaha reer guuraaga ah.

Ikhtiyaarada loogu talogalay Maamulka iyo Maareynta Dugsiyada ee Degmooyinka:

Waxaa jira labo ikhtiyaaro oo baahsan ee loo heli karo baahinta maamulka bixinta adeegyada waxbarashada ee heerka degmo ee loogu talogalay degmooyinka Qaybta A iyo Qaybta B.

Ikhtiyaarka 1: Gollaha Degmada waxay leeyihiin mas'uuliyadda buuxda ee shaqeynta dugsiyada degmada gudaheeda ah waxayna qabtaan shaqooyinkan soo socda:

- shaqooyinka maamulka iyo qorsheynta,
- shaqaaleynta iyo shaqo ka cayrinta dhammaam maamulka dugsiga, shaqaalaha macalamiinta ah iyo kuwa aan macalimiinta ahayn, shaqaalaha dugsiga waa shaqaale u shaqeeya maamulka degmada.
- maalgelinta iyo miisaaniyada dugsiga waxay ku jirtaa miisaaniyadda guud ee degmada maalgelintana waxaa bixiya maamulka dakhliga iyo canshuur qaadista
- waxay u gudbinayaan warabixinta Wasaaradda Waxbarashada ee u hoggaansanaanta dhammaan shuruudaha manhajka iyo shahaadada
-

Ikhtiyaarka 2: Dugsiyada waxaa loo maamulaa sida qaybo hoose oo madaxbannaan oo dibadda ka ah xukunka maamulka degmada waxayna qabtaan shaqooyinkan soo socda:

- Shaqooyinka qorsheynta iyo maamulka waxaa qabta guddiga dugsiga ee degaanka laga soo doorto
- shaqaaleynta iyo shaqo ka cayrinta dhammaam maamulka dugsiga, shaqaalaha macalamiinta ah iyo kuwa aan macalimiinta ahayn, shaqaalaha dugsiga waxaa lagu shaqaaleysiiyaa gudaha sharciyada iyo habraacayada shuruudaha adeegga shacabka
- maalgelinta iyo miisaaniyada dugsiga waxay gooni ka yihiin miisaaniyadda degmada waxaana kaliga dib u eegaya Wasaaradda Waxbarashada ee u hoggaansanaanta heerarka la aasaasay iyo kharashyada mushaarka
- maalgelinta dugsiyada waxaa lagu bixiyaa cashuurta degaanka ee la saarayo guryaha waxaana qaada xafiiska dakhliga hoose ee degmada waxaana lagu soo xawilaa koontooyinka dugsiga
- waxay u gudbinayaan warabixinta Wasaaradda Waxbarashada ee u hoggaansanaanta dhammaan shuruudaha manhajka iyo shahaadada

Ayadoo ikhtiyaarka 2 oo yahay nidaam aad u baahsan ee bixinta adeegyada ee heerka dowladda hoose, iktiyaarkan wuxuu u baahan yahay awood badan oo aanan laga helaynin degmooyinka hadda la joogo. Looguma talinayo baahinta adeegyada waxbarashade ee heerka degmo.

Kabka maaliyadeed eeDowladda Hoose ugaga yimaada Dowladda Dhexe

Dowladda dhexe waxay bixinaysaa kabka maaliyadeed ee dowladaha hoose ee Qaybta A iyo B ee ku saabsan qaaciddada qoondaynta deeqda arday kasta ee leh tixgelinta loogu talogalay ka soo bixidda heerka saamiga macalinka-ardayga iyo waxyaabo dheeraad ah ee loogu talogalay shaqaalaha aan macalimiinta ahayn iyo kharashyada dayactirka. Sarkaalka Waxbarashada Degmada waxaa loo soo wareejinayaa shaqaalaha Qayba A iyo B ee dowladaha hoose waxaana mushaar laga siiyanaa lacagaha dowladda hoose.

Dowladaha hoose ee Qaybta C waxaa la siinayaa kab maaliyadeed oo ku saleysan lacag-celinta kharash ee loogu talogalay heerarka mushaarka ugu yar ee loo dejiyay macalimiinta iyo lacag-celinta kharashyada hawlgalada dhismaha dugsiga. Saraakiisha Waxbarashada Degmada waxay sii ahaanayaan sida shaqaalaha Wasaaradda Waxbarashada waxaana lagu maalgelinayaa miisaaniyadda Wasaaradda Waxbarashada.

Degmooyinka u baahan tasiilaadyada waxbarista guurguurta waxaa la siinayaa maalgelino dheeraad ah oo lagu taageeraya macalimiinta iyo tasiilaadyada loogu baahan yahay ujeeddadan.

Dowladda Dhexe waxay bixinaysaa kab lacag cadaan ah oo la siinayo qoysaska saboolka ah iyo kuwa reer guuraaga ah oo ku saleysan soo xaadiridda sii-socota ee carruurta barnaamijka dugsiga.

### 6.3 Caafimaadka

Marka loo imaado bixinta adeegyada waxbarashada, mas'uuliyadda Gollayaasha Degmada ee la xiriira daryeelka caafimaad waxaa loogu xusay Qodobka 9 ee Sharciga 7 sida soo socota:

> 9.1 Daryeelka caafimaad ee guud iyo gaar ahaan fayodhawrka magaalooyinka iyo ka hortaga cudurada faafa.
>
> 9.6 Dhisidda Xarumaha Caafimaadka Dhallaanka iyo Hooyada (xarumaha MCH).

Sharciyayn dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo kala cadeeyo doorka maamulada degmada ee bixinta adeegyada caafimaadka, gaar ahaan kan khuseeya xaalka shaqada ee shaqaalaha daryeelka caafimaad, iyo maalgelinta adeegyadan ee heerka degmo.

Baahinta maamulka laanta caafimaadka waxay ku saleysnaanaysaa qaabka maamulka dhexe ee loo sameeyay doorka wasaaradaha dhexe iyo dowladaha hoose ee lagu sharxay xagga sare.

Dowladaha hoose waxay yeelanayaa mas'uuliyadahan soo socda sida qoondayntadooda shaqo ee gudaha macnaha guud ee hab-dhismeedka dowladda hoose ahaan iyo guddiyada la macaamilaya adeegayda caafimaad.
1. Go'aanada ku saabsan dakhliga degaanka iyo kharashyada lagu taageerayo in lagu bixiyo adeegyada daryeelka caafimaad ee rugaha caafimaad ee la cayimay iyo daryeelka hooyada.
2. Ilaalinta xogta iyo tirakoobyada daryeelka caafimaad ee degaanka ee ku saabsan cudurada iyo jirooyinka ee loogu talogalay uga warbixinta heerka dhexe
3. Ansixinta qorsheyaasha miisaaniyadaha iyo daryeelka caafimaad ee gollaha dowladda hoose
4. Qorsheynta tasiilaadyada daryeelka caafimaad iyo dhisidda tasiilaadyada oo ku saleysan heerarka Wasaaradda Caafimaadka
5. Taageerada ururada bulshada ku dhisan ee danaynaya bixinta adeegyada daryeelka caafimaad.

Baahinta adeegyada caafimaadka waxaa lagu saleynayaa hab marxalado leh oo lagu qeexayo qiimeynta awoodda dowladaha hoose ee qayb kala saarid kasta. Baahinta qaybaha caafimaadka aasaasiga ah iyo xarumo caafimaad waxaa lagu baahinayaa dowladaha hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah oo lagu saleynayo qiimeynta awoodahooda sida ay go'aamisay Wasaaradda Caafimaadka. Habkan baahinta waxaa lagu tijaabinayaa dhawr dowlada hoose ee Qaybta A marxaladda bilowga ah kadibna waxaa loo qiimeynayaa in si buuxda loogu dabaqo Qaybaha kale. Marka tani loogu guulgaaro dowladaha hoose ee Qaybta A waxay markaasi kadib la wareegayaan mas'uuliyadda qaybaha daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah iyo xarumaha caafimaadka ee shaqada mas'uuliyadooda.

Dowladaha hoose ee Qaybta B waxay kaliya mas'uul ka noqonayaan qaybaha caafimaadka aasaasiga ah. Dowladaha hoose ee Qaybta B lama siinayo mas'uulayadda *Xarumaha Caafimaad.*

Dowlahada hoose ee Qaybta C kama mas'uul noqonayanaan bixinta adeegyada caafimaadka.

Mas'uuliyadaha hoose ayaa lagu soo koobay ayagoo laga eegaya tasiilaadka caafimaadka iyo qaybta degmada

| | Degmada A | Degmada B | Degmada C | Degmada D | Wasaaradda Caafimaadka |
|---|---|---|---|---|---|
| Rugta Caafimaadka Aasaasiga ah | X | X | | | X |
| Caafimaadka Hooyada iyo | X | | | | X |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Dhallaanka | | | | | |
| Xarumaha Caafimaadka ee La Isku Diro | X | | | | X |
| Isbitaalada Qaran/Gobolka | | | | | X |

Wasaaradda Caafimaadka ayadoo loo soo marayo awoodeeda bixinta adeegyada ee la kalageeyay waxay mas'uul ka noqonaysaa xarumaha caafimaadka ee la isku soo diro iyo isbitaalada Degmooyinka B iyo C. Wasaaradda Caafimaadka waxay sidoo kale mas'uul ka noqonaysaa soo iibinta daawooyinka iyo waxyaabaha doowooyinka la xiriira ee loogu talogalay tasiilaadyada daryeelka caafimaad ee dowlada hoose iyo bixinta gaarsiinta tasiilaadyadan. Tani waxaa lagu sameynayaa kharash la wadaagayo iyo lacag-bixin la wadaagayo oo lala yeelanayo qaybaha caafimaadka degaanka.

Kabka maaliyadeed eeDowladda Hoose ugaga yimaada Dowladda Dhexe

Kabka maaliyadeed ee dowladda hoose ka helayso dowladda dhexe waxaa lagu saleynayaa cunsurada dadweynaha, da'da iyo jinsiga ee qaacidada. Tirada dadweynaha ee degaamada magaalooyinka iyo miyiga, tirada dadka, qaybaha da'da ee 1-5 sano iyo 50 sannadood ama ka weyn, sidoo kale haweenka u dhaxeeya 16-40 ayaa lagu tixgelinayaa sameynta qaaciddada qoondaynta. Cunsurada dheeraadka ah waxay noqonayaa tirada xaaladaha la soo dheegay ee oof-wareenka, shubanka, nafaqo-xumada, iyo duumada ee ka jira degaamada miyiga.

### 6.4 Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda (WASH) (oo ka mid ah khashinka adkaha ah)

Aasaaska sharci ee ay dowladaha hoose kula wareegayaan mas'uuliyad kasta ee meelaha sida Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda waxaa lagu xaddiday gudaha qodobada Qodabka 9.1 ee Sharciga L. 7. Wuxuu dhigayaa ina Gollaha Degaanka uu yeelanayo shaqada soo socota ee la xiriirta majaaladkan:

9.1 Daryeelka caafimaad ee guud iyo gaar ahaan fayodhawrka ee magaalooyinka iyo ka hortaga cudurada faafa.

9.16 Gollaha Degaanka wuxuu sidoo kale mas'uul ka yahay taageeridda maamulka xoolaha, beerashada, amniga, biyaha, korontada, isgaarsiinta iyo ilaalinta degaanka.

Tixraaca kaliya ee qaybta waaxdan waa fayodhawrka iyo biyaha ee magaalooyinka gudahooda. Sidaas awgeed, isbedalo badan ayaa loo baahanayaa in la sameeyo si loo ballaariyo qaab-dhismeedka sharci iyo aasaaska gollayaasha degaanka in ay yeeshaan mas'uuliyadda bixinta adeegyadan.

Waxaa hore u jira hawlgalo nidaamyo biyo gaar loo leeyahay iyo qaadista qashinka adkaha ah ee degaamada magaalada. Xaaladaha qaarkood, shirkadaha adeegga bixiya waxaa qayb ahaan iska leh dowladda degmada. Maamulka degmada wuxuu sidoo kale ka sameeyaa qaadista qashinka adkaha baro ururin kadibna wuxuu geeyaa goobaha qashinka lagu qubo. Waxaa jira suurtagalnimada in si buuxda looga dhigo kuwo gaar loo leeyahay qaadista qashin adkaha, ayadoo maamulka degmada uu ka hawlgalaya qashan qubka uuna lacag kaga qaadayo ku soo qubidda meesha ugu dambeysa.

Baahinta maamulka adeegyada waaxaha biyaha, fayodhawrka iyo nadaafadda waxay ku koobnaan doontaa tixgelino adag ee u soo wareejinta shaqooyinkan dowlaha hoose. Mabda'a aasaasiga ah ee halkan lagu adeegsanayo waa in adeegyada ay aad ugu khasban yihiin in lacagahooda lagu soo dalaco adeegsadaha tanina waa in loo adeegsado dhammaan dhinacyada bixinta adeegyadan, marka laga reebo maalgelinada loogu talogalay maalgelinta raasumaalka iyo dhismaha ee loo baahanayo. Maalgelinadan raasumaalka waa in ay noqdaan kharashadyo la wadaago oo u dhaxeeya heerarka dhexe iyo hoose oo ku saleysan hab deeq shuruud ku xiran iyo qiimeynyada ku saleysan baahiyada.

Ayadoo bixinta ururada dadweynaha ay ku badan yihiin waaxdan, waa in ay jirto istiraatiijiyad la sameeyay oona la hirgaliyay si loo wareejiyo bixinta adeegyadan waana in qandaraas lagu bixiyaa oo ay noqdaan kuwa ay wadaagaan dadka iyo dowladda, gaar ahaan dowladaha hoose ee waaweyn ama aadka u awooda.

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka A: Degmooyinka A waxay mas'uul ka noqonayaan qorsheynta, qiimeynta kharashka iyo hirgelinta dhammaan baraha biyaha dadweynaha (degaamada dadweynaha, dugsiyada, dhismooyinka dadweynaha, bukaan eegtooyinka caafimaadka iwm.), biyo gelinta, tasiilaadyada fayodhawrka dadweynaha, xarumaha caafimaad, dhismayaasha dadweynaha iyo goobaha sidoo kale bulaacadaha.

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka B: Baro biyoodka dadweynaha ee ku yaala dhismeyaasha (iyo dibadaha dugsiyada iyo rugaha caafimaadka) waxaa qorsheynaya, qiimeynaya kadibna hirgelinaya gollaha degmada.

Degmooyinka C waxay u yeelanayaan mas'uuliyad xaddidan biyaha, fayodhawrka iyo nadaafadda oo ku saleysan dhisidda guddiyo beesha degaanka ah si ay u maareeyaan hawlahan ee gudaha degaamadooda. Halkaasi oo guddiyaasha beesha loo abaabulo si ay u maareeyaan adeegyadan, maamulka heerka degmo wuxuu ku taageerayaa adeegyada xoogaa lacago ah iyo gargaar farsamo ee laga heli karo xafiisyada baahinta maamulka ee Wasaaradaha Dhexe ee ka mas'uulka ah hawlahan.

Dhismooyinka biyaha iyo fayowdharka waxaa lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qaanuunada wax soo-iibsiga ee Puntland sida hadda la joogo xaaladu tahay.

Wasaaradda heerka dhexe waxay mas'uul ka noqonaysaa xaqiijinta tayada dhismaha, degmadana waxay u soo gudbinaysaa dhammaan qorsheyaasha wasaaradda la xiriirta si farsamo ahaan loo ansixiyo kahor dhisidda.

Dhammaan shaqooyinka kale waxaa laga hirgelinayaa heerka dowladda dhexe.

Dowladda Puntland waxay ka shaqeynayanaa in ay: (1) sameyso qorshe faahfaahsan ee loogu talogalay hanaanka xukun wadaajinta ee waaxdan ayadoo la tixgelinayo awoodaha loo baahan yahay, khadadka ka warbixinta iyo la-xisaabtanka, xaqiijinta tayada, kababka maaliyadeed iyo geeddi-socodyada iibka iyo hanti dhawrka, iyo (2) dib ugu noqoshada sharciyada iyo xeerarka si loo gaaro ujeeddadan 2020.

## 6.5 Khayraadka Dabiiciga ah

Baahinta maamulka khayraadka dabiiciga ah waxay u baahan tahay horumar dheeraad ah ayadoo ku lug leh dhawr wasaaradood ee go'aaminta dhinacyada khayraadka, dhulka, biyaha, deegaanka, iyo kalluumysiga, iyo baahiyada lagu maareynayo heerka degmo, loo nidaamiya si dhexe ama la isugu duwo si gobol ahaan. Wasaaradaha soo socda waxay ku lug leeyihiin dhammaan qaybaha waaxyadan:

- Wasaaradda Deegaanka, Daaqa, Kaymaha, Duurjoogta iyo Dalxiiska (MoERFWT)
- Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka (MoAI)
- Wasaaradda Xannaanada Xoolaha (MoLAH)
- Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda (MoF)
- Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MoI)
- Wasaaradda Howlaha Guud (MoPW)
- Maamulka Dowladda Puntland ee Biyaha, Quwadda iyo Khayraadka Dabiiciga (PSAWN)

Waxaa jira isku labmid waajibaadyada ama shaqooyinka ah oo badan sida lagu muujiyay Warbixintii Hay'adda Shaqada ee Adduunka (ILO) ee bishii Maarso 2013 taasi oo sheegtay: "ayadoo PSAWEN ay maamusho dhammaan arrimaha la xiriira saadka-biyaha, biyo ururinta waxay hoos tagtaa MoEWT, MoAI, iyo MoI. Si kastaba, MoEWT, MoAI, iyo MoI dhexdooda waxaa ka jiri kara shaqooyinka isku labma oo

khuseeya meesha dhismaha biyo ururinta laga dhisayo, xeerka biyo-adeegsadeyaasha, qoondaynta iyo xuquuqaha biyaha.” [15]

Ayadoo la raacayo falanqaynta qoondaynta shaqo ee gudaha hay’adaha wasaaradeed ee loo igmaday khayraadka dabiiciga ah, geeddi-socod lagu taageerayo bixinta adeegyada NRM ee heerka degmo ayaa la soo jeediyay. Qabanqaabada hay’adeed ee jira gudahooda, habka ugu fiican ee loo xalinaya isku lamidda bixinta adeegyada NRM waa soo bandhiga koox shaqo isku-dhaf wasaaradeed ah, Kooxda Shaqada Khayraadka Dabiiciga ah (NRWG).

NRWG waxay ka soo taageerayaan baahinta wasaaradaha khadka dhexe ilaa dowladaha hoose, ayagoo u soo maraya isku dubbaridid goboleed. Kooxda Shaqada ee la soo jeediyay waxay tixgelinaysaa shaqooyinka lagama maarmaanka u ah qorsheynta dhaqaale iyo dhawrista deegaanka ayadoo loo marayo qaabeynta qorshooyinka NRM oo heer degmo ah oo lala yeelanayo maamulada degaanka. Qaybaha khayraadka khuseysa (oo loola jeedo dhulka, biyaha, kaymaha iyo dhulka daaqa, iyo deegaanka badda) waxay markaasi go’aaminayaan aasaaska wasaaradeed iyo bixinta adeegyada farsamo.  NRWG waxay sidaas darted xaqiijinaysaa in bixinta adeegyada NRM ay noqdaan kuwa waafaqsan hawsha wasaarad kasta ay khuseysa, xaddadka dhawrista deegaanka ee khayraadyada dabiiciga ah iyo faa’iidooyinka dhaqaale ee laga helo ka faa'iideysiga nidaamsan ee degaanka dabiiciga ee Puntland.

Baahinta maamulka khayraadka dabiiciga iyo mas’uuliyadaha horumarinta waa la xaddidayaa marka la eego xuquuqaha la haanshaha. Si kastaba, dowladaha hoose waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay si wanaagsan u nidaamiyaan isticmaalka khayraadka dabiiciga ah ayadoo loo marayo rasiidka iyo dib u maalgelinta dakhliga canshuurta ee laga helo Maamulka Khayraadka Dabiiciga ah.  Dowladaha hoose waxay xaq u yeelanayaan in ay ku soo rogaan ujro saameyn leh iyo maalgelinta hagaajinta dhismaha oo ku saleysan saameynta tooska ah ee ka faa’iideysiga khayraadka dabiiciga ah ee degaanka.  Kuwani waxaa lagu darayaa qandaraasyada u dhaxeeya dowladda dhexe iyo horumarinta khayraadka dabiiciga ah. Khayraadyada dabiiciga ah waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin hantida guud ee dhammaan dadka, ayadoon la eegayn meesha ay ku yaalaan iyo qiimaha ay leeyihiin khayaraadyada dabiiciga ah, waxaana looga faa'iideysanayaa sida faa'iidada dhammaan muwaadiniinta Puntland.

Khayraadka macdanta ah iyo kuwa ciidda ka hooseeya, la haanshaha khayraadyada dabiiciga ah waxaa loo haynayaa heerka dowladda dhexe waxaana kaliya looga faa’iideysan karaa ayadoo loo soo maraya oggolaansho iyo wareejinyada la haansho kale ee loogu soo wada xaajoodo heerka dowladda dhexe.

Geeddi-socodka baahinta maamulka ee waaxda Maamulka Khayraadka Dabiiciga ah waxaa la isugu dubbaridayaa heer gobol ayadoo la hoostagaya mas’uuliyadda Guddoomiyaha gobolka ayadoo loo marayo Gollayaasha Horumarinta Gobolka (RDCs). Doorka dowladda hoose waxaa la soo dejinayaa ayadoo loo marayo Waaxda Adeegyada Bulshada, waxaana maareynaya Duqa Degmada/ Guddoomiyaha. Doorka dhexe iyo awood kala-geynta deegaanka iyo wasaaradaha khadka khayraadka dabiiciga ah waxay noqonaysaa in la fududeeyo bixinta taageerada farsamo ee ay u baahan yihin dowladaha hoose.

Baahinta maamulka bixinta adeegyada NRM waa arrin isku daba xigta. Waxay ka helaysaa xoogsaarid gudaha DDF gaar ah iyo mudnaanada qaranka ee loogu talogalay horumarinta bulshada  Sababtan awgeed, waxaa lagu talinayaa in baahinta shaqooyinka NRM la qorsheeyo 1-3 sannadood ee ina xiga.

# *7 Hirgelinta iyo Ilaalinta Siyaasadda*

Siyaasadda waxaa la filayaa in si tartiib-tartiib ah loo hirgeliyo, taasi oo higsanayan hirgelin buuxda marka la gaaro 2020 ayadoon wax loo dhimin tayada geeddi-socodka dib-u habaynta. Hawlaha ugu muhiimsan iyo

[15] Hay’adda Shaqada Adduunka, Daraasada Waaxda Maamulka Khayraadka Dabiiciga ah, Maarso 2013.

wakhtiyada kala dambaynta ee hay'adaha kala duwan ee ka mas'uulka ah hirgelinta siyaasadda waxaa lagu muujiyay qorshe hawleedka ku lifaaqan ee loogu talogalay baahinta maamulka.

Korjoogtaynta guud ee hirgelinta siyaasadda waxay u yalaan Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay u shaqeynaysaa sida xoghayn ahaan ee Guddiga waxayna la wareegaysaa ilaalinta maalin kasta ee hirgelinta.

Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxay qabanayaan kullamo sannad barkii ah waxayna ka hadli doonaan hirgelinta siyaasadda. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay siinaysaa warbixin ku saabsan horumarka saddexdii biloodba mar Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha. Wasaaradaha waaxaha waxay uga warbixinayaan horumarka waaxdooda gudaheeda ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha ah.

Wasaarad dhexe kasta ee ku lug leh taageeridda baahinta adeegyada waxay diyaarinaysaa Qorshe Tallaabo Baahin si ay ugu adeegto qalab hirgelin iyo ilaalinta hirgelinta oo ku saleysan marxaladaha baahinta shaqooyinka waaxdooda gudaheeda. Qorsheyaashan Tallaabada Baahinta Maamulka waxaa loogu cusboonaysiinayaa si lix biloodle ah gudaha kal fadhiga dib u eegista ee Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxaana loogu wada-hadlayaa kadibna lagu ansixinayaa isbedelada siyaasadda iyo hababka hirgelinta inta lagu guda jiro kullumadan.

## *Lifaaqa A: Qiimeynta Baahinta Maamulka, Maamulka Dowladaha Hoose ee Baahsan iyo Waaxda Dadweynaha ee Degaanka Puntland*

### Awoodsiinta Siyaasadeed iyo Baahinta Maamulka

| | Habka Siyaasadda | Habka Sharciga | Hay'adaha Dolwadda Dhexe | Maareynta Dowladda Hoose iyo Maamulka | Ururada Bulshada iyo Shirkadaha Gaarka Loo Leeyahay |
|---|---|---|---|---|---|
| **Hab dhismeedka Awoodda Siyaasadeed ee Degaanka** | Dowladda Puntland waxay doonaysaa nidaam maamul baahsan ayadoo loo marayo siyaasadda guud ee maamul baahinta walina lama sameynin/qaadan. | Qodobada dastuurka ee la xiriira dowladda hoose waxaa lagu dejiyay qodobada 120 iyo 123-127. Sharciga 7 Is-maamulka Degmada sidoo kale wuxuu qeexayaa hab dhismeedyada baahsan iyo awoodooda ee maamul hoosaadka iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah | Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladda Hoose iyo Horumarinta Miyiga waa hay'adda dowladeed ee hogaanka u haysa hindiseyaasha baahinta iyo dib u haynyada ee heedka dhexe. Waxay sidoo kale leedahay awoodaha kontoroolka maamulada degmada iyo gobolka. | Dowladaha hoose ee Puntland waxay sida caadiga ah ka kooban yihiin hay'ad maamul "gollaha degmada" oo loo igmaday qorshaynta iyo kormeeridda Fulinta iyo laanta fulinta "maamulka degmada" oo loo igmaday fulinta qorsheyaasha degmada. | Ka qaybqaadashada dadweynaha dowladda hoose waa mid ku yara daciif ah Puntland. Dadaalo ayaa socda oo loogu qaybgelinaya bulshooyinka sidoo kale in la soo bandhigo hab la wadaago oo dadka iyo dowladda u dhaxeeya oo gacan ka geysanaya horumarinta dhaqaalaha degaanka. |
| **Hab dhismeedka iyo tayada nidaamyada doorashada degaanka** | Hadda la joogo, gollayaasha degaanka waxaa la dhisay ayadoo oo qaab qabiileed loogu qaybsaday kursiyada gollaha. Inkastoo ay jireen dadaalo la sameeyay so loo qabto doorashooyinka dimuqraadiga ah ee ugu horeeya ee gollaha degaanka Puntland 15[ka] Luulyo, waa lagu guuldareystay walina Puntland waxay ku sii socotaa nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan. | Dastuurka Puntland iyo Sharciga Doorashada waxay si cad u muujinayaan geedi-socodyada doorashada, farsmada iyo habraacyada kale. | | Muddada xafiiska ee gollayaasha degaanka waa 5 sano. Puntland waxay ka kooban tahay 42 degmo oo wakhti xaadirkan leh 16 gollaayaal degaan oo shaqeynaya. | Boosas siyaasadeed ayaa loo furay bulshada ra'yidka ah inta lagu guda jiray geedi-socodka dimuqraadiyadaynta. Xoriyadda warbaahinta ma gaarsiisana heerarka caalamiga ah dadweynaha badankoodana waxay ka haystaan helid yar ama aragtiyo gaaban nidaamka doorashada. |
| **Qaabka nidaamka xisbiyada siyaasadeed** | Nidaam siyaasadeed xisbiyo badan oo la socon kara nidaamka baarlamaanka ee lagu xulanayo madaxda dowladda | Sharciyada Ururada Siyaasadda Puntland– waxaa ansixiyay baarlamaanka | | Ururada siyaasadeed waxay u tartamayaan doorashada gollaha degaanka. Seddax urur ee hel codadka inta ugu badan waxaa loogu dhawaaqayaa in ay yihiin xisbiyada siyaasadeed ee rasmiga ah. | Dadweynaha waxay ka haystaan fahan yar si wax ku ool ahna uguma qaybqaataan waxqabadyada/wajiyada siyaasadeed. |
| **Ka qaybqaadashada siyaasadda degaanka iyo la-xisaabtanka** | Ma jiraan siyaasado cad oo la hubo ama lagu kalsoonaan karo eek or u qaadaya ka qaybqaadashada siyaasadeed iyo la-xisaabtanka la wadaago oo ka jira heerarka degaanka iyo kuwa dhexe. | Dastuurka Puntland wuxuu raacayaa qiimeyaasha ka qaybqaadashada siyaasadeed iyo la-xisaabtanka iyo waadaxnimda xaga sare/xaga hoose loo dhaadacayo. Waxay sido kale xaqiijinaysaa baaritaanada iyo isku dhiilitirnaanka ka jirta hay'adaha dowladda. | Horusocodka geedi socodka dimuqraadiyadaynta, sameyanta xisbiyo siyaasadeed iyo abuuridda minbaro siyaasadeed waxay gacan ka geysanaysaa ka qaybgalka siyaasadeed ee dhammaan saamiyelayaasha waxayna hubsanaysaa ka qaybgalka hanaanka. Marxalad la wada filayo. | Horusocodka geedi socodka dimuqraadiyadaynta, sameyanta xisbiyo siyaasadeed iyo abuuridda minbaro siyaasadeed waxay gacan ka geysanaysaa ka qaybgalka siyaasadeed ee dhammaan saamiyelayaasha waxayna hubsanaysaa ka qaybgalka hanaanka. | |

### Awood-siinta Maaliyadeed iyo Baahinta Maamulka

| | Qaab-dhismeedka Siyaasadda | Qorshaha Sharci | Hay'adaha Dowladda Dhexe | Maareynta Dowladda Hoose Iyo Maamulka | Ururada Bulshada iyo Shirkadaha Gaarka Loo Leeyahay |
|---|---|---|---|---|---|
| **Qoondaynta Kharashka** | Ayadoo la tixraacayo Sharciga L. 7 qoondaynta kharashka dowladda hoose waa in ay;<br>• Dowladda hoose waa in ay ku bixiso ayna ugu qoondayso miisaaniyada khadka miisaaniyadda<br>• Hirgelinta miisaaniyadda mashaariicda horumarinta<br>• Kharashyada laga helo deeqbixiyeyaasha iyo tabbarucaadda bulshada degaanka waa in lagu bixiyo khadka mudnaanada degmada ee lagu muujiyay miisaaniyadda. | | Marka la eego Dastuurka Puntland waxaa lagu cadeeyyay in dowladda dhexe ee Puntland ay mas'uul ka tahay:<br>-Waxbarashada (Dugsiga sare iyo Tacliinta Sare)<br>- Caafimaadka (Isbitaalka iyo MCHyada)<br>- Dhismaha (wixii ka baxsan labada isbaaro ee yaala magaalooyinka)<br>Hase-yeeshee, dowladda hoose waxay sidoo kale mas'uul ka tahay waxbarashada (dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe,) Baraha Caafimaadka iyo takhaatiirta daawo dhaqameedka. Waxaa jira jahwareer ka jira doorarka iyo mas'uuliyadda adeegga bulshada oo u dhaxeeya dowladda dhexe iyo dowladda hoose | Sharciga L. 7 wuxuu siiyaa degmooyinka in ay bixiyaan waajibaadyadooda iyo mas'uuliyadahooda sharciga ah ee maamulka degmada sida soo socota:<br>- adeegyada bulshada (rugta caafimad, dugsiga hoose iyo biyaha iyo fayodhawrka)<br>- dayactirada iyo dhisidda waddooyinka ku yaala xuduudaha degmooyinka<br>- dhisidda biyo-xireennada u dhaxeeya degmooyinka iyo magaalooyinka | Waxaa jira sii wadaajinta PPP (wadaag dadka iyo dowladda) |
| **Dakhli Qoondaynta iyo Maamulka Dakhliga Degaanka** | Sharciga L. 7 wuxuu qeexay qaab-dhismeedka dakhliga iyo qoondaynta kharashaadka ee u dhaxeeya dowladda hoose iyo dowladda dhexe balse si kasta sharciyo iyo xeerar ayaa lagu tilmaamay sharcigga. hadda la joogo dakhliga dowlada hoose ee Puntland aad ayuu wuxuu ugu xaddidan yahay il dakhli gaar ah ee keentay boqolkiiba waxyar oo ah dakhli marka loo eego baahiyadooda qiyaasta miisaaniyadda | Sharciga L. 7 wuxuu sheegay qaab-dhismeedka dakhliga iyo qoondaynta kharashka dowladda hoose ee u dhaxeeya dowladda dhexe iyo dowladda hoose. Maamulada dakhli ururinta sida suurtagalka ah laguma qeexin sharciga. | --- | Dowladdo hoose waxay leedahay waajibaad ay ku qaadayso canshuur ayada u gaar ah waxayna leedahay waajibaad ay ku maareynayso ayna ugu maamulayso waxqabadyadeeda si madaxbannaan. | |
| **Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha Ka Dhaxeeya:** | Dowladda dhexe waxay qaadaysaa dakhliga ugu badan ee puntland oo ay ku jirto canshuuraha tooska ah iyo canshuuraha aan tooska ahayn iyo noocyada kale ee canshuuraha gobolka oo dhan; wasaaradda waxbarashada waa in ay bixiso si kasta oo ay dowladda u kabto heerka wasaaradeed sida waaxda waxbarashada. Waxaa taasi sii dheer in hadda la joogo miisaaniyadda qaranka lagu muujiyay lacagaha kabka dowladaha ka dhaxeeya ee loogu talogalay kaliya barnaamijyada JPLG ee ah barnaamij hadda la joogo ka socda Puntland. | | | | |
| **Deynta/deynqaadashada qaran hoosaadka** | | Qodobka 35 ee Sharciga L. 7 wuxuu bixiyaa deymaha degaanka iyo kuwa caalamiga ah haddii la ansixiyo | | | |

**Xaaladda Hadda La Joogo**

| | Aragtida guud ee siyaasadda iyo taabogalka siyaasadda | Qorshaha Sharci iyo Dastuurka | Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dowladda Dhexe iyo Nidaaminta | Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dowladda Hoose iyo Nidaaminta | Ka Qaybqaadashada Ururada Bulshada iyo Shirkadaha Gaarka Loo Leeyahay |
|---|---|---|---|---|---|
| Hab-dhismeedka iyo doorka waaxda dadweynaha | Dastuurka | Sharciga L. 7 wuxuu qeexayaa hab dhismeedka gollaha dowladda hoose iyo maamulka | Siyaasadaha wasaaradaha iyo waaxda | Gollaha degmada iyo maamulada | Si buuxda aan loo sameyn |
| Qoondaynta Shaqo iyo Kharash | Sharciga L. 7, balse laguma qeexin ayadoo lagu saleynayo awoodda kala saarista degmada | Dastuurka | -- | | |
| Qoondaynta Ilaha Dakhliga | Sharciga L. 7 | Dastuurka | | | |
| Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha Ka Dhaxeeya | Sharciga L. 7 | | | | |
| Deyn qaadashada Dowladda Hoose iyo Horumarinta Dhismaha | Sharciga L. 7 | | | | |

**Hindiseyaasha Dib-u Habaynta Baahinta Maamulka Maaliyadeed**

| | Aragtida guud ee siyaasadda iyo taabogalka siyaasadda | Qorshaha Sharci iyo Dastuurka | Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dowladda Dhexe iyo Nidaaminta | Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dowladda Hoose iyo Nidaaminta | Ka Qaybqaadashada Ururada Bulshada iyo Shirkadaha Gaarka Loo Leeyahay |
|---|---|---|---|---|---|
| **Hab-dhismeedka iyo doorka waaxda dadweynaha** | | | | | |
| **Qoondaynta Shaqo iyo Kharash** | Dastuulka **Puntland** wuxuu dejiyay aragtida baahinta maamulka iyo shaqooyinkiisa | Dastuurka **Puntland** wuxuu si cad u qeexayaa doorka maamulka heerka gobol iyo kan degmo | | **Sharciga L. 7** wuxuu bixiyaa qaab dhismeedka qoondaynta kharashka iyo dakhliga. | |
| **Qoondaynta Ilaha Dakhliga** | **Sharciga** L. 7 wuxuu amrayaa in degmooyinka ay qaadaan canshuur nooc kasta leh iyo dakhliga kale ee aan canshuurta ahayn ee siyaadada ku ah dakhliga degmada waxayna ka kooban yihiin wax badan sida (ganaaxyada dulsaarka, canshuurta hantida. | **Ayadoo la tixraacayo** dastuurka puntland iyo Sharciga L. 7 wuxuu dhiirigelinayaa in degmooyinka ay noqdaan kuwa isku filan | Ayadoo la tixraacayo Dastuurla Puntland waxaa la tilmaamay in dowladda dhexe iyo dowladda hoose ay leeyihiin doorar kala duwan oo canshuurta ah | **Sharciga L. 7** ma sameynayo kala soocid cad oo u dhaxeeya ujrada lagu bixinayo adeegyada bulshada iyo kuwa dhaqaale iyo qaababka canshuurta ee loogu talogalay dejinta iyo shuruucda sicirada iyo kontoroolidda kuwani. | |
| **Kabka Maaliyadeed ee Dowladaha Ka Dhaxeeya:** | Dastuurka **Puntland** wuxuu qorayaa aragtida iyo ujeeddada baahinta maamulka, kaasi oo la doonayo in uu suurtageliyo in gobolka iyo degmooyinka ay noqdaan kuwa isku filan marka la eego bixinta adeegyadooda. | **Sharciga L. 7 wuxuu bixiyaa** qorshaha loogu talogalay qoondaynta dakhliga iyo kharashka ee u dhaxeeya dowladaha hoose iyo dowladda dhexe | **Sharciga** L. 7 wuxuu amrayaa in degmooyinka ay qaadaan canshuur nooc kasta leh iyo dakhliga kale ee aan canshuurta ahayn | Maamulka adeegyada dadweynha ee lagu qeexay dastuurka puntland doorarka iyo mas'uuliyadaha degmooyinka iyo gobolada marka la eego awoodda maamulka. | |
| **Deyn qaadashada Dowladda Hoose iyo Horumarinta Dhismaha** | | Qodobka 35 ee Sharciga L. 7 wuxuu bixiyaa deymaha degaanka iyo kuwa caalamiga ah haddii la ansixiyo dowladaha hoose | Ma jiro qaab dhismeed hay'adeed ama nidaam shaqeynaya, deymaha dowladaha hoose waxaa ansixiya Wasaaradda Maaliyadda ee loogu talogalay deymaha bangiga dhexe ee loogu talogalay mashaariicda dhismaha | | |

**Falanqeynta SWOT ee Baahinta Maaliyadeed**

| Awoodaha | Daciifnimada |
|---|---|
| **- Dastuurka iyo Qorshaha Sharci ee Sharciga 7 ee loogu talogalay nidaamka maamul baahinta**<br>**-Ka jiritaanka bixinta adeegyada degmooyinka gudahooda** | **-Ma jirto siyaasada guud ee ah baahinta maamulka**<br>**-Ilo dhaqaale xaddidan ee ka jira heerka dhexe ayadoo isha ugu muhiimsan dakhliga ay tahay** |

| | |
|---|---|
| **- shaqada gollayaasha degaanka oo lagu qeexay sharciga 7**<br>**- Mudnaanta sare iyo taageerada loo marayo Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha ee khuseeya Dowladda Hoose (IMCLG)**<br>**- Ku jitaabinta Baahinta Maamulka 3 Degmo ayadoo JPLG bixinayso aasaaska baahinta maamulka maaliyadeed**<br>**- Ka shaqaynta qoondaynta shaqo ee degmada oo ku saleysan qiimeynyada awoodda**<br>**-Daraasado qiimeyn waaxaha ah oo si fiican loo sameeyay ee loogu talogalay baahinta awoodda**<br>**- Kala saarista degmooyinka oo ku saleysan dadweynaha iyo shuruudo kale**<br>**-Qorsheyaal lagu qeexayo xuduudaha degmada sannadka xigga**<br>**-Horumarinta ururka dowladda hoose ee ku metalaya danta dowladaha hoose geeddi-socodka baahinta awoodda**<br>**-Isticmaalka xaddidan ee deynta Bangiga Dhexe ee dowladaha hoose ayadoo oggolaansho laga helayo Wasaaradda Maaliyadda** | **cashuurta alaabaha dibadda laga keeno**<br>**-Kama jiro kab maaliyadeed nidaaamsan dhammaan degmooyinka**<br>**-Degmooyinka oo ka jira shaqaale aan aqoon lahayn**<br>**-Ilo maaliyadeed iyo dakhli ururin xaddidan oo ka jirta degmooyinka**<br>**-sharciyada dowladda hoose ee khuseeya shaqada iyo awoodaha ee aan israacsanayn**<br>**- jahwareer ka jira shaqooyinka bixinta adeegyada ee u dhaxeeya wasaaradaha dowladda dhexe iyo degmooyinka hoose.**<br>**-Doorashooyinka dowladda hoose oo aanan la fulinin**<br>**-Xuduudaha degmada lama qeexin waxaysana ka maarnayn farogelin siyaasadeed**<br>**-Tirakoobka lama dhammeystirin mana jirto diiwaan shacab oo ay heleen dadweynaha badankooda**<br>**-Adeeg gaarsiinta dadweynaha reer guuraaga ah aad ayay u adag tahay**<br>**-Ma jirto qeexitaan cad oo ah qoondaynta shaqo**<br>**- Waxaa loo baahan yahay in badan ee degmooyinka degaanka iyo muwaadiniinta laga qaybgeliyo qeexitaanka yoolalka iyo ujeeddooyinka baahinta maamulka**<br>**- Shaqaalaha laga soo wareejinaya wasaaradaha dhexe ee loo soo wareejinayo degmooyinka lama qeexin**<br>**-Ma jirto istiraatiijiyad lagu gaarsiinayo baahinta maamulka dhammaad degmooyinka** |
| **Fursadaha** | **Halisaha** |
| **- Qeexidda Xuduudaha Degmooyinka**<br>**- Qabashada Doorashooyinka Gollaha** | **- Wasaaradaha dhexe iyo hay’adaha kale ee dowladda oo aan doonaynin in ay baahiyaan shaqooyinka ayna wareejiyaan lacagaha.** |

| | |
|---|---|
| **Degaanka**<br>- **Caddaynta qoondaynta shaqo ee degmada iyo kuwa dowladda dhexe**<br>- **Baahida lagu qeexayo shaqooyinka iyo mas'uuliyadaha heerka gobol**<br>- **Tirakoobka dhammeystiran ee dadweynaha**<br>- **Suurtagalnimada dakhli wadaagidda dowladda dhexe iyo degmooyinka**<br>- **Baahida loo qabo qorshe sharci dheeraad ah ee nidaamka baahinta maamulka ee meelaha qoondaynta dakhliga iyo kharashaadka, iyo kabyada oo ku saleysan shuruud**<br>**-Suurtagalniamda in sare loo qaado ilaha dakhliga iyo awoodda ururinta ee heerarka Degmada a, awoodda xaddidan ee heerarka B iyo C.** | **-ma jiraan doorar iyo mas'uuliyado si cad u qeexan ee canshuuraha labaduba dowladda dhexe iyo dowladda hoose**<br>**-Suurtagalnimada xasilooni la'aan siyaasadeed iyo colaado**<br>**-Diidmada hawlwadeennada in loo wareejiyo maamulada degmada**<br>**-Farqiga ballaaran ee oo u dhaxeeya mushaarada iyo dheefaha ee degmooyinka oo dhan ee aanan la simi karin** |

## *Lifaaqa B: Qorshe Hawleedka Baahinta Awoodda*

Hoos waxaa ku qoran sharaxaad gaaban oo ah yoolalka siyaasadda la soo jeediyay oo ku saleysan la-tashiyada lagu qabtey Puntland sannadkii 2012 iyo Janaayo-Febraayo 2013. Siyaasadda waxay qoraysaa muddada 2013-2020. Marka la gaaro 2020 Dolwadda waxay sameyn doontaa qiimeynta horumarka toddobadii sannadood ee ugu dambeeyay waxayna dib-u sixi doontaa siyaasadda iyadoo lagu saleynayo casharadii hore loo soo bartey.

Tobanka dhacdo taariikheed ugu muhiimsan ee hirgelinta siyaasadda waxaa lagu soo bandhigay jadwalka 6 ee hoos ku qoran.

**Dhacdo Taariikheedka Ugu Muhiimsan ee Higelinta Siyaasadda Baahinta Awoodda**

| L. | Mas'uul ka ah | Dhacdo Taariikheed | Wakhtiga kama dambaysta |
|---|---|---|---|
| 1.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha la xiriira | Dib-u Eegista Dukumeentiga Baahinta Siyaasadda ee ugu dambeeya iyo u gubdinta in la dhaqangeliyo | Nofeembar 2013-Jan 2014 |
| 1.a | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kulanka lix-biloodlaha ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha (IMC) Ayaa Lagu Dhaqangelinayaa Dukumeentiga Baahinta Siyaasadda | Diseembar 2013-Jan 2014 |
| 1.b | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI) | Waxay dhisaysaa Guddiga Xuduudaha si ay u cadeeyaan xuduudaha degmada waxayna shaqada dhammeynayaan Luulyo 2014 | Maarso 2014 |
| 1.c | Go'aanka Dowladda | Dowladda iyo Baarlamaanka waxay dejinayaa wakhtiga lagu qabanayo doorashooyinka gollaha degaanka | Nofeembar 2014 |
| 1.d | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo | IMCLG waxay sameynaysaa hab loogu talogalay qiimeynta awoodaha degmooyinka ee ay ku bixinayaan adeegyada | Maarso- Juun 2014 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Wasaaradaha Waaxaha ee la Xiriirta | | |
| 1.e | Wasaaradda Arrimaha Gudaha /Waasaradaha Waaxaha | Horumarinta ololaha wacyigelinta dadweynaha ee siyaasadda baahinta maamulka, saameynta Guddiga Xuduudaha ay ku yeelanayaan degmooyinka iyo gollayaasha degaanka iyo wakhtiga loo qabtey baahinta maamulka iyo doorashooyinka gollaha degaanka | Janaayo-Diseembar 2014 |
| 2.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha ee la Xiriirta | IMCLG waxay ku amraysaa wasaaradaha waaxaha in ay bilaabaan geeddi-socodka ay ku sameynayaan istiraatiijiyadda baahin maamulka wasaaradooda | Abriil 2014 |
| 2.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay magacaabayaan koox farsamo oo qabanaysa dib-u eegista shaqo ee shaqooyinkooda | Maajo 2014 |
| 2.b | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kulanka lix-biloodlaha ee Guddiga Isku-dhafka ah ee Wasaaradaha si dib-u eegis loogu sameeyo horumarka | Juun 2014 |
| 3.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay horumarinayaan kadibna qaadanayaan Qoraalada Fikradda guud ee ku saabsan Baahinta maamulka wasaaradooda iyo waaxahooda | Luulyo 2014 |
| 3.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha waxay aqoonsanayaan degmooyinka lagu tijaabinayo baahinta maamulka | Agoosto 2014 |
| 3.b | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan dib-u eegista shaqo waxayna aqoonsanayaan shaqooyinka lagu baahinayo habka tijaabada ah | Sibteembar 2014 |
| 3.c | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan Qorshaha Tallaabada ee loogu talogalay Tijaabinta Baahinta Shaqooyinka | Oktoober 2014 |
| 3.d | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan Istiraatiijiyadda Baahinta Maamulka ee Degmooyinka Tijaabada ah | Nofeembar 2014 |
| 3.e | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha waxay dhammeystirayaan dib-u eegista nusqaamaha qorshaha sharci iyo in ay u geeyaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradaha (IMC) si ay dib u eegis ugu sameeyaan | Nofeembar 2014 |
| 3.f | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Kullanka lix-biloodlaha Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxaa dib-u eegis loogu sameynayaa Qorshayaasha Tallaabada iyo dib-u eegista Qaarshaha Sharci | Diseembar 2014 |
| 4.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo wasaaradaha waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha iyo Degmooyinka Tijaabada waxay bilaabayaan hirgelinta shaqooyinka baahinta maamulka | Janaayo 2015 |
| 4.a | Dowladda | Dowladda waxay qaadanaysaa warbixinta guddiga xuduudaha waxayna socodsiinaysaa doorashada gollaha degaanka 2016 | Maarso 2015 |
| 4.b | Dowladda iyo Baarlamaanka | Adopt Changes in Law No. 7 for Assignment of Decentralized Functions | Maajo 2015 |
| 5.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Kullanka lix-biloodle ee Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha oo looga wada hadlayo hirgelinta tijaabada ah | Juun 2015 |
| 5.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha Waaxaha iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay sameynayaan qaacidooyinka qoondaynta ee loogu talogalay kabka maaliyadeed ee loo talogalay degmooyinka shaqooyinka maamulkooda la baahiyay | Luulyo 2015 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 6.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Dib-u eegis in lagu sameeyo Horumarka iyo Qiimeynta Horusocodka ku saabsan Baahinta Maamulka ee Degmooyinka Tijaabada ah | Nofeembar 2015 |
| 6.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradaha Waaxaha | Kullanka lix-biloodlaha Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha oo dib-u eegis loogu sameynayo horusocodka awood baahinta | Diseembar 2015 |
| 7.0 | Dowladda | In ay Diyaariso ayna Qabto Doorashooyinka Gollaha Degaanka | Janaayo-Juun 2016 |
| 7.a | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Guddiga Adeegyada Shacabka | Qiimeynta awooda hay'adeed iyo qorshaynta heerka degmo. Shaqaalaha degmo kasta oo dib loo kala saarayo ayadoo la eegayo shaqooyinka bixinta adeegyada (2 marxaladood) | Juun 2015 / Dis. 2017 |
| 8.0 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (MOI) | Qoridda iyo ku boorrinta xeer-hoosaad ka codsanaya dhammaan degmooyinka in ay hirgeliyaan geeddi-socodka ka warbixinta, la-xisaabtanka iyo qorshaynta ka qaybqaadashada (sida PEM kasta) | Diseembar 2014 |
| 9.0 | Wasaaradaha Waaxaha | Wasaaradaha waaxaha waxay ugu diyaarinayaan khubaro heer degmo ah gollaha degmada ujeeddooyin qorshayn oo la xiriira waaxdooda (ama khubaro heer gobol ama heer dhexe ah ayadoo la eegayo awoodooda) | Diseembar 2014 |
| 10.0 | Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka | Dib-u eegista muddada dhexe ee hirgelinta siyaasadda | Diseembar 2017 |

Sida jadwalka sare lagu tusmeeyay, kullanka Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha ee uu shir guddoominayo Madaxweyne Ku Xigeenka oo loogu wada hadlaya kadibna lagu ayiday geeddi-socodka ayaa laga horumarinayaa dhacdo taariikheed kasta ee weyn.

Waxaa raaca hirgelinta dhammaan dhinacyada baahinta maamulka ee xagga sare lagu soo xusey, Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxay qabanayaan qiimeyn muddo dhexe ah. Ujeeddada qiimeynta waxay noqonaysaa in la qiimeeyo xaaladda iyo isbedelada la sameeyay iyo in la bixiyo talooyinka loogu talogalay isku hagaajinta. Dib ugu noqoshada suurtagalka ah ee habka ayaa sidaas darteed laga hirgelinayaa qaybta dambe ee muddada qorshe hawleedka oo ku saleysan talooyinka dib-u eegista.

Dhacdo taariikheed faahfaahsan oo loogu talogalay baahinta maamulka waaxyada ayaa laga helayaa Lifaaqa C.

***Xukun-wadaajinta Iyo kala saarista degmada***

Geeddi-socodka baahinta maamulka waaxyada waxaa si tartiib ah loogu bilaabayaa waaxyada muhiimka ah ee bixinaya aadeegyada aasaasiga kadibna waxaa muddo kadib loo gudbayaa waaxyada kale. Shanta waaxood ee u adeegaya sida aasaaska wareegga koowaad ee dib u habeynta baahinta maamulka ee u deggan siyaasaddan. Waxay kala yihiin:

1) Waddooyin
2) Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda (oo ka mid ah khashinka adkaha ah)
3) Waxbarashada
4) Caafimaadka
5) Maareynta khayraadka dabiiciga ah

Kuwan soo socda waxay sharaxaad gaaban ka bixinayaan adeegyada ay hirgelinayaan gollayaasha degmada muddo aan ka dambeyn 2020. Gollayaasha degmada waa in isla wakhtigaasi ku soo wareejiyaan dhammaan adeegyada kale shantan waaxood waaxyada wasaaradaha si loo hirgeliyo muddo aan ka dambeyn 2020. MOINS iyo wasaaradaha waaxaha waxay ka hawlgali doonaan daraasada sharciyada iyo xeerarka jira si ay u

qiimeeyaan kala duwanaanshaha u dhaxeeya kuwani iyo siyaasaddan waxayna u hagaajinayaan sida ku habboon. Tani waxaa la qaban doonaa ayadoo taageero laga helayo Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha.

Fadlan ogsoonow in awoodda degmada lagu tilmaamay inay tahay Darajada C aysan hadda la joogo ku filnayn in ay qaadato qorsheyta dowladda hoose iyo hirgelinta waxqabadyada oo gooni ah. Sidaas awgeed, qorshe hawleedka wuxuu la xiriiraa degmooyinka lagu timaamay kaliya Darajada A iyo B.

Waddooyin

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka A: Marka laga reebo waddooyinka waaweyn (waddooyinka Halbawlaha ah) ee u dhaxeeya degmooyinka, dhammaan waddooyinka, waxaa qorsheynaya, qiimeynaya kadibna hirgelinaya gollaha degmada.

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka B: waddooyinka farcama iyo waddooyinka labaad waxaa qiimeynaya, qorsheynaya kadibna hirgelinaya gollayaasha degmada.

Dhismooyinka waddooyinka lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qawaaniinta wax soo-iibsiga.

Wasaaradda heerka dhexe waxay mas'uul ka noqonaysaa xaqiijinta tayada dhismaha, degmadana waxay u soo gudbinaysaa dhammaan qorsheyaasha wasaaradda la xiriirta si farsamo ahaan loo ansixiyo kahor dhisidda.

Dhammaan shaqooyinka kale waxaa laga hirgelinayaa heerka Wasaaradda.

Dowladda Puntland waxay ka shaqeynaysaa in ay: (1) sameyso qorshe faahfaahsan ee loogu talogalay hanaanka xukun-wadaajinta ee laantan ayadoo la tixgelinayo awoodaha loo baahan yahay, khadadka ka warbixinta iyo la-xisaabtanka, hubinta tayada, kababka maaliyadeed iyo geeddi-socodyada waxa soo-iibsiga iyo hanti dhawrka, iyo (2) dib ugu noqoshada sharciyada iyo xeerarka si loo gaaro ujeeddadan 2020.

Biyaha, Fayodhawrka iyo Nadaafadda (oo ka mid ah khashinka adkaha ah)

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saaridda degmooyinka A: Degmooyinka A waxay mas'uul ka noqonayaan qorshayna, qiimeynta kharashka iyo hirgelinta dhammaan baraha biyaha dadweynaha (degaamada dadweynaha, dugsiyada, dhismooyinka dadweynaha, bukaan eegtooyinka caafimaadka iwm.), biyo gelinta, tasiilaadyada fayodhawrka dadweynaha, xarumaha caafimaad, dhismayaasha dadweynaha iyo goobaha sidoo kale bulaacadaha.

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka B: Baro biyoodka dadweynaha ee ku yaala dhismeyaasha (iyo dibadaha dugsiyada iyo rugaha caafimaadka) waxaa qorsheynaya, qiimeynaya kadibna hirgelinaya gollaha degmada.

Dhismooyinka biyaha iyo fayowdharka waxaa lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qaanuunada wax soo-iibsiga ee Puntland sida hadda la joogo xaaladu tahay.

Wasaaradda heerka dhexe waxay mas'uul ka noqonaysaa hubinta tayada dhismaha, degmadana waxay u soo gudbinaysaa dhammaan qorsheyaasha wasaaradda la xiriirta si farsamo ahaan loo ansixiyo kahor dhisidda.

Dhammaan shaqooyinka kale waxaa laga hirgelinayaa heerka dowladda dhexe.

Dowladda Puntland waxay ka shaqeynaysaa in ay: (1) sameyso qorshe faahfaahsan ee loogu talogalay hanaanka xukun-wadaajinta ee waaxdan ayadoo la tixgelinayo awoodaha loo baahan yahay, khadadka ka warbixinta iyo la-xisaabtanka, hubinta tayada, kababka maaliyadeed iyo geeddi-socodyada wax soo-iibsiga iyo hanti dhawrka, iyo (2) dib ugu noqoshada sharciyada iyo xeerarka si loo gaaro ujeeddadan 2020.

Maareynta Qashin Adkaha

Dhammaan degmooyinka (ayadoo la eegayn kala saaristooda) waxay mas'uul ka noqonayaa qorsheynta, qiimeynta, iyo hirgelinta mashruuca maareynta qashin adkaha degmooyinkooda oo ay ka mid tahay qashid qaadidda, soo daadinta wasakhda, kala soocidda tasiilaadyada nadiifinta iyo xoorista. Adeegga waxaa lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qawaaniinta iibka Puntland.

Waxbarashada

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka A (ma jiri doonta xukun-wadaajinta Waaxda waxbarashada ee loogu talogalay degmooyinka darajada B kahor 2020): Degmooyinka waxay mas'uul ka noqonaysaa qorshaynta goobta, qiimeynta iyo hirgelinta iyo maamulidda dhammaan dugsiyada hoose ee waxbarashada ee dadweynaha (marka laga reebo shaqaaleynta macamiinta iyo mushaaraadka). Tani waxaa ka mid ah qorsheynta goobta, xajmiga iwm. (ayadoo la tixraacayo heerarka u dejisan Wasaaradda Waxbarashada) sidoo kale hirgelinta iyo bixinta shaqaale taageero ayadoo la tixraacayo Siyaasadda Waxbarashada Puntland. Waxaa intaasi dheer, degmada waxay mas'uul ka noqonaysaa qorsheynta goobta iyo ansxinta dugsiyada hoose (manhajka iyo tayada waxay sii ahaanayaan mas'uuliyadda Wasaaradda Waxbarashada).

Dhismaha dugsiga waxaa lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qawaaniinta wax soo-iibsiga.

Wasaaradda waxbarashada waxay mas'uul ka noqonaysaa hubinta tayada qorsheynta dugsiga, dhisidda dugsiga, iyo hirgelinta waxbarashada. Degmada waxay u gudbinaysaa dhammaan qorsheyaasha wasaaradda si farsamo ahaan loo soo axsixiyo kahor dhisidda.

Dhammaan shaqooyinka kale waxaa laga hirgelinayaa heerka dowladda dhexe.

Dowladda Puntland waxay ka shaqeynaysaa in ay: (1) sameyso qorshe faahfaahsan ee loogu talogalay hanaanka xukun-wadaajinta ee waaxdan ayadoo la tixgelinayo awoodaha loo baahan yahay, khadadka ka warbixinta iyo la-xisaabtanka, hubinta tayada, kababka maaliyadeed iyo geeddi-socodyada wax soo-iibsiga iyo hanti dhawrka, iyo (2) dib ugu noqoshada sharciyada iyo xeerarka si loo gaaro ujeeddadan 2020.

Caafimaadka

Yoolka 2020 ee loogu talogalay kala saarista degmooyinka A iyo B: Degmooyinka waxay mas'uul ka noqonayaa qorsheynta goobta (habka qaabeynta wuxuu noqonayaa hab waafaqsan siyaasadaha Wasaaradda Caafimaadka), qiimeynta, iyo hirgelintya iyo maamulidda bukaan-eegtooyinka caafimaadka hooyada iyo rugaha caafimaadka aasaasiga ah. Tani waxaa ka mid ah qorsheynta goobta, xajmiga iwm. sidoo kale hirgelinta iyo bixinta shaqaalaha ayadoo la tixraacayo Siyaasadda Caafimaadka Puntland. Waxaa intaasi dheer, in degmada ay la wareegayso qorsheynta goobta iyo ansxinta xarumaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay (hubinta tayada waxay sii ahaanaysaa mas'uuliyadda Wasaaradda Waxbarashada).

Dhismaha rugta caafimaadka waxaa lagu bixin karaa qandaraas hoosaad ayadoo la tixraacayo qawaaniinta wax soo-iibsiga ee Puntland.

Wasaaradda heerka dowladda dhexe waxay mas'uul ka noqonaysaa hubinta tayada qorsheynta rugta caafimaadka, dhisidda, iyo hirgelinta daryeelka caafimaad. Degmada waxay u gudbinaysaa dhammaan qorsheyaasha wasaaradda si farsamo ahaan loo soo axsixiyo kahor dhisidda.

Dhammaan shaqooyinka kale waxaa laga hirgelinayaa heerka dowladda dhexe.

Dowladda Puntland waxay ka shaqeynaysaa in ay: (1) sameyso qorshe faahfaahsan ee loogu talogalay hanaanka xukun-wadaajinta ee waaxdan ayadoo la tixgelinayo awoodaha loo baahan yahay, khadadka ka warbixinta iyo la-xisaabtanka, xaqiijinta tayada, kababka maaliyadeed iyo geeddi-socodyada wax soo-iibsiga iyo hanti dhawrka, iyo (2) dib ugu noqoshada sharciyada iyo xeerarka si loo gaaro ujeeddadan 2020.

Maareynta Khayraadka Dabiiciga ah

Maareynta khayraadka dabiiciga ah waxay sii ahaanaysaa shaqada wasaaradaha dowladda dhexe ilaa laga gaaro wakhti laga sameynayo dib-u eegista shaqada iyo dib-u habaynta doorka iyo mas'uuliyada wasaaradaha ugu muhiimsan ee la macaamilaya maareynta khayraadka dabiiciga ah lana dhammeystiro. Wakhtigaasi, aqoonsiga shaqooyinka loo daadejin karo heerka dowladda ayaa la fulin karaa bixinta adeegyada la baahiyayna waxaa lagu tijaabin karaa heerarka degmada.
Hanaanka qorshaynta la soo jeediyay.
Saameynta shanta waaxood ee lagu beegsanayo siyaasadda muddada 2013-20 iyo qaybaha kala duwan ee degmada waxaa lagu soo bandhigay jadwalka 1 ee hoos. Si loo hubsado in awoodda ay dhaqangasho kaliya degmooyinka loo arko sida A iyo B ayaa la beegsanayaa inta lagu guda jiro muddada siyaasaddan.

Geeddi-socodka qorsheynta loogu talogalay shanta waaxood ee lagu beegsanayo siyaasaddan

| Waaxda | Degmada A | Degmada B |
|---|---|---|
| Waddooyinka | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan dhismaha waddooyinka degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee qorsheyaasha | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan gaaridda dhismaha waddooyinka labaad ee degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee qorsheyaasha |
| Biyaha iyo fayadhowrka | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan dhismaha biyaha iyo fayodhawrka degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee qorsheyaasha | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan waxqabadyada biyaha iyo fayodhawrka guud (marka laga reebo xarumaha caafimaadka iyo dugsiga) ee degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee qorsheyaasha |
| Qashin Adkaha | Degmada waa in ay qorshaysaa, qiimeysaa kadibna hirgelisaa | Degmada waa in ay qorshaysaa, qiimeysaa kadibna hirgelisaa |
| Waxbarashada | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan waxbarashada dugsiga hoose ee degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Wasaaradda waa in ay qabataa dhammaan qorshaynta ugu dambeysa iyo hirgelinta |

| | | |
|---|---|---|
| | qorsheyaasha | |
| Caafimaadka | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Degmada waa in ay mudnaan siisaa ayna sameysaa qorsheynta miisaaniyadda iyo maalgelin ee loogu talogalay dhammaan dhismaha iyo hawlgalka caafimaadka aasaasiga ah ee degmada. Wasaaradda waa in ay taageerto aragtida farsamo ee qorsheyaasha | Degmada waa in ay gaartaa qorshe ku saleysan qorsheyaasha waaxda iyo la-tashiga bulshada. Wasaaradda waa in ay qabataa dhammaan qorshaynta ugu dambeysa iyo hirgelinta |
| Maareynta Khayraadka Dabiiciga ah | Qorsheynta baahinta kadib Dib-u eegista iyo Dib-u habeynta Shaqada Wasaaradda Dhexe ee wasaaradaha dhexe oo dhan. | Qorsheynta baahinta kadib Dib-u eegista iyo Dib-u habeynta Shaqada Wasaaradda Dhexe ee wasaaradaha dhexe oo dhan. |

Degmo kasta waxaa laga doonayaa in ay raacdo geeddi-socodkan. Tallaabooyinka ugu muhiimsan ee loo baahan yahay waxaa lagu qoray sanduuqa hoose:

Tallaabada:

- Degmo kasta waxay bilaabaysaa geeddi-socodka qorshayn oo ku saleysan geeddi-socodka ku qoran siyaasaddan.
- Degmooyinka waxay adeegsadaan ayna hirgelinayaan geeddi-socodka qorsheynta Maamulka Kharashka Dowladda(PEM) waxay hubinayaan waafajinta qorsheyaasha waaxda iyo dowladda.

Qorsheynta

Si ay ula socoto shuruudda siyaasadda ee geeddi-socodka qorsheynta ka qaybgalka xoogan, hubinta tayada iyo talooyinka farsamo ee la xiriira geeddi-socodka qorsheynta, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wasaaradaha waaxaha iyo degmooyinka waxay u baahan yihin in ay ka wada qaybqaadaan dejinta nidaamka fududeynaya geeddi-socodkan. Waxqabadyada waxay u baahanayaan in ay naqshadeeyaan ayna dib ugu noqdaan sharciyada jira, abuuridda xiriiro adag oo u dhaxeeya heerarka kala duwan ee dowladda, iyo sare u qaadidda isu duwidda korortay iyo ka faa'iideysiga khibradda farsamo eegeeddi-socodka qorsheynta Tallaabooyinka ugu muhiimsan ee loo baahan yahay waxaa lagu qoray sanduuqa hoose:

Tallaabada:

- Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa in ay qorto ayna ku boorriso xeer-hoosaad ka codsanaya dhammaan degmooyinka in ay hirgeliyaan geeddi-socodka ka warbixinta, la-xisaabtanka iyo qorsheynta ka qaybqaadashada dhammaan muwaadiniinta
- Wasaaradaha waaxaha waa in ay u diraan tusmooyin iyo qorsheyaal loogu talogalay adeegyada laga hirgelinayo heerka degmo dhammaan degmooyinka
- Wasaaradaha waaxaha waxay ugu diyaarinayaan khubaro heer degmo iyo/ama gobol ah gollaha degmada ujeeddooyin qorsheyn oo la xiriira waaxdooda (ama khubaro heer gobol ama heer dhexe ah ayadoo la eegayo awoodooda)

Baahinta maamulka maaliyadeed

Si looga soo baxo mabda'a siyaasadda ee ah in maalgelinta bixinta adeegyada ay raacayso shaqada tiro waxqabadyo ah loo baahan yahay in la qabto. Adeegsiga qiimeynta iyo qaabeynta dakhliga iyo qaacido qoondayn dib loo eegay ayaa loo baahan yahay.

Adeegyada waddooyinka, biyaha iyo fayodhawrka, waxbarashada, maareynta qashin adkaha, iyo caafimaadka ee xagga sare lagu soo qoray, maalgelinta adeegyadan la aqoonsaday waxaa loo qoondaynayaa degmooyinka, ayadoo maalgelinada dhammaan adeegyada ka harsan shantan waaxood loo qoondaynayo waaxda wasaaradda.

Intaa waxaa dheer, in dhammaan maalgelinada deeqbixiyeyaasha ee loogu talogalay adeegyada lagu sharxay siyaasada la hirgelinaya ayadoo la tixraacayo qaybinta shaqada ee u dhaxeysa heerarka kala duwan ee Dowladda Puntland.

Tallaabooyinka ugu muhiimsan ee loo baahan yahay waxaa lagu qoray sanduuqa hoose:

Tallaabada:

- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha waxay wayddiisanayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha in ay sameyso hawlo lagu qaabeynayo dakhliga iyo qiimeynta oo leh talooyin ku saabsan sida loo xaqiijinayo in lacagaha ay raacaan shaqo ay taageerayaan Guddiga Isku-dhafka iyo/ama gollaha wasiirada
- Qaacidada qoondaynta waa in dib loo eego ayadoo la tixraacayo isbedelada siyaasadda
- Dhammaan deeqbixiyeyaasha waa in ay u bixiyaan deeqaha bixinta adeegyada ayadoo la tixraacayo qaybinta shaqada u dhaxeysa heerarka kala duwan ee dowladda ee lagu qoray siyaasaddan

Isbedelada awoodda

Si loo hubsado in awoodda degmooyinka suurtageliso hirgelinta siyaasaddan, Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay eegaysaa kala saarista shaqaalaha ee degmo kasta ee waafaqsan bixinta adeegga. Tani waxaa lala wareegayaa ayadoo lala kaashanayo shaqada loo qorsheeyay dib-u habaynta adeegga shacabka. Dib-u kala saarista waxay tixgelinaysaa awoodaha loo baahan yahay ayadoo la ifinayo kala qabysanaanta shaqada ee cusub ee lagu qoray qorshe hawleedkan iyo shuruudaha tixraaca loo baahan yahay si loola wareego hawlaha la sheegay. Dib u kala saarista waxay kaliya la xiriiraysaa shaqaalaha si ay u fuliyaan jagooyinka gollayaasha degmada ayagoo hoostagaya awoodda Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Wasaaradaha waaxaha ayaga ahaan waxay ka qaybgalayaan dib u kala saarista la xiriirta siyaasaddan haddii sidaasi loo baahdo.

Shuruudaha shaqaalaha ee la wanaajiyay waxay ka ra’yi bixinayaa hawsha qiimeynta adeegga lacagahana waxaa loo qoondaynayaa sida ku habboon ee waafaqsan qaacidda qoondaynta dib loo eegay.

Intaa waxaa sii dheer, qorsheyaasha horumarinta awood waxaa sameynaya kadibna hirgelinaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo kaashanaysa gollayaasha degmada si ay ula wareegaan horumarinta awoodda hay’adeed ee dhammaan degmooyinka darajada A iyo B (tani waxay ku saleysnaanaysaa qorsheyaasha jira iyo casharada laga bartay hindiseyaasha hoos imaanaya JPLG).

Tallaabooyinka ugu muhiimsan ee loo baahan yahay waxaa lagu qoray sanduuqa hoose:

Tallaabada:

- Wasaaradda Arrimaaha Gudaha waxay dib u kala saaraysaa shaqaalaynta degmo kasta ayadoo la tixraacayo shaqada bixinta adeegyada
- Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo degmooyinka waa in ay qaadaan qiimeynta awoodda hay'adeed, qorsheynta horumarinta awoodda eee degmooyinka darajada A iyo B (ayagoo taageero loo soo marsiinaya JPLG)

## *Annex C: Dhacdo Taariikheedyada Waaxda*

Jadwalka hoose waxaa loogu soo bandhigay tallaabooyinka muhiimka ah ee hirgelinta dhacdo taariikheedyada oo qaab warbixin gaaban ah.

| L. | Dhacdo Taariikheed |
|---|---|
| 1.0 | Xeerarka qorshaynta dib loo eegay ee ka turjumaya isbedelka qaybinta hawsha ee u dhaxeeya heerarka degmooyinka iyo dowladda dhexe ee la soo gabagabeeyay eena la taageeray:<br>- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC) waa in uu ka codsadaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha in ay biloowdo geeddi-socodka hagaajinta Maareynta Kharashka Dadweynaha (PEM) ee jirta si loo tixgeliyo wareejinta hawlaha ee shanta waaxood ee ku qoran dukumeentigan<br>- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC) waa in uu kala hadlaa qorshayaasha wasaaradaha oo dhan<br>- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC) waa in uu taageero qorshayaasha |
| 2.0 | Waddooyinka: qorshaynta dib loo eegay oo laga higeliyay dhammaan heerar kasta (ayadoo degmooyinka iyo wasaaradaha dhexe ay tixgelinayaan qabinta hawsha):<br>- Waaxda Wasaaradda waa in ay dib u eegto nidaamyada gudaha iyo habraacyada si ay uga turjunto isbedelka ka yimid hirgeliyaha la talinta ee hawlaha lagu soo wareejiyay degmada<br>- Degmada A iyo B waa in ay hubsadaan in awoodaha ay dhaqan galeen si loo hirgeliyo waxqabadyada lagu soo wareejiyay (tusaale, dib u habeynta shaxda ururka iyo in ay soo kiraystaan awoodaha farsamo ee loo baahan yahay<br>- Degmada in ay ka joogsato hawlaha qorshaynta ee waaxda ee aanan lagu soo wareejinin<br>- Waaxda wasaaradda waa in ay dib ugu noqoto siyaasadaha iyo xeerarka sidaas awgeed waxay ka turjumayaan qaybinta shaqooyinka ee cusub |
| 3.0 | Biyaha iyo fayadhowrka: qorshaynta dib loo eegay oo laga higeliyay dhammaan heerar kasta (ayadoo degmooyinka iyo wasaaradaha dhexe ay tixgelinayaan qabinta hawsha):<br>- Waaxda Wasaaradda waa in ay dib u eegto nidaamyada gudaha iyo habraacyada si ay uga turjunto isbedelka ka yimid hirgeliyaha la talinta ee hawlaha lagu soo wareejiyay degmada<br>- Degmada A iyo B waa in ay hubsadaan in awoodaha ay dhaqan galeen si loo hirgeliyo waxqabadyada lagu soo wareejiyay (tusaale, dib u habeynta shaxda ururka iyo in ay soo kiraystaan awoodaha farsamo ee loo baahan yahay<br>- Degmada in ay ka joogsato hawlaha qorshaynta ee waaxda ee aanan lagu soo wareejinin<br>- Waaxda wasaaradda waa in ay dib ugu noqoto siyaasadaha iyo xeerarka sidaas awgeed waxay ka turjumayaan qaybinta shaqooyinka ee cusub |
| 4.0 | Caafimaadka: qorshaynta dib loo eegay oo laga higeliyay dhammaan heerar kasta (ayadoo degmooyinka iyo wasaaradaha dhexe ay tixgelinayaan qabinta hawsha):<br>- Waaxda Wasaaradda waa in ay dib u eegto nidaamyada gudaha iyo habraacyada si ay uga turjunto isbedelka ka yimid hirgeliyaha la talinta ee hawlaha lagu soo wareejiyay degmada<br>- Degmada A iyo B waa in ay hubsadaan in awoodaha ay dhaqan galeen si loo hirgeliyo waxqabadyada lagu soo wareejiyay (tusaale, dib u habeynta shaxda ururka iyo in ay soo kiraystaan awoodaha farsamo ee loo baahan yahay<br>- Degmada in ay ka joogsato hawlaha qorshaynta ee waaxda ee aanan lagu soo wareejinin<br>- Waaxda wasaaradda waa in ay dib ugu noqoto siyaasadaha iyo xeerarka sidaas awgeed waxay ka turjumayaan qaybinta shaqooyinka ee cusub |
| 5.0 | Waxbarashada: qorshaynta dib loo eegay oo laga higeliyay dhammaan heerar kasta (ayadoo degmooyinka iyo wasaaradaha dhexe ay tixgelinayaan qabinta hawsha):<br>- Waaxda Wasaaradda waa in ay dib u eegto nidaamyada gudaha iyo habraacyada si ay uga turjunto isbedelka ka yimid hirgeliyaha la talinta ee hawlaha lagu soo wareejiyay degmada<br>- Degmada A iyo B waa in ay hubsadaan in awoodaha ay dhaqan galeen si loo hirgeliyo waxqabadyada lagu soo wareejiyay (tusaale, dib u habeynta shaxda ururka iyo in ay soo kiraystaan awoodaha farsamo ee loo baahan yahay<br>- Degmada in ay ka joogsato hawlaha qorshaynta ee waaxda ee aanan lagu soo wareejinin<br>- Waaxda wasaaradda waa in ay dib ugu noqoto siyaasadaha iyo xeerarka sidaas awgeed waxay ka turjumayaan qaybinta shaqooyinka ee cusub |
| 6.0 | Ansixinta iyo hirgelinta qaacidada qoondaynta baahinta maamulka:<br>- Wasaaradda maaliyadda oo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta iyo Horumarinta iyo Wasaaradda |

| | |
|---|---|
| | Arrimaha Gudaha ayaa sameynaya qaaciddada qoondaynta deeqda ee loogu talogalay dowladaha hoose ee ka turjumaya qaybinta hawsha waxqabad ee cusub<br>- Qaaciddada qoondaynta cusub waa in ay ka doodaan ayna aqbalaan Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha(IMC) |
| 7.0 | <u>Shaqaalaha loogu talogalay degmo kasta oo dib loo qaybiyay ayadoo la eegayo hawlaha bixinta adeegyada:</u><br>- Wasaaradda Arrimaha Gudaha in ay dib u kala qaybiso waxyaabaha looga baahan yahay degmooyinka A iyo B si loo daboolo baahiyada awooda ee qaybinta hawsha waxqabad kasta<br>- Guddiga Adeegyada Shacabka oo isku xiriirinaya baahiyada shaqaale ee cusub iyo heerka degmada<br>- Waaxyada Wasaaradaha oo dib ugu noqonaya baahiyada shaqaale ayadoo la tixgelinayo hawlaha cusub/dib loogu noqday sida natiijada xukun-wadaajinta |
| 8.0 | <u>Qoridda iyo ku boorrinta xeer-hoosaadka oo ka codsanaya dhammaan degmooyinka in ay hirgeliyaan geeddi-socodka ka warbixinta, la-xisaabtanka iyo qorsheynta ka qaybqaadashada (sida PEM kasta):</u><br>- Guddiga Isku-dhafka ah ee Wasaaradaha (IMC ) waxay wayddiisanayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha in ay diyaariso qoraalka xeer-hoosaadka<br>- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC ) waxay ka hadlayaan kadibna ay taageerayaan xeer-hoosaadka<br>- Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay kormeeraysaa hirgelinta xeer-hoosaadka |
| 9.0 | <u>Waaxyada wasaaradaha waxay ugu diyaarinayaan khubaro heer degmo ah gollaha degmada ujeeddooyin qorsheyn oo la xiriira waaxdooda (ama khubaro heer gobol ama heer dhexe ah ayadoo la eegayo awoodooda):</u><br>-Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC) waa in uu wayddiiso waaxaha wasaaradaha in ay ugu diyaariyaan la taliyayaal degmooyinka hawl kasta |
| 10.0 | <u>Dib-u eegista muddada dhexe ah ee hirgelinta siyaasadda</u><br>- Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradaha (IMC) wuxuu sameynayaa dib-u eegis muddo dhexe ah. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay fududeynaysaa geeddi-socodka |